Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 12aad** **Muqdisho, 21 DECEMBER 2025** **Lr.3**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

**BILAHA**

# JULY-DECEMBER

# 2025

Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 12aad** **Muqdisho, 21 DECEMBER 2025** **Lr.3**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

# BILAHA

# JULY-DECEMBER

# 2025

# TUSMO

**SHARCI LR. 41** Taariikh: 22/10/2025
SHARCIGA AXDIGA AFRICA EE XUQUUQDA IYO BARAARAHA CARUURTA Bog 1
**SHARCI LR. 42** Taariikh: 03/12/2025
SHARCIGA BARAKACAYAASHA GUDAHA Bog 26
**QARAAR 001/10/B11-2025** Taariikh: : 19/10/2025
DOORASHADA XILDHIBAANADA SOOMAALIYA KU MATALAYA BAARLAMAANKA BARIGA AFRICA 2022-2027 Bog 49
**XEER MADAXWEYNE LR. 501** Taariikh: 24/07/2025
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 55
**XEER MADAXWEYNE LR. 502** Taariikh: 24/07/2025
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 56
**XEER MADAXWEYNE LR. 506** Taariikh: 25/07/2025
XIL KA QAADIS GUDOOMIYE KU-XIGEENKA HOWLAHA GUUD EE GOBALKA BENAADIR & MAGACABIS GUDOOMIYE KU-XIGEENKA CUSUB EE HOWLAHA GUUDGOBALKA BENAADIR Bog 57
**XEER MADAXWEYNE LR. 508** Taariikh: 03/08/2025
XIL KA QAADIS MAAREEYIHII DEKADDA MUQDISHO & MAGACAABIS MAAREEYAHA CUSUB EE DEKADDA MUQDISHO Bog 58
**XEER MADAXWEYNE LR. 509** Taariikh: 05/08/2025
MAGACAABIS LA-TALIYAHA AMNIGA QARANKA Bog 59
**XEER MADAXWEYNE LR. 513** Taariikh: 09/08/2025
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 60
**XEER MADAXWEYNE LR. 535** Taariikh: 23/08/2025
MAGACAABIS XUBIN KA MID NOQONAYSA GOLAHA DHAQAALAHA QARANKA Bog 61
**XEER MADAXWEYNE LR. 537** Taariikh: 02/09/2025
XIL KA QAADIS SII-HAYAH GUDOOMIYIHII HORE EE JAAMACADDA UMADDA SOOMAALIYEED & MAGACAABISTA GUDOOMIYAHA CUSUB EE JAAMACADDA UMADDA SOOMAALIYEED Bog 62
**XEER MADAXWEYNE LR. 539** Taariikh: 02/09/2025
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 63
**XEER MADAXWEYNE LR. 540** Taariikh: 11/09/2025
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 64
**XEER MADAXWEYNE LR. 543** Taariikh: 20/09/2025
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 65
**XEER MADAXWEYNE LR. 545** Taariikh: 01/10/2025
DALLANSIIN SARKIIL XIGEENO Bog 66
**XEER MADAXWEYNE LR. 546** Taariikh: 04/10/2025
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 67
**XEER MADAXWEYNE LR. 540** Taariikh: 09/10/2025
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 68
**XEER MADAXWEYNE LR. 574** Taariikh: 08/10/2025

MAGACAABIS XISAABIYAHA GUUD EE DOWLADDA Bog 69
**XEER MADAXWEYNE LR. 601** Taariikh: 25/10/2025
MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE SIYAASADDA AHNA ISKU-DUWAHA XAFIISKA ISKU-DUWIDDA BARNAAMIJKA SIYAASSEEDKA MADAXWEYNAHA J.F.S Bog 70
**XEER MADAXWEYNE LR. 602** Taariikh: 28/10/2025
MAGACAABIS ERGAY GAARKA AH EE KA HORTAGGA IYO LA-DAGAALANKA FIKRADAHA XAGJIRKA AH EE RABSHADAHA WATA (PCVE) Bog 71
**XEER MADAXWEYNE LR. 605** Taariikh: 05/11/2025
MAGACAABIS NOOTAAYO Bog 72
**XEER MADAXWEYNE LR. 613** Taariikh: 03/12/2025
MAGACAABIS MAAREEYAHA GUUD EE HAY'ADDA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA Bog 73
**XEER MADAXWEYNE LR. 614** Taariikh: 03/12/2025
MAGACAABIS XUBNAHA GUDDIGA MADAXA BANNAAN EE XUQUUQUL INSAANKA Bog 74
**XEER RA'IISUL WASAARE LR.184** Taariikh: 16/08/2025
XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHIRKADAHA SHAQA-SIINTA GAARKA AH Bog 75
**XEER RA'IISUL WASAARE LR.185** Taariikh: 02/09/2025
XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA HABRAACA U QEYBSANAYAASHA ARRIMAHA DIFAACA Bog 113
**XEER RA'IISUL WASAARE LR.186** Taariikh: 27/09/2025
XEER: QARAARKA GOLAHA WASIIRADDA EE GUNAANADKA XILKA XEELDHEERAHA MADAXA BANNAAN EE XAALADDA XUQUUQUL INSAANKA SOOMAALIYA Bog 123
**XEER RA'IISUL WASAARE LR.185** Taariikh: 26/10/2025
XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA MACHADKA SARE EE DARAASHAADKA AMNIGA IYO ISTARAATIIJIYADDA Bog 126

**SHARCI LR.41** **TAARIIKH: 22-DA OKTOOBAR 2025**

**SHARCIGA AXDIGA AFRIKA EE XUQUUQDA IYO BARAARAHA CARUURTA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka $87^{aad}$, Faqradda $1^{aad}$ iyo Faqradda $2^{aad}$ ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka $82^{aad}$, Faqradda $3^{aad}$ ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka $90^{aad}$, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/778/B11/25**, ku taariikheysan **21/10/2025**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Axdiga Afrika ee Xuquuuqda iyo Baraaraha Caruurta. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka $1^{aad}$**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Axdiga Afrika Ee Xuquuqda Iyo Baraaraha Caruurta.

**Qodobka $2^{aad}$**

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRAHA GUUD
DIIWAAN NO: Han-985-25
TAARIIKH: 13-12-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAALIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**Madaxweynaha J. F.S.**

# Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha**

# Axdiga Afrika ee Xuquuqda iyo Baraaraha Carruurta

Muqdisho - Soomaaliya
August 2023

# ARAR

Dawladaha Xubnaha ka ah Ururka Midnimada Afrika, ee Qeybta ka ah Axdigan hadda jira ee lagu magacaabo "Axdiga Afrika ee Xuquuqda iyo Baraaraha Carruurta," ayaa iyagoo:

**TIXGALINAYA** in Axdiga Ururka Midnimada Afrika uu aqoonsado ahamiyadda sarreynta xuquuqda aadanaha iyo in Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo dadka lagu baaqay la iskuna raacay in ruux kasta uu leeyahay dhammaan xuquuqda iyo xorriyadaha lagu aqoonsaday laguna damaanad qaaday Axdigan iyadoo aan sina loo kala soocin, ha ahaato isir, qolo, midab, jinsi, luqad, diin, ama fikrad siyaasadeed, ama aragti kasta oo kale, qaran ama asal bulsho, hanti, dhalasho, ama xaalad kale,

**XUSUUSANAYA** Baaqa Xuquuqda iyo Baraaraha Carruurta Afrika (AHG / ST.4 REV.1) ee ay ku ansixiyeen Madaxweyneyaasha Dawladaha iyo Madaxda Xukuumadaha Ururka Midnimada Afrika kalfadhigoodii Caadiga ahaa ee lix iyo tobnaad ee Monrovia - Liberia laga soo bilaabo 17kii illaa 20kii Luulyo 1979kii, inuu aqoonsaday baahida loo qabo in la qaado tallaabooyin habboon, si kor loogu qaado loona ilaaliyo Xuquuqda iyo Baraaraha Carruurta Afrika.

**KA WALWALSAN** in xaaladda inta badan carruurta Afrika ay tahay mid halis ah iyadoo ay ugu wacan yihiin xaaladaha gaarka ah ee dhaqaale-bulsho, dhaqan, caado iyo duruufaha horumar, musiibooyinka dabiiciga ah, colaadaha hubaysan, kaga-faa'iidaysi duruuf (explotation) iyo baahi, iyadoo la tixgalinayo bisayl la'aanta maskaxeed iyo midda jireeed ee carruurta waxay u baahan yihiin dhowris iyo daryeel gaar ah.

**GAROWSADAY** in Ilmuhu bulshada Afrika kaga jiraan kaalin sharfan iyo in carruurtu ugu barbaaraan qaab dhammaystiran kuna koraan bay'ad qoys oo ay ku dheehan tahay jawi farxadeed, jacayl iyo isfaham,

**GAROWSADAY** in ilmuhu sababo la xiriira baahida koritaanka jirkiisa iyo maskaxdiisa dartood uu u baahan yahay daryeel gaar ah oo ku aaddan horumarkiisa caafimaad, jireed, maskaxeed, akhlaaqeed iyo kan bulsho una baahan yahay ilaalin sharciyeed oo ku dhacda jawi xornimo, sharaf iyo amni,

**TIXGALINAYA** wanaagga hiddahooda dhaqan, sooyaalkooda taariikheed iyo qiyamka ilbaxnimada Afrika kaasoo boggaadiya islamarkaasna tilmaama sida ay u arkaan fikradda xuquuqda iyo baraaraha ilmaha,

**TIXGALINAYA** in kor u qaadista iyo dhowrista xuquuqaha iyo baraaraha ilmaha ay maldahayso waajibaad saaran ruux kasta,

**ADKAYNAYANA KU DHAGANAANTA** mabaadii'da xuquuqda iyo daryeelka Carruurta ee ku xusan baaqa, heshiisyada iyo axdiyada kale ee Ururka Midnimada Afrika iyo Qaramada Midoobay, gaar ahaan Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Carruurta, iyo baaqa Madaxweyneyaasha Dawladaha iyo Madaxda Xukuumadaha Ururka Midnimada Afrika ee ku saabsan Xuquuqda iyo Bareeraha Carruurta Afrika .

**WAXAY ISKU RAACEEN SIDA SOO SOCOTA:**

# QEYBTA 1
# XUQUUQ IYO WAAJIBAAD

## CUTUBKA KOWAAD
## XUQUUQDA IYO BARAARAHA CARRUURTA

### Qodobka 1aad
### Waajibaadka Saaran Dawladaha Xubnaha Ka Ah

1. Dawladaha xubnaha ka ah Ururka Midnimada Afrika ee qeybta ka ah Axdiga hadda jira waxay aqoonsan doonaan xuquuqaha, xorriyadaha iyo waajibaadka ku xusan Axdigan, waxayna qaadayaan talaabooyinka lagama-maarmaanka ah, iyadoo la raacayo habraaca dastuuriga ah iyo qodobada ku xusan Axdiga hadda jira, si ay u meelmariyaan shuruuc ama tallaabooyinka kale ee lama-huraanka u ah hirgelinta qodobada axdigan

2. Ma jiro Qodob ku xusan Axdigan oo saamaynaya qodobbada sida ugu wanaagsan u xaqiijinaya xuquuqda iyo baraaraha caruurta ee ku jira xeerka Dawladda Xubinta ka ah ama heshiis kasta oo kale ee Caalami ah ama axdi dhaqangal ka ah dalkaas.

3. Caado kasta, dhaqan iyo hidde kasta, ama dhaqan-diimeed kasta oo aan waafaqsanayn xuquuqda, mas’uuliyadaha iyo waajibaadka ku xusan Axdigan lama dhiirigalinayo, iyadoo la tixgalinayo hadba inta ay la’eg tahay iswaafaqsanaanta.

### Qodobka 2$^{aad}$
### Qeexid Caruur

Marka la eego Ujeeddooyinka Axdigan erayga “caruur” micnihiisu waa qof kasta oo ay da’diisu ka yartahay 18 sano.

## Qodobka 3aad

## Takoor La'aan

Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xuquuqda iyo xorriyadaha lagu aqoonsaday laguna damaanad qaaday Axdigan, iyadoo aan loo eegeyn isir, qolo, midab, jinsi, luqad, diin, fikrad siyaasadeed ama mid kale, asalka qaran ama kan bulsho, hanti, dhalasho ama xaalad kale ee ilmaha waalidkiisa ama mas'uulkiisa sharci.

## Qodobka 4aad

## Danta Ugu Wanaagsan ee Carruurta

1. Waa in la tixgeliyaa danta ugu wanagsan ee carruurta marka uu qof ama maamul qaadayo tallaabo kasta oo khuseysa carruurta.
2. Dhammaan dacwadaha garsoor ama kuwa maamul ee saamaynaya ilmo awood u leh inuu muujiyo aragtidiisa, waxaa la siinayaa ilmaha fursad lagu dhageysto si toos ah ama iyadoo la sii marayo wakiil dhexdhexaad ah oo qeyb ka ah dacwada, fikradahaasna maamulka ay quseeyaan waxay siin doonaan tixgalin si waafaqsan qodobbada sharciga.

## Qodobka 5aad

## Badbaado Iyo Horumar

1. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay nolosha. Xaqaasna waxaa ilaalinaya sharciga.
2. Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan waxay xaqiijinayaan, , badbaadada, ilaalinta iyo horumarinta ilmaha inta ugu saraysa ee suurogal ah.
3. Xukun dil ah laguma ridi karo carruurta fal-dambiyeed ay galeen darteed.

## Qodobka 6aad

## Magaca iyo Jinsiyadda

1. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay in loo bixiyo magac marka uu dhasho.
2. Ilmo kasta waa in la diiwaan-galiyaa isla marka uu dhasho .
3. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo jinsiyad.
4. Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan waxay ku dadaalayaan xaqiijinta in sharciyadooda lagu qeexo mabaadii'da uu ilmu ku heli karo Jinsiyada Dawladda uu dhulkeeda ku dhashay, haddii aysan dhalasho siin Dawlad kale si waafaqsan qawaaniinteeda marka uu ilmu dhasho.

## Qodobka 7aad

## Xoriyadda Hadalka

Ilmo kasta oo awood u leh inuu fikirkiisa ku muujiyo hadal ahaan wuxuu leeyahay xuquuq uu si xor ah ugu cabirayo fikiradihiisa ku saabsan dhammaan arrimaha iyo inuu faafiyo fikradihiisa si waafaqsan sharciga.

## Qodobka 8aad

## Xoriyadda Isku Imaashada

Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay ka qeyb-galka Urur iyo xorriyadda qabashada kulamo nabadeed si waafaqsan sharciga.

## Qodobka 9aad

## Xorriyad Fikir, Damiir iyo Diin

1. Ilmo kasta wuxuu xaq u leedahay xorriyadda fikirka, damiirka iyo diinta.

2. Waaliddiinta, iyo mas'uulka sharci ee ilmaha haddii la heli karo, waxaa waajibaad ka saaran yahay inay ilmaha ku hagaan kuna jiheeyaan adeegsiga xuquuqdaas iyaga oo tixgalinaya awoodaha koritaanka ee is bedbedalaya, iyo danaha ugu wanaagsan ee ilmaha.
3. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigaan waxay xushmaynayaan waajibaadka saaran waalidiinta iyo haddii la heli karo, mas' uulka sharci ee ilmaha oo ay tahay inay bixiyaan hagis iyo t i lmaamo ku aaddan helidda xuquuqdan iyadoo lagu salaynayo shuruucda iyo siyaasadaha qaran.

## Qodobka 10aad

## Illaalinta Nolosha gaarka ah

Ma jiro faro-gelin gardarro ah ama sharci darro ah oo lagu sameyn karo nolosha gaarka ah ee ilmaha, guriga qoyskiisa, ama farriimo loo soo diray, sidoo kale laguma xad-gudbi karo sharaftiisa iyo sumcaddiisa, iyadoo shardigu yahay in waalidka ama mas'uulka sharci ee ilmaha ay ku sameeyaan la-socosho maan-gal ah hab-dhaqanka carruurta. Ilmaha sharciga ayaa ka ilaalinaya faragalinta ama weerarada noocan ah .

**Qodobka 11aad**

**Waxbarasho**

1. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay waxbarasho.
2. Waxbarashada ilmuhu waxay diiradda saaraysaa:
   (a) Kobcinta i y o horumarinta shakhsiyadda ilmaha, hibadooda iyo kartidooda maskaxeed iyo jireed si faa'iidada ugu badan ee suuro-gal ah ay uga helaan ilmuhu;
   (b) Xoojinta ixtiraamka xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha asaasiga ah iyadoo si gaar ah loo tixraacayo kuwa lagu qeexay qodobbada heshiisyada kala duwan ee Afrika ee xuquuqda aadanaha iyo dadyowga, baaqyada iyo heshiishyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha;
   (c) Dhowrista iyo xoojinta akhlaaqda wanaagsan, qiyamka dhaqameed iyo hidaha Afrika;
   (d) U-diyaarinta mas'uuliyad nololeed oo ka dhex jirta bulsho xor ah , oo ay ku dheehantahay fahamka dulqaadka, wadahadalka, xushmadda iyo saaxiibtinimada ka dhaxaysa dhammaan kooxaha diimeed, qabiil iyo isir ee dadyowga;
   (e) Dhowrista madax-banaanida Qaran iyo wadajirka-dhuleed;
   (f) Dhiirri-gelinta iyo gaaritaanka Midnimada iyo wadajirka Afrika;
   (g) Horumarinta ixtiraamka deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah;
   (h) Kor-u-qaadista fahamka ilmaha ee ku aaddan daryeelka caafimaadka asaasiga ah.
3. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka ku habboon iyadoo looga gol-leeyahay sidii loo gaari lahaa xaqiijinta xuquuqdan waxayna si gaar ah:
   (a) U siinayaan carruurta waxbarasho asaasi ah oo lacag la'aan ah oo qasab ah;
   (b) U dhiirigaliyaan horumarinta waxbarashada dugsiga sare noocyadeeda kala duwan iyo in si tartiib-tartiib ah looga dhigo mid lacag la'aan ah oo ay dadka dhan heli karaan;
   (c) Uga dhigayaan tacliinta sare mid ay heli karaan dhammaan dadka iyadoo la eegayo karaanka iyo awoodda loona marayo waddo kasta oo maan-gal ah;
   (d) U qaadayaan tallaabooyin lagu dhiiri-galinayo in carruurtu ay si joogta ah u soo xaadiraan waxbarashada lana yareeyo carruurta waxbarashada ka harta;

(e) U qaadayaan tallaabooyin ku aaddan gabdhaha, carruurta hibada gaarka ah leh, carruurta danyarta ah, kuwa qaba dhibaatooyinka gaarka u ah, si loo xaqiijiyo in dhammaan qeybaha bulshadu ay si siman u wada heli karaan.

4. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay xushmeyn doonaan xuquuqda iyo waajibaadka waalidiinta, iyo mas'uulka sharci, markii ay suurogal tahay, ay u doori karaan carruurta dugsiyo ka duwan kuwa ay Dawladdu asaastay kuwaas oo dabooli kara shuruudaha ugu hooseeya ee Dawladdu ansixisay si loo xaqiijiyo waxbarashada diimeed iyo midda akhlaaqeed ee carruurta iyadoo la tixgalinayo awoodaha isbadbadalaya ee ilmaha.

5. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka habboonsi loo dammaanad-qaado in ilmaha la kulmay ciqaab waalid ama mid iskuul in loola dhaqmo si ay ku jirto bani'aadamnimada, xushmadda iyo karaamada ilmaha .

6. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay diyaarinayaan dhammaan talaabooyinka ku habboon si loo xaqiijiyo in carruurta uurka yeelata inta aysan dhammaysan waxbarashadooda ay helaan fursad ay ku sii wataan waxbarashadooda iyadoo la eegayo awoodda ay ku sii wadan karaan waxbarashada.

7. Ma jirto qeyb kamid ah qodobkan oo loo fasiran karo in lagu faragaliyo xorriyadda shaqsiyaadka iyo ururadu ay ku asaasayaan kuna hagayaan xarumo waxbarasho haddii xarumahaasi u hoggaansan yihiin shuruudaha ku qeexan faqrada (1) ee qodobkan islamarkaasna tayada waxbarashada laga bixiyo xarumahani waafaqsan tahay heerarka ugu hooseeya ee ay dajisay Dawladdu.

## Qodobka 12aad
## Waqtiyada Firaaqa, Madadaalo Iyo Howlaha Dhaqan

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay aqoonsan yihiin xaqa ilmuhu u leeyahay nasiino iyo firaaqo, iyo inuu helo ciyaar iyo hawlo madadaalo oo ku habboon da'da ilmaha iyo inuu si xor ah uga qeybgalo nolosha dhaqan iyo midda faneed.
2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay xushmeynayaankorna u qaadayaan xaqa uu ilmuhu u leeyahay inuu si buuxda uga qeyb-galo nolosha dhaqan iyo midda faneed, waxayna dhiiri-gelinayaan bixinta fursado loo siman yahay oo habboon kuna aaddan hawlaha firaaqada, madadaalada, dhaqanka iyo fanka.

## Qodobka 13aad
## Carruurta Naafada ah

1. Ilmo kasta oo qaba naafonimo maskaxeed ama jireed wuxuu xaq u leeyahay tallaabooyin ilaalineed oo gaar ah lana jaan-qaadaya baahidiisa jireed iyo midda akhlaaqeed kuwaasoo dhammaantood ku dhacaya xaalado dammaanad qaadaya sharafta ilmaha korna u qaadaya ku-tiirsanaanta naftiisa iyo inuu si firfircoon uga qeyb-galo nolosha bulshada.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay xaqiijinayaan, iyadoo ku xiran awoodda dhaqaale ee la heli karo, in carruurta naafada ah iyo

   dadka masuulka ka ah daryeelkooda, inay ku helaan kaalmo, codsiyada ay sameeyeen, taasoo ku habboon xaaladaha ilmaha, waxayna si gaar ah Dawladuhu xil iskaga saarayaan in ilmaha naafada ah uu heli karo tababarro tayo leh iyo in loo diyaariyo fursadaha shaqo iyo kuwa madadaalo oo gacan ka gaysan kara in ilmuhu gaari karo isdhexgalka bulsho, horumar shaqsi, dhaqan iyo mid
   akhlaaqeed oo maan-gal ah.
3. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay u adeegsanayaan awooddooda dhaqaalesi tartiib ah nolosha loogu fududeynayo dadka naafada ah, gaar ahaan dhaqdhaqaaqa u sahlaya shaqsiga naafada ka ah maskax iyo jir ahaan galitaanka dhismeyaasha waaweyn iyo goobaha kale ee u baahan yahay qofka naafada ah inuu galo si uu uga fushado dan uu leeyahay.

## Qodobka 14aad
## Caafimaadka iyo Adeegyada Caafimaadka

1. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xaaladda caafimaad maskaxeed, jireed ama ruuxeed ee ugu wanaagsan.
2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay dadaal buuuxa ku bixinayaan in si buuxda loo hirgaliyo xaqqan waxayna qaadi doonaan tallaabooyinka:

(a) lagu yaraynayo heerka dhimashada dhallaanka iyo ilmaha;

(b) Lagu xaqiijinayo sidii loogu heli lahaa carruurta oo dhan caawinaadda caafimaad ee lagama-maarmaanka ah, iyadoo la horumarinayo adeegyada daryeelka caafimaadka aasaasiga ah;

(c) Lagu xaqiijinayo bixinta quudin ku filan iyo biyo nadiif ah oo la cabo;

(d) Lagula dagaalamayo cudurrada iyo nafaqo-darrada iyadoo loo marayo nidaamka daryeelka caafimaadka ee asaasiga ah lana adeegsanayo tiknoolajiyadda ku habboon;

(e) Lagu xaqiijinayo in hooyooyinka uurka leh iyo kuwa nuujinaya ay helaan daryeelka caafimaad ee ay u baahan yihiin;

(f) Lagu horumarinayo aqoonta ka-hortagga cudurada iyo nolosha qoyska iyo bixinta adeegga caafimaad;

(g) Loogu dhafayo barnaamijyada daryeelka caafimaadka asaasiga ah qorsheyaasha horumarinta qaranka;

(h) Lagu xaqiijinayo in dhammaan qeybaha kala duwan ee bulshada, gaar ahaan waalidiinta, carruurta, hoggaamiyeyaasha iyo shaqaalaha bulshada, lagu wargeliyo laguna taageero adeegsiga aqoonta asaasiga ah ee ku saabsan caafimaadka iyo quudinta ilmaha, faa'iidooyinka naas-nuujinta, fayo-dhowrka iyo nadaafadda deegaanka iyo ka-hortagga shilalka guriga iyo kuwa kale;

(i) Lagu xaqiijinayo in si wax-ku-ool ah ay uga qeyb-galaan ururada aan dowliga ahayn, bulshada deegaanka, iyo bulshada la caawinayo, qorshaynta iyo maaraynta barnaamijyada adeegyada asaasiga ah ee carruurta loogu talo-galay;

(j) Lagu taageerayo farsamo iyo maaliyad ahaanba xoojinta awoodda bulshada ee ku aadan diyaarinta daryeel caafimaad oo asaasi ah oo loogu talo-galay carruurta.

**Qodobka 15aad**
**Ku Shaqaysiga Carruurta**

1. lmo kasta waxaa laga ilaalinayaa nooc kasta oo ka faa'iideysi dhaqaale ah iyo inuu qabto shaqo kasta oo halis ku keeni karta ama faragalin karta horumarka jireed, maskaxeed, akhlaaqeed, ruuxeed ama kan bulsho ee ilmaha.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka maamul iyo sharci ee habboon si loo xaqiijiyo hirgalinta buuxda ee qodobkaan, kaasoo daboolaya shaqaalaysiinta labada qaybood ee Dawladda iyo kuwa aan rasmig ahayn iyadoo la tixgalinayo qodobbada la xiriira halbeegyada Hay'adda Shaqada Caalamiga ah(ILO) ee ku saabsan carruurta, Dawladaha Xubnaha ka ah Axdiga waxay si gaar ah:

(a) Sharci ugu xeerin doonaan da'da ugu hoosaysa ee aqbalaadda shaqaalaysiin kasta;
(b) u samayn doonaan xeerarka habboon ee qeexaya saacadaha iyo shuruudaha shaqaalaysiinta;
(c) u dajin doonaan ciqaabo munaasib ah ama ganaaxyo kale si loo xaqiijiyo dhaqangelinta wax-ku-oolka ah ee Qodobkan;
(d) kor ugu qaadi doonaan wacyiga dhammaan qeybaha bulshada ee halista ka dhalan karta shaqaalaysiinta carruurta.

**Qodobka 16aad**
**Ka-ilaalinta I lma ha Xad-gudub Iyo Jirdil**

1- Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan tallaabooyin maamul, sharci, bulsho iyo waxbrasho oo gaar ah oo ilmaha looga ilaalinayo dhammaan noocyada jirdilka, dhaqamada ka baxsan bini'aadanimada ee bahdilaadda ahgaar ahaan dhaawaca maskaxeed, ama jireed ama xad-gudubyada kale, dayacaad ama dhaqan-xumo ay kamid tahay xad-gudub galmo marka ilmaha la daryeelayo.

2- Tallaabooyinka ilaalinta ee Qodobkan ku xusan waxaa ku jira habraacyo wax-kuool ah oo lagu asaasyo qeybo kormeer oo gaar ah, si ay u bixiyaan taageerada lagama-maarmaanka u ah carruurta iyo kuwa daryeelka siinaya, iyo sidoo kale noocyada kale ee ka-hortag ah iyo aqoonsi, soo tabin, u gudbin baaritaan,
daaweyn iyo dabagal kiisaska xad-gudubka iyo dayaca ee carruurta loo geysto.

**Qodobka 17aad**
**Maamulka Caddaaladda Da'yarta**

1- Ilmo kasta oo lagu eedeeyo ama lagu helo dambi ah inuu jabiyay sharci ciqaabeed wuxuu xaq u leey ahay in si gaar ah loola dhaqmo, taasoo waafaqsan dareenka sharafeed iyo qiimo ee

ilmaha, sidoo kale xoojinaysa xushmada uu ilmuhu u hayo xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha asaasiga ah ee dadka.

2- Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay si gaar ah :
   (a) U xaqiijinayaan in ilmo la xiray ama xasbi la geliyay ama laga qaaday xorriyaddiisa aan loo geysan jirdil, dhaqan iyo ciqaab ka baxsan bini'aadanimada oo liidaya ilmaha;
   (b) U xaqiijiyaan in meesha ay ku xiran yihiin ama ku xabisan yihiin laga aysan la wadaagin dadka waaweyn;
   (c) U xaqiijiyaan in ilmo kasta oo lagu eedeeyay jabinta sharci ciqaabeed in:

   (d) loo aqoonsado inuu yahay dambi-laawe ilaa iyo inta lagu caddeeynayo inuu geystay dambigaas;
   (e) Ilmaha waxaa sida ugu dhaqsaha badan loogu wargalinayaa eedda loo haysto, iyadoo la adeegsanayo luqad uu fahmayo, wuxuuna xaq u leeyahay inuu helo kaalmo tarjumaan haddii uusan fahmayn luqadda la isticmaalayo;

   (f) Ilmaha waxaa la siinayaa kaalmada sharci ee uu u baahan yahay iyo wixii kale ee caawin ah, marka la diyaarinayo lana soo jeedinayo difaaciisa;

   (g) Kiiska ilmaha waxaa go'aan looga gaarayaa sida ugu dhaqsaha badan ee ugu maangalsan, iyadoo loo marayo maxkamad dhexdhexaad ah, haddii dambi lagu helana wuxuu xaq u leeyahay inuu racfaan u qaato maxkamad ka saraysa;
   (h) Maxkamadeynta waxaa laga mamnuucayaa saxaafadda iyo dadweynaha.

3- Ujeedada ugu muhiimsan ee qaabka loola dhaqmayo ilmo kasta muddada maxkamadeyntu socoto waa iyo sidoo kale marka lagu helo dambi ah inuu ku jabiyay sharci ciqaabeed waa in la toosiyaa, dib loo la mideeyo qoyskiisa, iyo inuu helo dhaqancelin bulsho.

4- Waxaa la xaddidayaa da'da ugu yar ee ay carruurtu masuuliyad ciqaabeed ku qaadi karaan.

## Qodobka 18aad
## Ilaalinta Qoyska

1. Qoysku wuxuu noqonayaa unugga dabiciiga ah iyo asaaska bulshada. Dawladdu waxay ilaalinaysaa gacanna ka geysanaysaa asaaska iyo hormarka qoyska.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan tallaabooyin ku habboon xaqiijinta sinaanta xuquuqda iyo mas'uuliyadaha lammaanaha

isqaba ee ku aadan carruurta muddada uu guurku jiro iyo xitaa haddii uu yimaaddo furriin. Haddii furriin uu yimaado waxaa la qaadayaa tallaabooyin lagama-maarmaan ah oo lagu ilaalinayo Carruurta..

3. Ilmaha sinaba looguma diidi karo daryeel iyo xanaano iyadoo lagu salaynayo xaaladda guur ee waalidiinta.

## Qodobka 19aad

## Daryeelka iyo Ilaalinta Waalidka

1. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo daryeel waalid iyo ilaalin wuxuuna mar kasta oo ay suura-gal tahay, xaq u yeelanayaa inuu la noolaado waalidkiis. Ma jiro ilmo laga kaxaynayo waalidkiisa iyadoo uusan raali ka ahayn arrintaas ilmuhu, marka laga reebo haddii awood garsoor si sharciga waafaqsan ay go'aamiso in kala saaridda noocaas ah ay ku jirto danta ugu wanaagsan ee ilmaha.

2. Ilmo kasta oo laga kaxeeyay mid kamid ah labada waalid ama labadoodaba wuxuu xaq u leeyahay inuu labada waalidba la yeesho xiriir shaqsi iyo xiriir toos ah oo joogto ah.
3. Haddii kala kaxayntu(Separation) ay ka dhalatay tallaabo ay qaaday Dawladda Xubinta ka ah Axdigan, Dawladda Xubinta ka ah Axdigan, waxay ilmaha ama haddii ay ku habboon tahay, xubin oo muhiim ah oo ka tirsan qoyskiisa siinaysaa xogo muhiim ah oo ku saabsan halka ay ku sugan yihiin xubinta ama xubnaha maqan ee qoyska. Dawladaha Xubinta ka ah Axdigan waxay xaqiijinayaan in gudbinta codsigan uusan cawaaqib taban ku yeelanayn shaqsiga ama shaqsiyaadka iyaga dartood loo samaynayo.

4. Haddii Dawlad Xubin ka ah Axdigaan ay xirto ilmo, waxaa sida ugu dhaqsaha badan ee suura-galka ah, xarriggaas ugu wargalinaysaa waalidka ama mas'uulka sharci ee ilmahaas.

## Qodobka 20aad

## Mas'uuliyadaha Waalid

1. Waalidiinta ama shaqsiyaadka kale ee mas'uulka ka ah ilmaha waxaa saaran mas'uuliyadda kowaad ee barbaarinta iyo horumarinta ilmaha waxaanna waajib ku ah:

   a) in danaha ugu wanaagsan ee carruurta mar kasta la siiyo muhiimadda kowaad;
   b) In intii karaankooda iyo awooddooda dhaqaale ah ay xaqiijiyaan xaaladaha nololeed ee lagama-maarmaanka u ah nolosha iyo horumarka carruurta; iyo
   c) Inay xaqiijiyaan in tallaabooyinka anshax-marinta guriga loo sameeyo si ay ku jirto bini'aadanimo iyo qaab waafaqsan sharafta uu ku dhashay ilmuhu.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay iyagoo tixgalinayo awooddooda dhaqaale iyo duruufaha qaran qaadayaan dhammaan tallaabooyinka habboon ee:

a) lagu caawinayo waalidiinta iyo shaqsiyaadka kale ee mas'uulka ka ah ilmaha, haddii loo baahdana waxay siinayaan cawimaad maaddi ah iyo barnaamijyo taageero oo la xiriira quudinta , caafimaadka, waxbarashada, dharka iyo hoyga;

b) Looga taageerayo waalidiinta iyo shaqsiyaadka kale ee mas'uulka ka ah howsha barbaarinta carruurtalaguna xaqiijiyo horumarinta hay'adaha mas'uulka ka ah bixinta daryeelka carruurta; iyo

c) La xaqiijiyo in carruurta waalidiintooda ay shaqeeyaan la siiyo adeegyada iyo tasiilaadka daryeel ee ay u baahan yihiin.

## Qodobka 21aad

## Ka-ilaalinta Ilmaha Falalka Dhaqan iyo Kuwo Bulsho ee Waxyeellada Leh

1) Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka ku habboon si loo ciribtiro falalka dhaqan iyo kuwa bulsho ee waxyeelada leh ee saamaynaya baraaraha, sharafta, koritaanka caadiga ah, iyo horumarka ilmaha, gaar ahaanna:

   a) Caadooyinka iyo dhaqamada halista ku ah caafimaadka ama nolosha ilmaha; iyo

   b) Caadooyinka iyo dhaqamada takoorka ku ah ilmaha ee ku salaysan jinsiga ilmaha ama xaalad kale.

2) Guursiga carruurta iyo in wiil ama gabar loo ballan-qaado in loo guurin doono qof kale xilli ay carruur yihiin, waa la mamnuucayaa waxaana la qaadayaa tallaabooyin wax-ku-ool oo uu ku jiro sharci, kaasoo qeexaya in da'da ugu hoosaysa ee guurka ay tahay 18 sano, iyadoo lagu diiwaan-galinayo dhammaan guurarka diiwaanka rasmiga ah ee Dawladda lagana dhigayo mid qasab ah.

## Qodobka 22aad

## Colaad Hubaysan

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay ballan-qaadayaan inay Dhowraan isla markaana dammaanad qaadayaan u hoggaansanaanta sharciga Caalamka ee bani'aadanimada, ee lagu dhaqmo marka ay socdaan colaadaha hubaysan ee saamaynaya Carruurta.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka lagama-maarmaanka ah si loo xaqiijiyo in ilmo uusan si toos ah uga qeyb-gelin dagaal iyo in laga waantoobo in ilmo loo qorto askar ahaan.

3. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay si waafaqsan

waajibaadkooda uu farayo sharciga Caalamiga ah ee bani'aadamnimada, ilaalinayaan dadka rayidka ah intay socdaan colaadaha hubaysan waxayna qaadayaan dhammaan tallaabooyinka suura-galka ah si loo xaqiijiyo ilaalinta iyo daryeelka carruurta kuwaas oo ay saameeyeen colaadaha hubaysan, xasaradaha iyo khilaafaadka.

## Qodobka 23aad

## Carruurta Qaxootiga ah

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan, waxay qaadayaan dhammaan tilaabooyinka ku habboon si loo xaqiijiyo in carruur doonaysa aqoonsi qaxootinimo ama loo arko inay yihiin qaxooti si waafaqsan shuruucda Dalka iyo kuwa caalamiga ah ee arrintan khuseeya, in haddii aan la wehlin ama uu wehliyo waalid, q mas'uul sharci ama qaraabo dhaow, ay helayaan ilaalinta habboon iyo kaalmo bini'aadanimo kuwaas oo ah xuquuqaha ku cad Axdigan iyo heshiisyada kale ee Arrimaha Bini'aadanimada iyo xuquuqda aadanaha ayna Dawladuhu qeyb ka yihiin.

2. Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan waxay ballan qaadayaan inay garab-istaag u muujiyaan dadaalada hay'adaha caalamiga ah ee ka shaqeeya ilaalinta iyo kaalmada ay ku doonayaan inay carruurtan ku caawiyaan kuna baadigoobaan waalidka ama qaraabada carruurta ama ilmo qaxooti oo aysan cidina wehlin si loo helo xogaha muhiimka ah si uu dib-ugula midoobo qoyskiisa.

3. Haddii ay dhacdo in la waayo wax waalid, mas'uul sharci, ama qof qaraabo dhow ah, ilmaha waxaa la siinayaa daryeel u dhigma midka la siiyo ilmaha kale ee si kumeelgaar ah ama joogto ah bay'ada qoyskiisa sababtii doontaaba ha noqotee.

4. Waxaa lagu dabaqayaa axkaamta qodobkan in kastoo isbadal lagu samayn karo(Mutatis Mutandis) carruurta ku barakacday gudaha dalka sababo la xiriira masiibooyin dabiici ah, colaado hubaysan oo maxali ah, dagaal sokeeye, burbur ku yimaada nidaamka bulshada iyo kan dhaqaalaha iyadoo aan la eegin cidda mas'uulka ka ah dhibaatooyinkaas.

## Qodobkaka 24aad

## Korsasho (Adoption)

Dawladaha Xubnaha ah Axdigan ee aqoonsan nidaamka korsashada (adoption) waxay xaqiijinayaan in danta ugu wanaagsan ee ilmaha mar kasta la siiyo mudnaanta kowaad, waxayna:

1. Asaasayaan hay'ad awood sharci u leh inay go'aamiso arrimaha korsashada(adoption) isla markaasina xaqiijisa in loo fuliyo si waafaqsan shuruucda iyo habraacyada arrintan khuseeya iyadoo laga duulayo dhammaan xogta iyo macluumaadka muhiimka ah ee arrintan la xiriirta iyo in la xaqiijiyo in korsashadan ay tahay mid la ogolyahay marka la eego xaaladda ilmaha ee ku saabsan waalidkiis, dadka mas'uulka ka ah sharci ahaan, iyo qaraabada dhow ee ilmaha iyo in haddii lama huraan ay noqoto in dadka saxda ah ee ay khusayso ay bixiyeen ogolaansho xog-ogaalnimo ku salaysan oo ku saabsan korsashada ilmaha xog-ogaalnimadaas oo ku timid la-talin saxan oo la siiyay cidda ay khusayso;

2. Haddii ilmaha loo waayo qoys baraabirya, korsada ama daryeel kale isagoo ku sugan dalkiisa uu ku dhashay, waxaa lagu dabaqayaa sida ku xusan Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta iyo Axdigan.
3. Xaqiijinayaan in ilmaha ay saamaysay korsashada dalalka ka dhexaysa inuu helo ilaalin iyo heerar nololeed oo u dhigma kuwa uu heli lahaa haddii wadankii uu u dhashay lagu korsado;
4. Qaadayaan dhammaan tallaabooyinka habboon si loo xaqiijiyo in marka la samaynayo korsashada dalalka ka dhexaysa, aysan horseedin ka-ganacsi bini'aadan ama ka-macaashid maaliyadeed oo qaldan oo ay ka helaan kuwa isku dayaya inay korsadaan ilmaha;
5. Kor u qaadayaan, haddii ay suura-gal ah, ujeedooyinka qodobkaan, iyagoo samaynaya heshiisyo laba geesood ah iyo kuwa dhinacyo badan iskuna dayaya inay adeegsadaan nidaam(framework) xaqiijiya in ilmaha ku sugan wadanka kale ay meeleyeen hay'adaha loo igmaday ee awoodda u leh;

6. Diyaarinayaan nidaam kormeer oo lagula soconayo daryeelka ilmaha la korsanayo(Adopted)

## Qodobka 25aad

## Ka Fogeynta Waalidka

1. Ilmo kasta oo si joogto ah ama si ku-meel gaar ah looga fogeeyo bay'ada qoyskiisa sababtii doontaa ha keentee, wuxuu xaq u leeyahay in la siiyoilaalin iyo cawimaad;

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan:
   a) Waxay xaqiijinayaan in ilmaha agoonta ama rajada ah ama ilmaha si buuxda ama si ku-meelgaar ah looga foogeeyay bay'ada qoyskiisa ama iyadoo la eegayo danta ugu wanaagsan ee ilmahaas aan loo ogolaan karin in lagu barbaariyo ama lagu koriyo bay'adaas, la siiyo daryeel qoys kale, oo uu ku jiro(in kastoo aysan ku ekayn), ku wareejin qoys koriya, ama

      hay'ad(Xarun) si ilmahu uu daryeel u helo;

   b) Waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka si loo baadigoobo dibna loogula mideeyo qoyskiisa ama eheladiisa, haddii kala fogayntu ay ka dhalatay barakac gudaha ah ama mid dibadeed oo ay sababtay colaad hubaysan ama masiibo dabiici ah..

3. Marka go'aan laga gaarayo qoyska kale ee ilamaha daryeelaya iyo danta ugu wanaagsan ee ilmaha, waxaa tixgalinta ku habboon la siinayaa rabitaanka siiwadida barbaarinta ilmaha iyo sooyaalka luqadeed, diimeed iyo qowmiyadeed ee ilmaha.

## Qodobka 26aad

## Ka ilaalinta Dir-sooca (Apartheid) iyo Takoorka

1. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay si kali iyo wadar ahba u ballanqaadayaa inay siinayaan mudnaanta ugu sarreysa baahiyaha gaarka ah ee carruurta ku hoos nool Dir-sooca(Apartheid) iyo Dawladaha ay saamaysay xasilooni la'aanta uu abuuray maamulka Dir-sooca ah.

2. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay si kali iyo wadar ah u ballan-qaadayaan inay siinayaan mudnaanta ugu sarreysa baahiyaha gaarka ah ee carruurta ku hoos nool nidaam ku dhaqma takoor qowmiyadeed, mid qolo, mid diimeed ama noocyada kale ee takoorka, ama Dawlado ay saameeyeen deganaansho la'aan  milatari.
3. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay ballan-qaadayaan in ay siiyaan, markii ay suura-gal tahay, kaalmo maadi ah carruurtan iyo inay u duwaan dadaalkooda ciribtirka dhammaan noocyada takoorka iyo dir-sooca ka jira Qaaradda Afrika.

## Qodobka 27aad

## Ka-faa'iideysi Galmo

Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay ballan-qaadayaan inay ka ilaaliyaan ilmaha dhammaan noocyada ka-faa’iidaysiga galmo iyo xad-gudubyada galmo waxayna gaar ahaan qaadadayaan tallaabooyinkan si looga hortago:

a) ku qancinta, ku dhiiri-galinta, iyo ku qasbidda ilmaha inay ku lugyeeshaan howl galmo;
b) U adeegsiga carruurta howlaha dhillaysiga ama falal kale oo galmo;U adeegsiga carruurta muuqaallada galmada, jilitaanka iyo agabka galmada.

## Qodobka 28aad

## Isticmaalka Daroogada

Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan dhammaan tallaabooyinka ugu habboon si looga ilaaliyo carruurta isticmaalka daroogada iyo adeegsiga sharci darrada ah ee walxaha maan-dooriyaha ah, sida ku qeexan heshiisyada caalaamiga ah ee arrintan khuseeya loogana hortago u adeegsiga carruurta soo saarista iyo tahriibinta walxaha maan-dooriyaha ah.

## Qodobka 29aad

## Iibin, Tahriibin, Dawarsiga iyo Afduub

Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay qaadayaan tallaabooyin ku habboon si looga hortago:
a) afduubka, iibinta, ama tahriibinta carruurta ujeedkii la doono ha laga lahaadee qaabka uu doonana ha u dhacee oo ay ku kacaan waalidiinta, ama mas’uuliyiinta sharciee ilmaha ama qof kale;
b) u Isticmaalka carruurta dhammaan noocyada dawarsiga(Tuugsi).

## Qodobka 30aad

## Carruurta Hooyooyinka Xiran

Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay ballan qaadayaan inay si gaar ah ula dhaqmayaan hooyooyinka xaamilooyinka ah iyo hooyooyinka wata dhallaanka, iyo kuwa haysta carruurta yaryar ee lagu soo eedeeyay ama lagu helay dambi ah jabino sharci ciqaabeed waxayna si gaar ah:

a) u xaqiijinayaan in marka ugu horaysa latixgeliyo inaan hooyada lagu ridin xukun horseedi kara in la kala fogeeyo hooyada iyo ilmaha;
b) u asaasayaan korna u qaadayaan tallaabooyin ku aaddan helitaanka nidaam badal ka noqon kara xabsiyada oo lagu maarayn karo hooyooyinkan;

c) u asaasayaan hay'ado kale oo lagu hayo hooyooyinkan;

d) u xaqiijinayaan inaan hooyo lala xirin ilmaheeda;

e) u xaqiijinayaan inaan hooyooyinkan lagu ridin xukun dil ah;

f) ujeeddada ugu muhiimsan ee nidaamkan waa hagaajin iyo in dib hooyada loola mideeyo qoyskeeda iyo dhaqan-celin bulsho.

## Qodobka 31aad

## Mas'uuliyadda Carruurta

Ilmo kasta waxaa masuuliyadi ka saaran tahay qoyskiisa,bulshada, Dawladda, bulshooyinka sharci ahaan la aqoonsan yahay iyo beesha caalamka. Ilmuhu, iyadoo la eegayo da'diisa iyo awooddiisa iyo waxyaabaha kale ee xaddidi kara ee ku xusan axdigan, waxaa waajibaad ka saaran yahay:

a) inuu ka shaqeeyo wadajirka qoyska, ixtiraamo waalidka, xushmeeyo dadka ka sareeya iyo waayeelka uuna caawiyo haddii loo baahdo.

b) inuu u adeego bulshada Dalkiisa asagoo adeegsanaya awooddiisa jireed iyo maskaxeed;

c) inuu dhowro islamarkaana xoojiyo iwadajirka bulshada iyo qaranka;

d) inuu dhowro, islamarkaasna xoojiyo qiyamka dhaqan ee Afrika marka uu la tacaamulayo xubnaha kale ee bulshada , si jawi dulqaad, wadahadal iyo wadatashi leh, gacanna ka geysto bad-qabka bulshada;

e) inuu dhowro islamarkaasna xoojiyo madax-bannaanida iyo sharafta dalkiisa;

f) inuu mar kasta gacan ka geysto, hadba inta awooddiisa iyo heerkiisa ah, kor u qaadista iyo guusha Midnimada Afrika.

# QEYBTA II
# CUTUBKA LABAAD

# ASAASIDDA QAAB-DHISMEEDKA GUDDIGA XUQUUQDA & BARAARAHA ILMAHA

## Qodobka 32aad

## Guddiga

Guddi khubaro Afrikaan ah oo qaabilsan Xuquuqda iyo Baraaraha Carruurta oo Axdigan dhexdiisa loogu yeerayo "Guddiga" - ayaa laga dhex asaasayaa Ururka Midnimada Afrika dhexdiisa si kor loogu qaado loona ilaaliyo xuquuqda iyo baraaraha carruurta.

## Qodobka 33aad

## Qaab-dhismeedka

1. Guddigu wuxuu ka koobnaanayaa 11 xubnood oo ku sifoobay heer ugu sareeya ee akhlaaqda, sharafta, dhex-dhexaadnimada, hufnaanta, iyo inay aqoon u leeyihiin arrimaha xuquuqda iyo baraaraha carruurta.
2. Xubnaha Guddigu waxay ku shaqeynayaan sifadooda shaqsi ahaaneed.
3. Ma jiro dal loo ogol yahay in Guddiga uu ku yeesho wax ka badan hal xubin.

## Qodobka 34aad

## Doorashada

Isla marka Axdigan uu dhaqan-galo Golaha loo dhan yahay ee Madaxweyneyaasha iyo Madaxda Xukuumadaha dalalka Xubinta ka ah Axdigan, waxay cod-bixin qarsoodi ah kaga dooranayaan Xubnaha Guddiga magacyada liis musharxiin ah oo ay soo gudbiyeen Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan.

## Qodobka 35aad

## Murashaxiinta

Dawlad kasta oo xubin ka ah Axdigan waxay soo magacaabi kartaa ugu badnaan labo murashax. Murashaxiintu waa inay u dhashaan mid ka mid ah dalalka Xubnaha ka ah Axdigan. Haddii dal uu soo magacaabo labo murashax, mid kamid ah labadaas murashax, wuxuu noqonayaa muwaadin aan u dhalan dalkaas.

## Qodobka 36aad

1. Xog-hayaha Guud ee Ururka Midnimada Afrika wuxuu ku martiqaadayaa Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan inay soo magacaabaan murashaxiin ugu yaraan lix bilood doorashada ka hor.
2. Xog-hayaha Guud ee Ururka Midnimada Afrika wuxuu u diyaarinayaa liiska dadka la magacaabay sida ay u kala horeeyaan alifbeeto ahaan wuxuuna u gudbinayaa

Madaxweyneyaasha iyo Madaxda Xukuumadaha dalka Xubnaha ka ah Axdiga ugu yaraan labo bilood doorashada ka hor.

## Qodobka 37aad

## Muddada Xil-haynta

1. Xubnaha Guddiga waxaa loo dooranayaa muddo-xileed shan sano ah, waxaana dhici karta inaan mar kale la dooran, ha yeeshee, mudada xil-haynta afar ka mid ah Guddiga la doortay doorashadii ugu horaysay waxay dhammaanaysaa labo sano kaddib, halka muddada xil-haynta lixda kale ay dhammaanayso, afar sano kaddib.

2. Isla-marka ay dhacdo doorashada ugu horaysa kaddib, Gudoomiyaha Golaha Guud ee Madaxweyneyaasha iyo Madaxda Xukuumadaha Ururka Midnimada Afrika wuxuu qabanqabinayaa qori-tuur si loo go'aamiyo magacyada xubnaha lagu xusay faqro hoosaadka (1) ee qodobkan.
3. Xog-hayaha Guud ee Ururka Midnimada Afrika wuxuu isugu yeerayaa kulanka ugu horeeya ee Guddiga oo ka dhacaya Xarunta Dhexe ee Ururka Midnimada Afrika muddo lix bilood gudohood ah oo laga soo bilaabayo doorashada Xubnaha Guddiga, intaas wixii ka dambeeya xubnaha Guddiga waxaa iskugu yeeraya Gudoomiyehooda marka loo baahdo, ugu yaraan hal mar sanadkii.

## Qodobka 38aad

## Xafiiska

1. Guddigu wuxuu samaysanayaa xeer-hoosaadkiisa.
2. Guddigu waxuu dooranayaa saraakiishiisa muddo labo sano ah.
3. Guntanka Guddigu wuxuu ku buuxsamayaa todobo xubnood.
4. Haddii codadku ay isla ekaadaan, Gudoomiyaha ayaa ridaya codkiisa. 5. Luqadaha shaqada ee guddigu waa luqadaha rasmiga ah ee Ururka Midnimada Africa.

### Qodobka 39aad

### Xil Bannaan

Haddii xubin ka mid ah Guddiga uu banneeyo xilkiisa ka hor inta aysan dhammaan muddada xil-hayntiisa sababtii doonto ha noqotee, Dawladdii Xubintaas soo magacowday waxay soo magacaabaysaa xubin cusub oo dalkeeda u dhashay si uu u dhammaysto muddada xil-haynta ee u harsanayd xubinta xilka bannaysay kaddib markuu ansixiyo Golaha Guud.

## Qodobka 40aad

## Xoghaynta

Xoghayaha Guud ee Ururka Midnimada Afrika wuxuu guddiga u magacaabayaa xoghaye.

## Qodobka 41aad

## Mudnaanta iyo Xasaanadda

Marka ay gudanayaan waajibaadkooda, xubnaha Guddidu waxay leeyihiin mudnaanta ah iyo xasaanadda lagu xusay Axdiga Guud ee Mudnaantaa iyo Xasaanadda ee Ururka Midnimada Afrika.

# CUTUBKA SADDEXAAD
# WAAJIBAADKA IYO HAB-RAACA GUDDIGA

## Qodobka 42aad

## Waajibaadka

Mas'uuliyadaha Guddigu waxay noqonayaan:

(a) kor u qaadista iyo ilaalinta xuquuqda ku xusan Axdigan waxaana si gaar ah waajibaad uga saaran yahay inuu:

(i) ururiyo, diiwaan-galiyo, amro qiimayn taabanaysa takhasusyo badan ee xaaladaha dhibaatooyinka Afrika ee dhinaca xuquuqda iyo baraaraha carruurta, abaabulo kulamo, dhiiri-geliyo hay'adaha qaran iyo kuwa maxaliga ah ee ka shaqeeya xuquuqda iyo baraaraha carruurta iyo haddii ay lagama-maarmaan tahay dhiibto fikirkiisa Dawladahana u ujeediyo talooyin;

(ii) diyaariyo isla-markaasna dajiyo mabaadi' iyo xeerar looga gol-leeyahay ilaalinta xuquuqda iyo baraaraha carruurta ku nool Afrika;

(iii) iskaashi la sameeyo hay'adaha iyo ururada Afrikaanka ah, kuwa gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeeya kor-u-qaadista iyo ilaalinta xuquuqda iyo baraaraha carruurta.

(b) inuu kormeero hirgalinta isla-markaasna xaqiijiyo ilaalinta xuquuqda ku xusan Axdigan.

(c) inuu fasiro qodobada Axdigan marka ay codsato Dawlad Xubin ka ah, hay'ad ka tirsan Ururka Midnimada Afrika ama shaqsi kale ama hay'ad uu aqoonsan yahay Ururka Midnimada Afrika, ama Dawlad Xubin ka ah Axdiga.

(d) guto wixii howl ah ee kale ee uu u igmado Golaha Guud ee Madaxweyneyaasha iyo Madaxda Xukuumadaha, Xoghayaha Guud ee Ururka Midnimada Afrika ama urur kale oo kamid ah Ururka Midnimada Afrika ama Qaramada Midoobay.

## Qodobka 43aad

## Habraaca Tabinta

1. Dawlad kasta oo Xubin ka ah Axdigan waxay ballan-qaadaysaa inay Guddiga u soo gubiso, iyadoo u maraysa Xoghayaha Guud ee Ururka Midnimada Afrika, warbixinno ku saabsan tallaabooyinka ay meel-mariyeen ee saamaynaya qodobbada Axdigan iyo horumarka laga gaaray ku naaloonshaha xuquuqdan xil iska saareysaa in ay u gudbiso Guddiga iyadoo loo marayo Xoghayaha Guud ee Ururka Midnimada Afrika, warbixinta tallaabooyinka ay u qaadeen si ay u dhaqangeliyaan qodobbada Axdigan iyo horumarka laga gaaray kuna naalloodaan xuquuqdan:

    (a) laba sano gudahood markuu ka dhaqan-galo Dawladda Xubinta ka ah Axdigan: iyo
    (b) intaas kaddibna saddexdii sanadoodba hal mar.

2. Warbixin kasta oo la soo-gudbiyo si waafaqsan Qodobkan waxaa:

    (a) Ku jiraya Xogo ku filan kuna saabsan fulinta Axdigan, si loo siiyo guddiga faham buuxa oo ku saabsan hirgalinta Axdiga ee Dalka ay khuseyso; iyo

    (b) In ay tilmaamaan qodobbada iyo dhibaatooyinka, haddii ay jiraan, ee saamaynaya fulinta waajibaadyada ku xusan Axdigan.

3. Dawladdii Xubin ka ah Axdigan ee Guddiga u soo gudbisay warbixin kowaad oo dhammaystiran loogama baahna in warbixinta xigta ee loo soo gudbiyay si waafaqsan faqradda 1 (a) ee qodobkan, ay ku soo celiso macluumaadkii asaasiga ahaa ee ku jiray warbixintii hore.

## Qodobka 44aad

## Farriimo

1. Guddigu wuxuu farriin ku saabsan arrimaha uu ka hadlayo Axdigani ka heli karaa qof kasta, koox kasta ama hay'ad kasta oo aan dowli ahayn uu aqoonsan yahay

Ururka Midnimada Afrika, ama ay aqoonsan tahay Dawlad xubin ka ah Axdigan ama Qaramada Midoobay.

2. Farriin kasta oo Guddiga soo gaara wuxuu muujinayaa cinwaanka iyo magaca qofka qoray waxaana loola dhaqmayaa si qarsoodi ah.

## Qodobka 45aad

## Baaritaanada Guddiga

1. Guddigu, wuxuu adeegsan karaa, hanaan kasta oo ku habboon si uu u baaro arrin kasta oo hoos timaada baaxadda Axdigan, waxay ka codsan karaan Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan xog la xiriira hirgalinta Axdiga waxayna sidoo kale adeegsan karaan waddo kasta oo habboon marka ay baarayaan tallaabooyinka ay meel-marisay Dawladda Xubinta ah si ay hirgaliso Axdigan.

2. Guddigu wuxuu labadii sanaba hal mar u gudbinayaa kulanka Caadiga ah ee Golaha Madaxweyneyaasha iyo Madax Xukumadaha warbixin ku saabsan howlaha Guddiga iyo wixii xiriir ah ee u dhacay si waafaqsan qodob [44aad] ee Axdigan.
3. Guddigu wuxuu daabacayaa warbixintiisa kaddib markuu ka hubiyo Golaha Madaxweyneyaasha iyo Madaxda Xukuumadaha.
4. Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan waxay warbixinnada ka dhigayaan kuwo ay heli karaan dadweynaha ku nool dalalkooda.

# CUTUB AFARAAD
# QODOBBO QUBANE AH

## Qodobka 46aad

## Ilaha Qalin-daarashada

Guddiga wuxuu ka qalin-daaranayaa Shuruucda Caalamiga ah ee ku saabsan Xuquuqda Aadanaha, gaar ahaan qodobbada Axdiga Afrika ee xuquuqda aadanaha iyo Xuquuqda Ummadaha, Axdiga Ururka Midnimada Afrika, Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha, Mucaahadada Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta iyo xeerarka kale ee ay meelmariyeen Qaramada Midoobay iyo dalalka Afrikaanka ah ee ku saabsan xuquuqda aadanaha, iyo qiyamka iyo hidaha Afrika.

## Qodobka 47aad

## Saxiixa, Ansixinta Iyo U-Hoggaansanaanta

1) Axdigan wuxuu u furan yahay saxiixa dhammaan Dawlada xubnaha ka ah Ururka Midnimada Afrika.

2) Axdigan wuxuu uga baahan yahay ansixin iyo u-hoggaansamidda Dawladaha Xubnaha ka ah Ururka Midnimada Afrika. Dukumiintiyada ansixinta iyo uhoggaansamidda waxaa loo dhiibi doonaa Xoghaya Guud ee Ururka Midnimada Afrika.

3) Axdigan wuxuu ku dhaqan-galayaa 30 cisho gudohood ka-dib marka Xoghayaha Guud ee Ururka Midnimada Afrika uu gudoomo dukumiintiyada ansixinta iyo uhoggaansamidda ee 15 Dawladood oo xubin ka ah Ururka Midnimada Afrika.

## Qodobka 48aad

## Wax-ka-badalka iyo Dib-u-eegista Axdiga

1) Axdigan waxaa lagu samayn karaa wax-ka-badalid ama dib-u-eegis haddii Dawlad Xubin ka ah Axdigan ay codsi qoraal ah oo arrintaas ku saabsan ay u soo-gudbiso Xoghayaha Guud ee Ururka Midnimada Afrika, iyadoo shardigu yahay inaan waxka-badalka la soo-jeediyay loo-gudbin Golaha Madaxweyneyaasha iyo Madaxda Xukuumadaha si ay uga hubiyaan illaa dhammaan Dawladaha Xubnaha ka ah Axdigan ogaysiis buuxa laga siinayo, Guddiguna uu ka dhiibanayo fikirkiisa ku aadan wax-ka-badalka.

2) Wax-ka-badalka waxaa lagu ansixinayaa cod aqlabiyad hal dheeri ah oo ay u qaadayaan Dawladaha Xubnaha ka ah.

**Wax-ka-badalka 1**

Shirka Guud ee Madaxweyneyaasha Dawladaha iyo Madaxda Xukuumadaha ee Ururka Midnimada Afrika Go'aankiisii shirweynaha /AU/Dis.548 (XXIV) wuxuu sida soo socota u ansaxiyay wax-ka-baddel lagu sameeyay Qodobka 37aad (1) Axdiga Afrika ee Xuquuqda iyo baraaraha Carruurta:

Xubnaha Guddiga waxaa la dooranayaa muddo xileed shan sano ah, waxaanna dib loo dooran karaa hal mar oo kaliya. Ha yeeshee, muddo xilkeedka afar xubnood oo kamid ah Guddiga la doortay doorashadii hore wuxuu dhacayaa labo sano kaddib halka muddo xilkeedka afarta kale uu dhacayo afar sano kaddib.

Wax -ka-beddelka wuxuu dhaqan-galay markii la meel- mariyay

**SHARCI LR.42** **TAARIIKH: 03-DA DISEEMBAR 2025**

**SHARCIGA BARAKACAYAASHA GUDAHA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0796/B11/25**, ku taariikheysan **25/11/2025**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Sharciga Barakacayaasha Gudaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Barakacayaasha Gudaha.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: Hgu-086-2025
TAARIIKH: 13/12/2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA AQALKA SARE EE
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# HINDISE SHARCIYEEDKA
# "BARAKACAYAASHA GUDAHA"

Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta

## CUTUBKA 1AAD: QODOBBO HORDHAC AH

### Qodobka 1aad:
### Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa loogu yeerayaa "Sharciga Barakacayaasha Gudaha".

### Qodobka 2aad:
### Eray Bixin

Erayada halkan ku xusan waxaa loo micnaynayaa sida soo socota haddii aan si kale loogu qeexin Sharcigan dhexdiisa:

1. **"Sarkaalka xisaabaadka"** waxaa loola jeedaa Sarkaalka Xisaabaadka ee Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka oo masuulka ka ah Sanduuqa Mideysan ee Bani'aadamnimada;
2. **"Kooxaha hubeysan"** waxaa loola jeedaa xoogag hubaysan oo aan ahayn ciidammada qalabka sida ee dowladda , sida lagu qeexay Qodobka 1aad (e) ee Axdiga Kambala.
3. **"Gargaar"** waxaa loola jeedaa taakuleyn bani'aadamnimo oo la bixiyo si loo badbaadiyo nolosha, loo yareeyo dhibaatada aadanaha, loona siiyo dhammaan dadka u baahan;
4. **"MGB"** waxaa loola jeedaa Maamulka Gobolka Banaadir;
5. **"Bulshooyinka uu saameeyay barakaca"** waxaa loola jeedaa: bulshooyinka soo dhaweeya ama martigeliya dadka gudaha dalka ku barakacay, bulshooyinka ku nool meelaha ay ku barakaceen, bulshooyinka ku nool meelaha ay kusoo laabteen dadka gudaha ku barakacay ama bulshooyinka ku nool meelaha barakacayaasha dib loo dejiyey ama dib loogu raray;
6. **"Xalka waara"** waxaa loola jeedaa in xal waara loo helo dadka barakacayaasha iyadoo loo marayo inuu qofka ikhtiyaar u leeyahay inuu qaato go'aan, ku salaysan xog sax ah, oo dib u laabasho iyo dib-u-dejin loogu sameeyo goobihii ay kasoo barakeceen, isdhexgal buuxa ee goobta ay ku nool yihiin, ama isdhexgal buuxa ee goob kasta oo kamid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

7. **"Ka saarid khasab ah hooy ama dhul"** waxaa loola jeedaa ka saarid joogto ah ama kumeelgaar ah oo aan waafaqsanayn Xeernidaamiyaha Kasaaridda Dadka Dhul ama Hoy ay Deggan Yihiin;

8. **"Mabaadii'da Hagayaasha"** waxaa loola jeedaa Mabaadii'da Qaramada Midoobay ee 1998 ee Hagaya Barakaca Gudaha;

9. **"Sanduuqa Mideysan ee Bani'aadamnimada"** waxaa loola jeedaa Sanduuqa Mideysan ee Bani'aadamnimada ee lagu xussay Cutubka 4aad qod. 8aad ee Sharcigan oo loogu talagalay waxqabadka bani'aadamnimada iyo horumarinta si loo maalgeliyo kharashka ka jawaab-celinta mideysan ee bani'aadamnimada iyo istiraatiijiyadaha horumarineed ee wax looga qabanayo barakaca gudaha ee ku saleysan hannaanka loo yaqaan bulshada oo dhan (a whole of society approach);

10. **"Guddiga Farsamada ee Howlaha Barakacayaasha"** waxaa loola jeedaa Gudddiga Farsamada ee Howlaha Barakacayaasha oo lagu aasaasay Qodobka 7aad si uu u noqdo guddiga mas'uulka ka ah dhammaan hababka Dowladda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, Gobolka Banaadir iyo Dowladaha hoose isugu dubbarideyso mas'uuliyadda koowaad ee ka saaran ilaalinta iyo caawinaadda iyo sidoo kale abuuridda xaalado looga gaaro xal waara barakaca gudaha iyo dadka uu barakaca saameeyey ee ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

11. **"Dadka gudaha ku barakacay"** waxaa loola jeedaa qof ama kooxo dad ah oo lagu khasbay inay ka qaxaan guryahooda ama meelaha ay caadi ugu nool yihiin, gaar ahaan sababaha ay ka midka yihiin iska horimaadyada hubeysan, ka saarid xoog ah hoy iyo dhul ay deggan yihiin, qaxooti soo guryo noqda oo gala xaalad lamid ah tan barakacayaasha gudaha, mashaariicda horumarineed oo baaxadda weyn, rabshado, xadgudubyada xuquuqda aadanaha, musiibooyinka dabiiciga iyo kuwa bani'aadamku sameeyo, dadkaas oo aan ka tallaabin xuduudda caalamiga ah la aqoonsan yaha ee dalka;

12. **"Axdiga Kambala"** waxaa loola jeedaa Axdiga Midowga Afrika ee 2009 ee Ilaalinta iyo Taakulaynta Barakacayaasha Gudaha;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

13. **"Baaqa Nairobi"** waxaa loola jeedaa Baaqii Nairobi ee 2017 ee ku saabsanaa Xalka Waara ee Qaxootiga Soomaalida iyo Dib-ugu- laabashada Soomaaliya oo ay ku jiraan Qorshe Howleedka Dhameystiran ee Nairobi ee Xalka Waara ee qaxootiga Soomaaliyeed;

14. **"Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka"** waxaa loola jeedaa Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka ee lagu aasaasay Sharciga Lambar 2 ee 2016;

15. **"Xeer-nidaamiyaha Qaranka ee ka Saaridda Dadka Hoyga ama Dhulka ay Deggan Yihiin"** waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyaha Qaran ee ay Dowladda Federaalka Soomaaliya ansixisay sannadka 2019;

16. **"Siyaasadda Qaranka ee Qaxootiga soo Guryo Noqday iyo Barakacayaasha"** waxaa loola jeedaa Siyaasadda Qaranka ee sannadkii 2019-ka ee ku saabsan Qaxootiga soo Guryo Noqday iyo Barakacayaasha oo ay ansixisay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

17. **"Hanti"** waxaa loola jeedaa lahaanshaha sheey leh qiime dhaqaale sida, hantida guurtada iyo ma guurtada ah oo ay ku jiraan dhul, hanti loo jeedo oo la taaban karo iyo tan aan la taaban karin sida hantida aqooneed ama xuquuqda daabacaadda, lacagta, faa'iidooyinka maaliyadeed, deynta, iyo xuquuqda qandaraaska sida lagu qeexay sharciyada caalamiga ah;

18. **"Ilaalinta"** waxaa loola jeedaa dhammaan howlaha loogu talagalay helitaanka ixtiraam buuxa ee xuquuqda dadka gudaha ku barakacay iyadoo la raacayo xuquuqda aasaasiga ah iyo xorriyaadka ee ku xusan Dastuurka Ku-Meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo heshiisyada xuquuqda aadanaha iyo xeerarka dagaalka ee dalalka gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee khuseeya; iyo

19. **"Deeq bixiyeyaal laba geesood ah"** waxaa loola jeedaa dowlad shisheeye oo si toos ah Dowladda Soomaaliya cawimaad u soo gaarsiisa, iyada oo aan usoo marsiinayn hay'ado caalami ah.

## Qodobka 3aad:
## Ujeeddada Sharciga

Ujeeddada Sharcigani waa:

1. In la ilaaliyo baahiyaha gaarka ah ee dadka gudaha ku barakacay, kuwa dib dalka ugu soo guryo noqday , iyo in wax laga qabto nuglaanta ka dhalata xaaladda barakaca iyo helitaanka xal waara ;

2. In la hubiyo in dadka gudaha ku barakacay ee ah muwaadiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay si xor ah u heli karaan xuquuqdooda madaniga ah iyo tan siyaasadeed sida ku xusan Cutubka 2aad ee Dastuurka-ku-meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo ay kamid yihiin xaqa ka qeybgalka, xaqa codeynta iyo in loo doorto xafiis dowladeed, sida ku cad Mabda'a 22aad (d) ee Mabaadii'da Hagayaasha iyo Qodobka 9aad (2) (l) ee Axdiga Kambala;

3. In aan la siinin ama lagu sifeynin astaan sharciyeed oo gaar ah oo lagu aqoonsado dadka gudaha ku barakacay sida ku qeexan Sharcigan, oo aan ahayn in lagu sifeeyo in ay yihiin muwaadiniin u dhashay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo

4. In aan laga difaacin qof gudaha ku barakacay in lagu soo oogo dacwad ah inuu ku kacay fal dambiyeed liddi ku ah sharuucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama sharci caalami ah ee khuseeya sababtoo ah in uu yahay barakace darteed.

## Qodobka 4aad:
## Awood iyo Dhaqagal

1. Sharcigan waxaa la meel marinayaa iyadoo la adeegsanayo awoodda sharci-dejinta ee Baarlamaanka Federaalka ee ku xusan Qodobada 69 faqrada 1 (a) iyo 71 (b) ee Dastuurka Ku meel gaarka ah ee Federaalka, waxaana laga fulinayaa guud ahaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

2. Sharcigan waxa uu khuseeyaa dhammaan hay'adaha dowladda federaalka ah, dowladdaha xubnaha ka ah federaalka, Maamulka Gobolka Banaadir, dowladaha hoose, hay'adaha caalamiga ee samafalka iyo horumarinta, saaxiibbada

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

beesha caalamka, ururrada bulshada rayidka ah, iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ee ka howlgala Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Waa in lagu dhaqmaa iyadoo aynan jirin kala sooc ama takoor nooca uu doono ha ahaadee ama sabab kasta ha noqotee;

3. Qodobbada Sharcigan waxa ay si gaar ah u khuseeyaan dhammaan dadka ku barakacay guud ahaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyada oo aanan loo eegin sababaha barakaca;
4. Sharcigan waxa uu hir-gelinayaa:

   a) Axdiga Kambala ee 2009, oo lagu soo daray Mabaadii'da Hagayaasha ee Barakaca Gudaha; iyo

   b) Mabaadii'da Hagayaasha Qaramada Midoobay ee 1998 ee Barakaca Gudaha.

## CUTUBKA 2AAD: MABAADII'DA HAGAYSA ILAALINTA IYO TAAKULEYNTA EE BARAKACAYAASHA

### Qodobka 5aad:
### Qaab dhismeedka Sharci

1. Iyadoo la tixraacayo dastuurka iyo sharciyada kale ee la adeegsan karo, lana raacayo qodobbada Sharcigan, ilaalinta iyo taakuleynta bani'aadamnimo ee la siinayo dadka gudaha ku barakacay iyo kuwa kusoo laabtay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ka mid noqon doonaan qorshaha xal waara oo ku saleysan sida hoos ku qoran:
   a) Xuquuqaha aasaasiga ah iyo waajibaadka muwaaddinka ee ku xusan Cutubka 2aad ee Dastuurka Ku meel gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   b) Horumarinta xuquuqda aadanaha, ku dhaqanka sharciga, iyo halbeegyada guud ee qawaaniinta caalamiga ah, sida ku cad Qodobka 40aad ee Dastuurka Ku meel gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   c) Baaqa Nairobi ee ku saabsanaa Xalka Waara ee Qaxootiga Soomaalida iyo dib-u-dhexgalka bulshada Soomaaliyeed ee uu ku jiro Qorshe-howleedka Dhameystiran ee Nairobi ee Xalka Waara ee qaxootiga Soomaaliyeed;
   d) Qorshooyinka Xilliyaysan ee khuseeya Horumarinta Qaranka;
   e) Xeer-nidaamiyaha Qaran ee Kasaaridda Dadka Hoyga ama Dhulka ay

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Deggan Yihiin;

f) Siyaasadda Qaranka ee Qaxootiga soo Guryo-noqday iyo Barakacayaasha gudaha;
g) Istiraatiijiyadaha qaranka ee khuseysa xalka waara; iyo
h) Hannaanka Gudiga Joogtada ah ee Hay'adaha Qaramada Midoobay ee 2010 ee xalka waara ee Dadka Barakacayaasha ah.

## CUTUBKA 3AAD: MAS'UULIYADDA ILAALINTA IYO TAAKULEYNTA

### Qodobka 6aad:
### Mas'uuliyadda Koowaad

1. Mas'uuliyadda koowaad ee ilaalinta iyo taakuleynta dadka gudaha ku barakacay , kuwa soo guryo noqday iyo sidoo kale abuurista xaalado caadi ah oo lagu gaaro xal waara waxay saaran tahay dhammaan dowladda heer Federaal, Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka, Maamulka Gobolka Banaadir iyo dowladaha hoose, sida ku cad qodobka 5aad (1) ee Axdiga Kambala.

2. Mas'uuliyadda Dowladda Federaalka waxaa kamid ah:
   a) Dhaqangelinta sharcigan ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo dhan iyo u hoggaansanaanta waajibaadka caalamiga ah ;
   b) ka hortagga iyo ka fogaanshaha xaaladaha sababi kara ama horseedi kara barakaca dadka iyadoo la raacayo Mabda'a 5aad ee Mabaadii'da Hagayaasha iyo Qodobka 3aad (1) (b) ee Axdiga Kambala;
   c) Ka hortagga barakaca aan loo aabbo yeelin sida ku qeexan Mabda'a 6aad (2) ee Mabaadii'da Hagayaasha iyo Qodobka 4aad (4) ee Heshiiskii Kambala, sida ku cad Sharcigan oo ay kamid yihiin rabshado bulsho, iyo isku-dhac hubeysan;
   d) Isu-duwidda ilaalinta iyo taakuleynta iyo sidoo kale sidii xal waara loogu heli lahaa dadka ku barakacay gudaha;
   e) Aasaasidda guddi farsamo oo udub-dhexaad u ah isuduwidda ilaalinta iyo taakuleynta iyo weliba xalalka waara, ee lala yeesho daneeyeyaasha qaranka iyo kuwa caalamiga ah, sida ku qeexan Cutubka 4aad ee Sharcigan;.
   f) Bixinta gargaarka bani'aadamnimada, sida ku cad Mabda'a 25aad (1) ee Mabaadi'da Hagayaasha;
   g) In ay Dowladdu hubiso in uu gargaarku yahay mid ku salaysan baahiyaha barakacayaasha, sidoo kale waa in ay isla xisaabtan iyo dabagal ku samayso in



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

uu gargaarku u gaaray dadka loogu talagalay si isku dheelli tiran; iyo

h) Dejinta xaaladaha ku habboon in xal waara la gaarsiiyo dadka gudaha ku barakacay, sida ku cad mabaadii'da 28aad (1) iyo 29aad ee Mabaadii'da Hagayaasha, iyo Qodobka 11aad (1) ee Axdiga Kambala, iyo Cutubka 8aad ee Sharcigan.

## Qodobka 7aad:
## Adeegsiga Mas'uuliyadda Koowaad

1. Sida uu qabo Sharcigan, Dowladda Federaalka waa in ay :

   a) Gudataa waajibaadkeeda koowaad iyadoo la kaashaneysa Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, ururrada caalamiga ah ama hay'adaha samafalka, iyo ururrada bulshada rayidka ah, iyadoo lagu saleynayo mabaadii'da 25aad (2) iyo 27aad (2) ee Mabaadii'da Hagayaasha, iyo Qodobka 4aad (3) ee Axdiga Kambala.

   b) In ay ixtiraamto waajibaadka Midowga Afrika iyo Qaramada Midoobay, iyo sidoo kale doorka ururrada samafalka ee caalamiga ah si ay u siiyaan badbaadin iyo gargaar dadka gudaha ku barakacay sida ku qeexan qodobka 5aad (3) iyo qodobka 6aad ee Axdiga Kambala. ;

   c) In ay hubiso in la ixtiraamo mabaadii'da bani'aadamnimo, dhexdhexaadnimada, eex la'aanta, iyo madax-bannaanida hawlwadeennada bani'aadamnimada, sida ku cad Qodobka 5aad (8) ee Axdiga Kambala;

   d) In ay u oggolaato marinka degdegga ah ee aan la xannibin dhammaan shixnadaha bani'aadamnimo, sida ku cad Qodobka 3aad (1) (j) iyo sida ku qeexan Qodobka 5aad (7) ee Axdiga Kambala;

   e) In ay xurmeeyso kana ilaaliso weerarka ama waxyeellada kale ee loo geysanayo shaqaalaha bani'aadamnimo ama agabyada kale ee gargaar ahaan loo geeyay ama ka faa'iideysiga barakacayaasha, sida ku cad Qodobka 5aad (10) ee Axdiga Kambala; iyo

   f) Xaqa dadka gudaha ku barakacay ay u leeyihiin inay codsadaan difaac iyo gargaar, sida ku cad Mabda'a 3aad (2) ee Mabaadii'da Hagayaasha, iyo Qodobka 5aad (9) ee Axdiga Kambala.

## CUTUBKA 4AAD: ISKU DUWIDDA, QAAB-DHISMEEDKA HOWLAHA BARAKACAYAASHA

### Qodobka 8aad:

### Dhisidda Guddiga Farsamada ee Howlaha Barakacayaasha

1. Waxaa Sharcigan gudihiisa lagu aasaasayaa Guddiga Farsamada ee Howlaha Barakacayaasha oo ka shaqayn doona isku dubbariddida iyo isku duwidda howlaha Dowladda Federaalka, Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, Gobolka Banaadir iyo Dowladaha Hoose oo ku aaddan barakacayaasha gudaha.

2. Waxa ay ka koobnaan doonaan wasaarradaha Federaalka ee soo socda:
   a) Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta oo iyadu noqon doonta Wasaaradda hoggaanka u ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyadoo adeegsanaysa Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka , si loo hubiyo ilaalinta iyo taakuleynta, iyo xalka waara oo loo helo qaxootiga dib usoo laabtay iyo barakacayaasha.
   b) Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare;
   c) Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha;
   d) Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada;
   e) Wasaaradda Shaqada iyo Adeegyada Bulshada;
   f) Wasaaradda Howlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guriyeynta;
   g) Wasaaradda Amniga Qaranka;
   h) Wasaaradda Beeraha;
   i) Wasaaradda Xanaanada Xoolaha;
   j) Wasaaradda Qoyska & Xuquuqda Aadanaha;
   k) Wasaaradda Bi`ada & Isbeddelka Cimilada;
   l) Wasaaradda Gaadiidka Cirka & Dhulka;
   m) Wasaaradda Kalluumeysiga & Khayraadka Badda;
   n) Wasaradda Garsoorka & Dastuurka;
   o) Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha;
   p) Wasaaradda Maaliyadda.
   q) Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka;
   r) Hay'adaha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo Gobolka Banaadir ee u xilsaaraan arrimaha barakacayaasha.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 9aad:
## Wajibaadka Guddiga

1. Sida lagu aasaasay Sharciga lagu dhisay ee Nr 2 ee 2016, Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waxa ay noqonaysaa Hay'ad loo asteeyey in ay ka shaqeyso arrimaha dadka gudaha ku barakacay, kuwa soo guryo noqday, iyo bulshada uu barakucu saameeyey.

2. Guddiga Farsamada ee Howlaha Barakacayaasha waxaa uu diyaarinayaa uuna ansixinayaa tilmaamo shaqo oo qoran oo hagaya hawsha guddiga;

3. Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka ayaa fududeynaya kulammada guddiga oo siinaysa taageero farsamo iyo fududeynta howlaha guddiga;

4. Iyadoo lagu shaqeynayo hagitaanka siyaasadeed ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, kulammada Guddiga Farsamada Howlaha Barakacayaasha waxaa guddoomin doona Wasiirka Arrimaha Gudaha haddii kulanka ay isu imanayaan wasiirro Dowlayaal ama wasiir-ku-xigeenno. Hase yeeshee, haddii ay isugu imanayaan howlwadeenno ama agaasimayaal ka socda wasaaradaha guddigu ka kooban yahay, Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka ayaa guddoominaya kulanka Guddiga Farsamada Arrimaha Barakacayaasha.

## Qodobka 10aad:
## Qoondada Miisaaniyadeed ee Barakacayaasha

1. Qoondayn aan ka yarayn seddax boqolkiiba (3%) miisaaniyadda qaranka waa in sanad walba lagu shubo khasnadda Sanduuqa Mideysan ee Bani'aadamnimada.

2. Deeq-bixiyeyaal labo-geesood ah, kuwo kala duwan, iyo kuwo gaar ah ayaa ugu deeqi kara lacago sanad kasta ama xilli kasta Sanduuqa Mideysan ee Bani'aadamnimada hadba marka ay u arkaan inay ku habboon tahay, deeqbixiyeyaashaas waxaa ku jira sanduuqa IGAD ee deeq-bixiyeyaasha badan oo loo aasaasay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya sida ku xusan Qeybta VIaad (3) ee Baaqii Nairobi.

3. Sameynta Sanduuqa Mideysan ee Bani'aadamnimada ee ku xusan Sharcigan ma

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

noqonayo mid xagal-daaciya taageeridda ama maalgelinta ilaalinta iyo taakuleynta iyo sidoo kale xalalka waara ee loogu talagalay dadka ku barakacay gudaha iyo dadka uu barakucu saameeyay ee ka imaaneysa sanduuq lacageed kasta oo jira, ee uu ku jiro Sanduuqa Dhexe ee Ka-jawaabista Degdegga ah.

## CUTUBKA 5AAD: BAAXADDA KA HORTAGGA, ILAALINTA IYO TAAKULEYNTA BARAKACAYAASHA

### Qodobka 11aad:

### Ka-hortagga Barakicinta Sharci darrada ah

1. Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waa in ay:
   a) Ka ilaaliso bulshooyinka iyo shakhsiyaadka barakaca sharci darrada ah sida ku xusan Sharcigan iyo sida ku cad Mabda'a 6aad ee Mabaadii'da Hagaya iyo Qodobka 4aad (4) ee Axdiga Kambala ee 2019;
   b) Ka hortagto barakaca iyadoo wax laga qabanayo ama la dhimayo sababaha keena barakaca, sida ku qeexan Qodobka 3aad (1) (b) ee Axdiga Kambala, lagana fogaado xaaladaha horseedaya barakac, sida ku cad Mabda'a 5aad ee Mabaadii'da Hagayasa barakacayaasha ee Qaramada Midoobay;
   c) Diyaariso islamarkaana fuliso tallaabooyin u diyaar garow ee ka hortagga barakaca, oo ay ku jiraan digniin, iyo qiimeynta halista iyadoo la kormeerayo meelaha u nugul in looga barakoco rabshado, musiibooyin ama saamaynta isbeddelka cimilada, iyo hirgelinta istiraatiijiyad yareyn karta halista aafooyinka;
   d) Hubiso in dib-u-dejin loo sameeyo barakacayaasha halkii khasab looga saari lahaa dhulkii ay degganaayeen iyadoo loo aqoonsanayo xaalad gaar ah oo ah in dib-u-dejinta noocan ahi ay noqon doonto xal waara si looga fogaado xaalad barakac;
   e) Dejiso tallaabooyin la qabsi ah oo ku saabsan saameynta barakaca ka dhasha isbeddelka cimilada iyo sidoo kale musiibooyinka ku bilowda si lama filaan ah.
   f) Hubiso u hoggaansanaanta Xeernidaamiyaha Qaran ee Kasaaridda Dadka Hooy ama Dhul ay Deggan Yihiin; iyo
   g) In ay ka ilaaliso dadka gudaha ku barakacay iyo kuwa soo laabanaya in la tahriibiyo ama laga ganacsado.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 12aad:
## Barakaca la Xiriira Mashaariicda Horumarinta

1. Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waa in ay, intii suurtagal ah ka hortagto barakicinta dadka sababo la xiriira mashaariic horumarineed oo ay fuliyaan hay'ado dowladeed ama kuwo gaar loo leeyahay, sida ku cad qodobka 10-aad ee Heshiiska Kampala ee 2019.

2. Barakicinta ay sababto mashaariicda horumarinta dalka waa inay ahaato xaalad gaar ah oo la qaado, kadib marka la darso dhammaan wax-yaabaha kale ee la sameyn karo oo beddeli kara barakicinta. Go'aanka lagu barakicinayo sababo la xiriira mashaariic horumarineed waxaa gaaraya Guddiga farsamada ee howlaha barakacayaasha ee ku xusan qodobka 8aad (2) ee xeerkan. waxaana ay tahay mashaariicda horumarineed ee kicinaya barakacayaasha in lagu sababeeyo sarreysiinta danaha guud sida ku xusan Qodobka 10aad ee Axdiga Kambala. Gaar ahaan, mashaariicda noocan ahi waa in:
   a) Lagu caddeeyaa baahida daruuriga ah iyo ka sarreynta danaha guud, oo lagu caddeeyay dhageysi dadweyne iyo la-tashiyo ku saabsan sababeynta iyo qorsheynta mashruuca, oo ay ku jiraan barakac kasta oo ka iman kara mashruuca;
   b) Xaqiijinta ujeeddo dan guud oo sharci ah oo ay oggolaanayaan shuruucda dalka, iyadoo sabab looga dhigayo mashruuca, lana raacayo caddaymo maangal ah oo muujinaya in aysan jirin dariiq kale oo suurtagal ah oo looga hortagi karo barakac;
   c) In ay ahaato mid u dhiganta qorshaynta iyo hirgelinta mashruuca horumarinta ujeeddo sharci ah, iyo dhinaca kale, ilaalinta dadka barakacay ama uu saameeyey mashruuca laga hadlayo; iyo
   d) In la yareeyo lana xalliyo saameynta barakaca la xiriira horumarka oo ay ku jirto in laga raadiyo oggolaansho dadka uu barakucu saameeyay iyo in la siiyo ilaalin iyo taakuleyn iyo sidoo kale xalal waara ama magdhaw, sida ku xusan Cutubka 8aad ee Sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 13aad:
## Isku duwidda, Ilaalinta iyo Taakuleynta

1. Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waa in ay:
   a) Isku duwdaa, ilaalin iyo kaalmo siisaa, oo ay ku jiraan xalal waara, dhammaan dadka gudaha ku barakacay iyo bulshooyinka uu barakucu saameeyay, iyadoo aan loo eegin sababta iyo goobta barakaca.
   b) Ilaalin iyo taakuleyn siisaa, oo ay ku jiraan xalalka waara, dhammaan dadka ku barakacay gudaha dalka iyadoo aan loo kala soocin nooc kasta oo barakaca kamid ah sida ku xusan Qodobka 11aad ee Dastuurka Ku meel gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida jinsiga(rag, dheddig), siyaasadda ama afkaarta kale, dal, asal ahaan ama bulsho ahaan, xaaladda sharci ama bulsho, da', naafonimo, hanti, dhalasho, ama in ay barakacayaal yihiin darteed, ama xaalad kasta oo kale oo lamid ah, sida ku cad Mabda'a 4aad (1) ee Mabaadi'da Hagaya iyo Qodobka 9aad ( 1) (a) ee Axdiga Kambala;
   c) Xaqiijisaa ilaalin gaar ah ee dadka nugul iyo kuwa baahiyaha gaarka ah qaba ee gudaha ku barakacay, sida carruurata gaar ahaan carruurta aan lala socon, hooyooyinka uurka leh, hooyooyinka leh carruurta yar yar, haweenka masuulka ka ah qoysaska, dadka naafada ah, iyo dadka waayeelka ah sida ku xusan Mabda'a 4aad (2) ee Mabaadi'da Hagayasa barakacayaasha ee Qaramada Midoobay;
   d) In ay la shaqeeysaa hay'adaha dowladda oo ay khusayso si loo hubiyo in qof kasta oo lagu helo fal dembiyeedka ku xusan Sharcigan uusan ka baxsan caddaaladda.

## CUTUBKA 6AAD: ILAALINTA XILLIGA BARAKACA
## Qodobka 14aad:
## Tallaabooyinka Ilaalinta

1. Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranku waa in ay qaaddo tallaabooyin ay ku ilaalinayso dadka gudaha ku barakacay inta lagu guda jiro barakaca, sida ku cad Mabaadii'da 10aad ilaa 23aad ee Mabaadii'da Hagaya iyo Qodobka 9aad ee Axdiga Kambala.

2. Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waa in ay qaaddaa tallaabooyin

gaar ah oo lagu ilaalinayo xaqa:

a) Dadka gudaha ku barakacay waxay xaq u leeyihiin inay si nabadgelyo ku degi karaan meel kasta oo ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
b) Dadka gudaha ku barakacay in aan xoog dib loogu celin ama lagu dejin meelnabadgelyadooda, xorriyaddooda, ama caafimaadkoodu ay khatar kusoo wajihi karto, sida ku cad Mabda'a 15aad (a) (d) ee Mabaadii'da Hagaysa iyo Qodobka 9aad (2) (e) ee Axdiga Kambala;
c) Ka ilaalinta dadka gudaha ku barakacay kufsiga iyo tacadiyada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha sida naafeynta, askareynta caruurta ku dhex Nool goobaha ay ka jiraan dagaallada hubeysan, shaqada qasabka ah, iyo ka ganacsiga dadka iyo tahriibinta;
d) Hantida dadka gudaha ku barakacay sida ku cad Mabda'a 21aad ee Mabaadii'da Hagaya, Qodobka 9aad (2) (i) ee Axdiga Kambala;
e) Lahaanshaha hantida, oo ay ku jirto hanti dhaqameed, oo ay ka tageen dadka gudaha ku barakacay ama ay heleen, iyo in lagasoo horjeesto burburin iyo la wareegid, dhac iyoi weerar toos ah ama aan loo kala soocin dadka iyo shaqo ama adeegsi sharci darro ah, sida ku cad Mabda'a 3aad ee Mabaadii'da Hagayasa barakacayaasha ee Qaramada Midoobeey iyo Qodobka 9aad (2) ( l) ee Axdiga Kambala;
f) Hantida ay leeyihiin dadka ku barakacay gudaha in laga ilaaliyo dhaca, weerar toos ah ama mid aan loo kala soocin dadka ama rabshadaha kale iyo in laga ilaaliyo dhac gabbaad looga dhigto howlgallo ama ujeeddooyin milatari, in laga dhigto aalad aargudasho, iyo in la burburiyo ama loo waxyeeleeyo qaab ciqaab wadareed, xaaladaha isku dhaca hubeysan, sida ku cad Mabda'a 21aad (2) ee Mabaadii'da Hagayasa barakacayaasha ee Qaramada Midoobeey.

## Qodobka 15aad:
## Tallaabooyinka Gaarka ah

1. Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranku waa in ay qaaddaa tallaabooyin gaar ah oo ay ku ilaalinayso dadka gudaha ku barakacay kuwaas oo ka hortegaya:
   a) Rabshado
   b) Hooy-ka-saarid khasab ah oo baalmarsan Xeernidaamiyaha Qaran ee Kasaaridda Dadka Hoyga ama Dhulka ay ku nool yihiin;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
الصومال
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

c) Takoorid ama xaqiraad ku saleysan in ay barakeceen darteed;
d) Xasuuqa, dambiyada ka dhanka ah aadanaha, iyo dembiyada dagaalka;
e) Dil aan loo aabbo yeelin, dil toogasho ah oo aan maxkamad caddaalad ahi amrin, xarig ama afduub sharci darro ah iyo maqnaansho la khasbay;
f) Jirdil, dhaqan xumo ama ciqaab ka baxsan bani'aadamnimada; iyo
g) Gaajo.

## CUTUBKA 7AAD:
## FULINTA, ILAALINTA IYO TAAKULEYNTA
### Qodobka 16aad:
### Ilaalinta Rayidnimada iyo Dhawrista Bani'aadamnimada

1. Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waxa ay:-
   a) Qaadaysaa tallaabooyin gaar ah oo lagu ilaalinayo xaaladda rayidnimada, bani'aadamnimada iyo caawinta dadka ku barakacay gudaha;
   b) ka ilaalinaysaa dadka gudaha ku barakacay ayada oo la kaashanaysa Hay'adaha Amniga soo gelitaanka kooxaha ama unugyada hubeysan, kuna sameenaysaa hub ka dhigis iyo ka soocid kooxaha ama unugyada noocaas ah, sida ku cad qodobada 3aad (1) (f) iyo 9aad (2) (g) ee Axdiga Kambala.

### Qodobka 17aad:
### Tallaabooyinka Fulineed

1. Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waa in ay fulisaa iskuna dubbaridaa hirgelinta tallaabooyinka muhiimka u ah howlgalka ilaalinta, taakuleynta iyo awood-u-siinta dadka gudaha ku barakacay si ay u gaaraan xalalka waara. Tallaabooyinkan waxaa ka mid noqonaya:
   a) Ka caawinta dadka gudaha ku barakacay helidda dokumiintiyada lagama maarmaanka u ah oo ay ku jiraan dukumiintiyada cusub ama kuwo beddelaad ah, sida baasaboorrada, dukumiintiyada aqoonsiga shakhsiga, iyo shahaadooyinka guurka ama furiinka, dhalashada iyo dhimashada sida ku cad Mabda'a 20aad ee Mabaadii'da Hagayasa Barakacayaasha ee Qaramada Midoobay iyo Qodobka 13aad (2) ee Axdiga Kambala;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

b) Diiwaangelinta dhammaan dadka ku barakacay gudaha dalka sida ku cad qodobka 13aad (1) ee Axdiga Kambala si loo helo loona keydiyo xog sugan, sida ugu dhakhsaha badan uguna habboon;
c) Qiimeyn xilliyeed ee halista barakaca heer qaran, heer dowlad-goboleed, iyo heer degmo iyo fulinta tallaabooyin lagama maarmaan ah si looga hortago ama loo yareeyo barakaca ama loogu diyaar garoobo barakac; iyo
d) Kala shaqeynta hay'adaha caalamiga ah ee ay khuseyso ama hay'adaha samafalka, iyo ururada bulshada rayidka fulinta talaabooyinkan, sida ku qeexan qodobka 5aad (5) ee Axdiga Kambala.

## CUTUBKA 8AAD: XALKA WAARA
## Qodobka 18aad:
## Habraaca Xalka Waara

Mas'uuliyadda koowaad ee Dowladda Federaalka Soomaaliya waa in ay abuurto xaalado caadi ah oo lagu gaarayo xal waara oo ku saleysan hab ay u dhan yihiin laamaha Dowladda ee isku-dubaridka howlaha Dowladda Federaalka, Dowladaha xubnaha ka ah Federaalka, Maamulka Gobolka Benaadir, iyo heerarka degmooyinka, iyadoo lagu saleynayo hannaan ay bulshada u dhan tahay.

## Qodobka 19aad:
## Habraac ay Bulshadu u Dhantahay

Habraaca ay bulshada u dhan tahay waa in ay qeyb ka ahaadaan:

1. abuuridda xaalado lagu gaarayo xal waara oo salka ku haya guud ahaan, dadka gudaha ku barakacay, dadka uu barakucu saameeyay, iyo qaxootiga soo noqonaya ee aan xal waara loo helin;

2. Ka qeybgelinta heerarka Dowladda Federaalka, Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka, Maamulka Gobolka Benaadir, maamullada degmooyinka, ururada caalamiga ah, bulshada rayidka ah, ganacsatada dadka ku barakacay gudaha iyo bulshada uu barakucu saameeyay.

3. Mabaadii'da soo socota waa inay hagaan hannaanka bulshadu u dhan tahay ee

xalka waara:

a) Qiimeynta baahiyaha dadka gudaha ku barakacay iyada oo lagu salaynayo xulashadooda xalka waara;
b) Xal waara oo ay hormuud ka tahay Dowladda, bulshaduna qeyb ka tahay;
c) Qorshaha horumarinta magaalooyinka waa in tixgelin laga siiyaa barakacayaasha si ay bulshada ugu dhex noolaadaan, meesha la dajinaayana noqoto deegaan ku habboon oo laga gaarsiin karo kaalmada bani'aadinimo, tixgelinaysana baahidooda hormarineed;
d) Sameynta waxqabadyo wadajir ah oo dhammeystiran si ay awood ugu yeeshaan isku-filnaanshaha;

## Qodobka 20aad:
## Hantida Barakacayaasha

1. Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waa-
   a) In ay hubisaa in hantida dadka gudaha ku barakacay laga ilaaliyo dhammaan xaaladaha suuragalka ah ee kasoo horjeeda sharciga iyo la wareegid hantidooda si sharci darro ah, iyo ku shaqaysi ama u adeegsi hantidooda si baalmarasan shuruucda dalka, Mabaadii'da Hagaysa Barakacayaasha Qaramada Midoobay iyo Axdiga Kambala ee 2009.
   b) In ay tixgelisaa ku-dhaqanka Mabaadii'da Qaramada Midoobay ee Guriyeynta iyo Soo-celinta Hantida;
   c) In ay dammaanad-qaaddo helitaanka guryaha, dhulka, iyo xuquuqda lahaanshaha ee loo siman yahay, oo ay kamid yihiin dadka gudaha ku barakacay
   d) in ay hubiso in dadka gudaha ku barakacay iyo kuwa dib usoo noqday, markii ay ku laabtaan deegaanadii ay ka yimaadeen ay dib usoo ceshadaan hantidooda iyagoo gacan ka helaya maamulka deegaanka, dhaqanka iyo dowladda;in ay magdhaw ka siiso qasaaraha marka guryo, dhul ama hanti ay leeyihiin dad barakacayaal ah iyo kuwa soo noqday looga iibiyo qof qiime lacageed ogeysiis la'aan;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 21aad:
## Dejinta Shuruudaha Caadiga ah ee Lagu Gaarayo Xalka Waara

1. Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waa in ay -
   a) qaaddo talaabooyin la taaban karo iyo dariiq xal waara loogu helo dadka gudaha ku barakacay iyo kuwa kusoo noqday si nabdoon oo sharaf leh;
   b) ku dhaqanto Mabaadii'da 28aad iyo 29aad ee Mabaadii'da Hagaya iyo Qodobbada 11aad iyo 12-aad ee Axdiga Kambala, iyo Qaab-dhismeedka Guddiga Joogtada ah ee Hay'adaha Qaramada Midoobay ee Xalka Waara ee Dadka Barakacayaasha ah, iyo Istiraatiijiyadda Xalka Waara ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   c) Ka shaqayso in lagu guuleysto xalka waara ee soo socda ee dadka gudaha ku barakacay:
      i. Ku noqosho ikhtiyaari ah iyo dib-u-dhexgal bulsho waarta oo lagu sameeyo guryahooda ama goobaha ay caadiga u degganaayeen;
      ii. isdhexgal deegaan oo waara oo ka dhaca meelaha ay ku barakaceen dadka gudaha ku barakacay; iyo
      iii. Dib-u-dejin iyo isdhexgal waara in laga sameeyo meelo kale oo dalka ka mid ah.

## Qodobka 22aad:
## Xulashada Xalka Waara

Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waa inay hubisaa in dadka gudaha ku barakacay ay ikhtiyaar u leeyihiin xulashada xalka waara iyo ka-qeybgalkooda buuxa ee qorsheynta iyo maaraynta xalka waara.

## Qodobka 23aad:
## Geeddi-socodka Xalka Waara

1. Inta lagu guda jiro abuuridda xaalado caadi ah si loo gaaro xal waara, Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waa in ay:
   a) xiriir la yeelato Dowladaha xubinta ka ah Dowladda Federaalka si loogu dhiirigeliyo in dadka gudaha ku barakacay ay qayb ka noqdaan qorsheynta magaalooyinka muddada fog iyo qorshooyinka horumarinta, oo ay ku jiraan

sameynta magaalooyin cusub;

b) adeegsato istiraatiijiyad bani'aadamnimo iyo horumarineed oo isku dhafan si loo gaaro xal waara; iyo

c) soo bandhigtaa dhiirigelin horumarineed iyo mashaariic loogu talagalay dhiirrigelinta isku-tashiga iyo adkeysiga dadka gudaha ku barakacay, bulshada uu barakucu saameeyay, iyo qaxootiga soo noqonaya ee aan helin xal waara.

## Qodobka 24aad:
## Halbeegyada Xalka Waara

1. Halbeegyada soo socda waa inay tilmaan u noqdaan ku-guuleysiga xalka waara:

   a) Nabadgelyada iyo amniga muddada-fog ee barakacayaasha gudaha;

   b) Dib-usoo-celin buuxda iyo ku dhaqanka xorriyadda dhaqdhaqaaqa iyo xulashada goobta deggenaashaha

   c) Helitaanka heer nololeed ku filan oo takoor la'aan ah;

   d) helitaanka shaqo, caafimaad, waxbarasho iyo biyo nadiif ah;

   e) Helitaanka habab wax-ku-ool ah oo lagu soo celiyo guryaha, dhulka iyo hantida;

   f) Helitaanka dukumiintiyada ee ku xusan qodobka 17aad faqrada (a) ee sharcigan);mideynta qoysaska iyo aasaasidda masiirka iyo halka ay ku sugan yihiin ehelka maqan;

   g) in si siman looga wada qeyb qaato arrimaha danta guud; iyo

   h) helitaanka cadaalad aan takoor lahayn.

## Qodobka 25aad:
## Xalka Ku-Meel-Gaarka ah

1. Xalka ku meel gaarka ah waxaa loogu talagalay in lagu hagaajiyo xaaladaha nololeed iyo habnololeedka barakacayaasha inta laga gaarayo xal waara. Xalka ku-meelgaarka ah waxaa kamid noqon kara deeqaha lacagta, kireysiga ama guryaha ku-meel-gaarka ah ama dhul kiro ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## CUTUBKA 9AAD: WACYIGELINTA DADWEYNAHA, WAXBARASHADA IYO TABABARRADA

### Qodobka 26aad:
### Wacyigelinta Dadweynaha

1. Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waa in ay :
   a) Bixisaa macluumaad guud oo ku saabsan xaaladda barakacayaasha iyo dadka soo noqday iyo muhiimadda ay leedahay in wax laga qabto baahidooda gaar ahaaneed;
   b) Fududeeysaa bixinta tababarro iyo waxbarasho si loo dhiso wacyiga bulshada ee u aaddan arrimaha khuseeya barakacayaasha;
   c) Kor u qaaddo adeegsiga mabaadii'da Axdiga Kambala ee wadahadalka iyo dib-u-heshiisiinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si loo xalliyo xaaladda dadka ku barakacay gudaha iyo kuwa soo noqday.

## CUTUBKA 10AAD: MASUULIYADDA DEMBI IYO CIQAABTA KADHALATA KU XADGUDUBKA BARAKACAYAASHA

### Qodobka 27aad:
### Dembiyada

1. Barakicinta sharci darrada ah sida ku qeexan Sharcigan waa mamnuuc. Mid kasta oo kamid ah barakicinta aan loo aabbo yeelin sida ku qeexan Sharcigan wuxuu noqonayaa dambi mas'uuliyad adag leh.

2. Sida ku xusan Sharcigan, qof kasta oo sameeya, ama gacan ka geysta shirqool uu ka dhalanayo barakicin sharci darro ah wuxuu noqon doonaa dembiile.

3. Sida ku xusan Sharcigan, qof kasta oo sameeya mid ka mid ah ficilladan soo socda si ula kac ah, ogaa ama caawimaad siiya dadka sameynaya kuwaas oo ka dhan ah dadka gudaha ku barakacay wuxuu noqonayaa qof gaystay dambi ah:
   a) Dil sabab la'aan ah ee duruufaha aan lagu caddeyn karin shuruudaha sharciga ee is-difaaca;
   b) Ku xadgudub ama dhaawac jireed ama mid maskaxeed;
   c) Xannibaadda gaarista dadka gudaha ku barakacay;
   d) carqaladeynta bixinta gargaarka bani'aadamnimada;
   e) Ku qalqaalin in ay dadku ka barakacaan deegaannadooda ama ay barakacayaal ku sii ahaadaan goobtii ay ku barakaceen, iyada oo dano gaar ah



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

laga leeyahay.

f) Xatooyo ama bililiqo ama burburinta sahayda bani'aadamnimada;
g) Si khaldan u adeegsiga ama ku xadgudubka adegsiga gargaarka bini'aadimnimada ama horumarinta:
h) Waxyeelleynta shaqaale samafal;
i) Xannibaadda shaqada shaqaalaha samafalka;
j) Isu ekeysiinta qof ku barakacay gudaha si been abuur ah ama bixinta macluumaad been ah oo ku saabsan ahaanshaha qof gudaha ku barakacay.

## Qodobka 28aad:
## Ciqaabta Faldambiyeed

Qof kasta oo lagu helo dambi kamid ah dambiyada lagu qeexay Cutubka 10aad wuxuu mutaysan doonaa ciqaab waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## Qodobka 29aad:
## Mas'uuliyadda Ciqaabeed ee Xubnaha Kooxaha Hubeysan

1. Mas'uuliyadda dembiyeed ee xubnaha kooxaha hubeysan waxaa lagu go'aaminayaa Sharcigan iyo qawaaniinta kale ee dalka oo khuseeya, sida ku cad Qodobka 7aad (4) ee Axdiga Kambala.

2. Xubin ka tirsan koox hubaysan waa inuu:
   a) Masuuliyadda dambi u qaataa shaqsi ahaan dambiyada ciqaabeed ee uu isagu ama iyadu geysato oo liddi ku ah Sharcigan iyo qawaaniinta kale ee dalka;
   b) Dambi ahaan mas'uul ka yahay gelidda mid kamid ah dembiyada ku xusan Sharcigan;
   c) Xubin kasta oo kamid ah koox hubeysan oo lagu helay dambi ku xusan Cutubkan waxaa lagu qaadayaa ciqaab waafaqsan Xeerxa Ciqaabta Soomaaliyeed iyo qawaaniinta kale ee dalka dhaqalgalka ka ah.

## CUTUBKA 11AAD: QODOBBO GUNAANAD AH

### Qodobka 30aad:
### Magangalyo

Ma jiraan wax kamid ah Sharcigan oo ka hor-istaagi kara qof gudaha ku barakacay inuu magan-galyo ka raadsado dal kale, sida ku cad Mabda'a 15-aad (c) ee Mabaadi'da Hagaya.

### Qodobka 31aad:
### Hirgelinta Siyaasadda Barakacayaasha

Sida uu dhigayo sharcigan, Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waa in ay hubisaa hirgelin wax-ku-ool ah ee Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga soo Guryo- noqday iyo Brakacayaasha Gudaha, iyo sidoo kale istiraatiijiyadda xalka waara.

### Qodobka 32aad:
### Baabi'in

Sharcigan waxaa lagu baab'inayaa dhammaan shuruuc da iyo xeerarka ka horimaanaya ama aan la socon karin ee lagu xeeriyey arrimaha uu sharcigani xeerinayo ee dhaqan galka ka ahaa Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### Qodobka 33aad:
### Dhaqan-galka Sharcigan

Sharcigan waxa uu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIA

Tix: Kalfadhiga 7aad/001/10/B11-2025 Tar: Okotoobar 19, 2025:التاريخ

Ku: Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda,
Muqdishu.
------------------------------

Og: Guddoonka Labada Aqal ee BJFS,
Muqdishu.
------------------------------

Ujeedo: Faafin ku Saabsan Qaraarka Doorashada Xildhibaanada Soomaaliya kumatalaya Baarlamaanka Bariga Afrika 2022–2027.

Anagoo tixraacayna warqadda sumadeedu tahay XGGSH/0779/B11/25, kuna taariikheysan 16 Oktoobar 2025, kana soo baxday Xafiiska Guddoomiyaha Golaha Shacabka, oo ujeeddadeedu tahay shaacinta liiska xubnaha la doortay ee Soomaaliya ku matalaya Baarlamaanka Bulshada Bariga Afrika.

Iyadoo la fulinayo Qaraarka tirsigiisu yahay BJFSB-11/10/11/25, ee ku saabsan doorashada xildhibaanada Soomaaliya ku matalaya Baarlamaanka Bariga Afrika 2022–2027, gaar ahaan Qodobka 6aad, oo tilmaamaya in marka labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ay ansixiyaan qaraarka, oo ay saxiixaan guddomiyaha Golaha Shacabka iyo Kusimaha Guddoomiyaha Aqalka sare ahna Guddoomiye Ku Xigeenka Aqalka sare, in lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, si waafaqsan Qodobka 84aad ee Dastuurka KMG.

Haddaba, waxaan kaa codsanaynaa in aad qaraarka sare ku xusan ku soo saarto faafin rasmiga ah ee dowladda si waafaqsan sharciga.

Wada-shaqeyn wacan.

M.ne. Cabdiraxman Maxamed Cabdulle (Jaabiri)
Xoghaye Guud ee Golaha Shacabla, FPS

M.ne. Cabdinasir Ibraahim Guuleed
Xoghayeha Guud ee Aqalka Sare PFS

Hala faafiyo
22/10/2025

Tell: +252-61-2888348/ +252 62 9828000
Sg@parliament.gov.so , Sg@Senate.gov.so.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh 22/10/2025

JAMUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**QARAAR**

**KU SAABSAN**

# DOORASHADA XILDHIBAANADA SOOMAALIYA KU MATALAYA BAARLAMAANKA BARIGA AFRIKA 2022-2027

**Muqdishu, Oktoobar 16, 2025**

**GUDDOONKA LABADA AQAL BAARLAMAANKA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**Markuu Arkay:** Qodobka 48aad iyo 50aad ee Heshiisa lagu dhisay Bulshada Bariga Afrika, kaas oo xeerinaya tirada iyo qaab loo dooranayo Xildhibaanada Dowladdaha Xubinta ka ah Bulshada Bariga Afrika.

**Asagoo Hubiyey:** liiska Musharixiinta u tartamaya Golaha Sharci dejinta Bulshada Bariga Afrika, isla markaan hubiyey lailaalinayo Mabaadi'da ku xusan Qodobka 3(3aad) ee Dastuurka Ku meel gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Asagoo ku kulansan:** Kulanka wadajirka ah ee labada Aqal Kalfadhiga 7aad Kulankiisa 3aad ee caadiga ah oo ku qabsoomay Xarunta Villa Hargeysa, ajenduhuna ahaa Doorashada Xildhibaanada Soomaaliya ku matalaya Golaha Sharci dejinta bulshada Bariga Afrika.

**WUXUU GUDOONSADAY QARAARKA HALKAN HOOSE KU XUSAN:**

## Qodobka 1aad.

Kalfadhiga 7aad Kulankiisa 3aad ee wadajirka Labada Gole (Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare) ee Oktoobar 15, 2025 oo ay goobjoog yihiin labo iyo labaatan iyo labo (222) xildhibaan iyo senator waxaa goobjoog ahaa Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Sh. Aadan Maxamed Nuur (Madoobe) iyo Guddoomiye ku xigeenka Aqalka Sare Mudane Cabudllahi Cali Xersi(Tmadcadde), iyada oo uu shir-guddoomiyey Guddoomiyaha Golaha Shacabka.

## Qodobka 2aad

Tiradda Musharixiinta soo codsaday ee buuxiyey shuruudaha laga rabay ayaa noqday Sideed iyo toban (18) oo kursi kasta kasoo baxeen labo (2) Musharax oo loo kale coddeeyey. Liiska Musharaxiinta u tartamay kamid noqoshada xubnaha Soomaaliya ku metelaya Baarlamaanka Bulshada Bariga Afrika.

Sumadda kursiga iyo magacyada Musharixiinta oo dhammeystiran, sida hoos ku qoran:

| Tirsi | Magaca Musharaxa |
|---|---|
| 1 | Amb. Abukar Abdi Osman (EALA/SFP01) |
| 2 | Mr. Ali Abdinur Osman (EALA/SFP01) |
| 3 | Mr. Hussein Hassan Abdi (EALA/SFP02) |
| 4 | Mr. Ahmed Mohamed Abdi(EALA/SFP02) |
| 5 | Amb.Zahra Ali Hassan (EALA/SFP03) |
| 6 | Ms. Hafsa Abdi Abdi Mohamoud (EALA/SFP03) |
| 7. | Ms.Ilham Ali Gassar (EALA/SFP04) |
| 8 | Mr. Abdi Osman Dami (EALA/SFP04) |
| 9. | Amb. Fatima Abdullahi Mohamud Insaniye (EALA/SFP05) |
| 10. | Ms.Fatuma Shiimaay Abow (EALA/SFP05) |
| 11. | Mr. Abdusalam Hadliyeh Omar EALA/SFP06) |
| 12. | Mr. Abdisamad Mohamud Muhumed EALA/SFP06) |
| 13. | Mr. Abdirahman Bashir Shariff EALA/SFP07) |
| 14. | Mr. Mohamoud Dibed Hash (EALA/SFP07) |
| 15 | Mr. Faisal A. Roble (EALA/SFP08) |
| 16 | Mr. Yaasiin Hussein Ismail (EALA/SFP08) |
| 17. | Hon. Fahma Ahmed Nur (EALA/SFP09) |
| 18 | Mr. Hassan Abdirisak Mohamed EALA/SFP09) |

**Qodob 3aad:**

Natiijada Codeynta Doorashada Xildhibaanada kumatalaya Soomaaliya Baarlamaanka Bulshada Bariga Afrika oo faahfaahsan waxay ku cadahay shaxdan hoose:

| | | | |
|---|---|---|---|
| Tirada Xildhibaanada iyo Senatarada Codeeyey | | 222 | |
| Codadka Ansaxay | | 168 | |
| Codadaka Halaabay/Xumaaday | | 54 | |
| | | **Wareega 1aad** | |
| **Tirsi** | **Magaca Musharaxa** | **Codka uu helay** | **Halaabay** |
| 1. | Amb. Abukar Abdi Osman (EALA/SFP01) | 152 | 2 |
| 2. | Mr. Ali Abdinur Osman (EALA/SFP01) | 68 | |
| 3. | Mr. Hussein Hassan Abdi (EALA/SFP02) | 193 | 6 |
| 4. | Mr. Ahmed Mohamed Abdi(EALA/SFP02) | 23 | |
| 5. | Amb.Zahra Ali Hassan (EALA/SFP03) | 184 | 4 |
| 6. | Ms. Hafsa Abdi Abdi Mohamoud (EALA/SFP03) | 34 | |
| 7. | Ms.Ilham Ali Gassar (EALA/SFP04) | 181 | 7 |
| 8. | Mr. Abdi Osman Dami (EALA/SFP04) | 34 | |
| 9. | Amb. Fatima Abdullahi Mohamud Insaniye (EALA/SFP05) | 178 | 5 |
| 10. | Ms.Fatuma Shiimaay Abow (EALA/SFP05) | 39 | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 11. | Mr. Abdusalam Hadliyeh Omar EALA/SFP06) | 171 | 10 |
| 12. | Mr. Abdisamad Mohamud Muhumed EALA/SFP06) | 41 | |
| 13. | Mr. Abdirahman Bashir Shariff EALA/SFP07) | 172 | 10 |
| 14. | Mr. Mohamoud Dibed Hash (EALA/SFP07) | 40 | |
| 15 | Mr. Faisal A. Roble (EALA/SFP08) | 182 | 4 |
| 16 | Mr. Yaasiin Hussein Ismail (EALA/SFP08) | 36 | |
| 17. | Hon. Fahma Ahmed Nur (EALA/SFP09) | 171 | 6 |
| 18 | Mr. Hassan Abdirisak Mohamed EALA/SFP09) | 45 | |
| | | | 54 |

## Qodobka 4aad

Sagaal (**9**) Musharax ayaa ku guuleystay ka mid noqdaan xildhibaanada Sooaamaaliya ku matalaya Baarlamaanka Bulshada Bariga Afrika ayaa kale ah:

| Tirsi | Magaca Musharaxiinta Guuleystay |
|---|---|
| 1. | Amb. Abukar Abdi Osman (EALA/SFP01) |
| 2. | Mr. Hussein Hassan Abdi (EALA/SFP02) |
| 3. | Amb.Zahra Ali Hassan (EALA/SFP03) |
| 4. | Ms.Ilham Ali Gassar (EALA/SFP04) |
| 5. | Amb. Fatima Abdullahi Mohamud Insaniye (EALA/SFP05) |
| 6. | Mr. Abdusalam Hadliyeh Omar EALA/SFP06) |
| 7. | Mr. Abdirahman Bashir Shariff EALA/SFP07) |
| 8. | Mr. Faisal Abdi Roble (EALA/SFP08) |
| 9. | Hon. Fahma Ahmed Nur (EALA/SFP09) |

## Qodobka 5aad.

Sida ku xusan Axadiga lagu aasaasay bulshada Bariga Afrika mudada xilhaynta Xildhibaanada Baarlamaanka Bulshada Bariga Afrika waa Shan sano **(5)** sida kucad Qodobka 51aad xarafkiisa (1)ee heshiiska; si kastaba ha ahaatee, xubnaha la doortay ee matalaya soomaaliya ayaa dhameystiran doona inta ka harsan muddada golaha 5aad (2022 2027) ee golaha sharci dejinta Bulshada Bariga Afrika waxaana dib loo soo dooran karaa muddo shan sano ah oo dheeraad ah.

## Qodob 6aad:

Qaraarkan ku saabsan doorashada xubnaha Soomaaliya ku matalaya Baarlamaanka Bulshada Bariga Afrika waxa uu dhaqan galayaa marka ay ansixiyaan labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, oo ay saxiixaan Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo Kusimaha Guddoomiyaha Ahna Guddoomiye ku xigeenka Labaad ee Aqalka Sare, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Waxaa Saxiixay:**

Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"
Guddomiyaha Golaha Shacabka FPF

Sen. Cabdullahi Cali Xersi "Timacadde"
Kusimaha Guddoomiyaha ahna
Guddoomiye Ku Xigeenka 2aad Aqalka Sare PFS

**XEER MADAXWEYNE LR. 501** **TAARIIKH: 24-TA LUULIYO 2025**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1987/2025**, ku taariikheysan **02/02/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cabdulqaadir Cali Abkey.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cabdulqaadir Cali Abkey** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Cabdulqaadir Cali Abkey** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
DIIWAAN NO: HAN-067-2025
TAARIIKH 16-10-2025
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

**XEER MADAXWEYNE LR. 502** **TAARIIKH: 24-TA LUULIYO 2025**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87[aad], Farqadda 1[aad], Xarafka 'C' iyo Farqadda 2[aad] ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2042/2025**, ku taariikheysan **26/02/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Xasan Muuse Axmed.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1[aad]**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Xasan Muuse Axmed** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2[aad]**

Waxaa **Dr. Xasan Muuse Axmed** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3[aad]**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-069-2025
TAARIIKH: 16-10-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

**XEER MADAXWEYNE LR. 506** **TAARIIKH: 25-TA LUULIYO 2025**

**XIL KA QAADIS GUDDOOMIYE KU-XIGEENKA HOWLAHA GUUD EE GOBOLKA BENAADIR & MAGACAABIS GUDDOOMIYE KU-XIGEENKA CUSUB EE HOWLAHA GUUD EE GOBOLKA BENAADIR**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 8aad, Faqradda 4aad ee Xeer Lr. 6 ee soo baxay 12/02/1980, kuna saabsan in G/Banadir iyo Dowladda Hoose ay hoos yimadaan Madaxtooyada J.F.S. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan. |
| **MARKUU GARWAAQSADAY:** | In ay jirto baahi loo qabo in loo magacaabo Guddoomiye Ku-Xigeen Cusub ee Howlaha Guud ee Gobolka Benaadir. |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Mudane Xasan Maxamed Jimcaale** laga qaaday xilkii **Guddoomiye Ku-Xigeenka Howlaha Guud ee Gobolka Benaadir.**
2. Waxaa **Mudane Cabdimajiid Daahir Aadan** loo magacaabay in uu noqdo **Guddoomiye Ku-Xigeenka Howlaha Guud ee Gobolka Benaadir.**

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-070-2025
TAARIIKH: 16-10-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**XEER MADAXWEYNE LR.508** **TAARIIKH: 03-DA AGOOSTO 2025**

**XIL-KA-QAADIS MAAREEYIHII DEKADDA MUQDISHO & MAGACAABIS MAAREEYAHA CUSUB EE DEKADDA MUQDISHO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87 aad iyo 90 aad ee Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Mudane Axmed Maxamed Maxamuud (Washington)** laga qaaday xilkii Maareeyaha Dekadda Muqdisho.
2. Waxaa **Mudane Danjire Maxamed Cali Nuur (Ameeriko)** loo magacaabay in uu noqdo **Maareeyaha Dekadda Muqdisho**.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-071-2025
TAARIIKH: 16-10-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**XEER MADAXWEYNE LR.509** **TAARIIKH: 05-TA AGOOSTO 2025**

**MAGACAABIS LA-TALIYAHA AMNIGA QARANKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY**: | Qodobada 87 aad iyo 90 aad ee Dastuurka J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo magacaabista khabiir amniga Qaranka oo aqoon fiican u leh arrimaha amniga Qaranka, maadaama uu xilka iska casilay La-Taliyihii Amniga Qaranka ee Hore. |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Mudane Danjire Aways Xaaji Yuusuf Axmed** in uu noqdo La-Taliyaha Amniga Qaranka ee Madaxweynaha J.F.S.

**Qodobka 2aad**

La-taliyaha Amniga Qaranka wuxuu gudanayaa waajibaadka loo xil saaray isagoo la kaashanaya hay'adaha amniga iyo hay'adaha kale ee khuseeya, wuxuuna si toos ah warbixin ugu gudbiyaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda.

**Qodobka 3aad**

Wixii Hawlo, Xuquuq iyo Maamuus ah waxaa lagu dhaqayaa Xeerka Lr. 11 ee 05/12/2006 ee Shaqaalaha Rayidka.

**Qodobka 4aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-075-2025
TAARIIKH: 16-10-2025
SAXIIX:

**XEER MADAXWEYNE LR.513** **TAARIIKH: 09-KA AGOOSTO 2025**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2300/05/2025**, ku taariikheysan **24/05/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Ciise Axmed Warsame.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Ciise Axmed Warsame** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Ciise Axmed Warsame** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN.064.2025
TAARIIKH :
SAXIIX :

**XEER MADAXWEYNE LR.535** **TAARIIKH: 23 -DA AGOOSTO 2025**

**MAGACAABIS XUBIN KA MID NOQONAYSA GOLAHA DHAQAALAHA QARANKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka "B"ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY:** Aqoonta iyo khibradda ay leedahay Marwada loo magacaabayo xilkan.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la buuxiyo booskan.

**Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:**

**Qodobka 1aad**

**Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo xeerkaan;**

**1.** Waxaa xilkii laga qaaday **Marwo Maluka Dheere Sheekh Cabdulqaadir**, waxaana xilkaas loo magacaabay **Marwo Hani Xasan Sheekh Aadan.**

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-072-2025
TAARIIKH : 16-10-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**XEER MADAXWEYNE LR.537** **TAARIIKH: 02-DA SEBTEEMBER 2025**

**XIL KA QAADIS SII-HAYAHA GUDDOOMIYIHII HORE EE JAAMACADDA UMADDA SOOMAALIYEED & MAGACAABISTA GUDDOOMIYAHA CUSUB EE JAAMACADDA UMADDA SOOMAALIYEED**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka "B"ee Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** Soo jeedinta Wasiirka Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta SareWarqadda summadeedu tahay **WWH&TS/XW/450/09/2025**, ee kuna taariikhaysan **01/09/2025** ujeedaduna tahay Magacaabis Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.
**MARKUU TIXGELIYAY:** Aqoonta iyo khibradda uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

**Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:**

**Qodobka 1aad**

**Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo xeerkaan;**

1- **Mudane Dr. Xasan Cismaan Gacal**, Waxaa laga qaaday xilkii Sii-Hayaha Guddoomiyihii Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed.
2- **Mudane Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed**, Waxaa loo magacaabay Guddoomiyihii Cusub ee Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-073-2025
TAARIIKH: 16-10-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LR.539** **TAARIIKH: 02-DA SEBTEEMBER 2025**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2301/07/2025**, ku taariikheysan **30/07/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Qaasim Cali Raage.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Qaasim Cali Raage**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Qaasim Cali Raage**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-074-2025
TAARIIKH: 16-10-2025
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**XEER MADAXWEYNE LR.540** **TAARIIKH: 11-DA SEBTEEMBER 2025**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2288/2025**, ku taariikheysan **02/06/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Dayah Mohamed Hassan.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Dayah Mohamed Hassan**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Dayah Mohamed Hassan**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-075-2025
TAARIIKH: 16-10-2025
SAXIIX:

**XEER MADAXWEYNE LR.543** **TAARIIKH: 20-KA SEBTEEMBER 2025**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2304/2025**, ku taariikheysan **03/08/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cusmaan Sh.Cali Cilmi.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cusmaan Sh.Cali Cilmi**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Cusmaan Sh.Cali Cilmi**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
06 OCT 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-077-2025
TAARIIKH: 16-10-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale

**XEER MADAXWEYNE LR.545** **TAARIIKH: 01-DA OKTOOBAR 2025**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**. MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2305/2025**, ku taariikheysan **12/08/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Aadan Xasan Cumar.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Aadan Xasan Cumar**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Aadan Xasan Cumar**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Hgn-986-25
TAARIIKH: 13-12-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

**XEER MADAXWEYNE LR.546** **TAARIIKH: 04-TA OKTOOBAR 2025**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1996/2025**, ku taariikheysan **15/02/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cabdisataar Xassan Sh.maxamed.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cabdisataar Xassan Sh.maxamed**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Cabdisataar Xassan Sh.maxamed**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-087
TAARIIKH: 13-12-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

**XEER MADAXWEYNE LR.549** **TAARIIKH: 09-KA OKTOOBAR 2025**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**. MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2451/07/2025**, ku taariikheysan **05/07/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Ahmed Abukar Ali.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Ahmed Abukar Ali,** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Ahmed Abukar Ali,** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-888-25
TAARIIKH: 13-10-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

**XEER MADAXWEYNAHA LR. 574** **TAARIIKH: 08-DA OKTOOBAR 2025**

**MAGACAABIS XISAABIYAHA GUUD EE DOWLADDA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S. |
| **MARKUU ARKAY:** | Soo Jeedinta Ra'iisul-Wasaaraha warqadda summadeedu tahay **XRW/485/10/2025,** ee soo baxday taariikhda markay ahayd **02 Oktoobar 2025**, kuna saabsan Go'aan gole " Ansixinta Soo Jeedinta Magacaabista Xisaabiyaha Guud ee Dowladda ***Mudane Maxamed Maxamuud Cabdulle***. |
| **MARKUU ARKAY:** | Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan. |
| **MARKUU TIXGALIYAY:** | Baahida loo qabo dardar galinta hannaanka xisaabaadka ee Maaliyadda. |

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkan,waxa uu;

1. Xilkii Xisaabiyaha Guud ee Dowladda ka qaaday **Mudane Cabdiraxmaan Maxamed Anas.**
2. U magaacabay **Mudane Maxamed Maxamuud Cabdulle** in uu noqdo **Xisaabiyaha Guud ee Dowladda.**

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-089-25
TAARIIKH: 13-12-2025
SAXIIX:
AVV Axmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S.**

**XEER MADAXWEYNE LR. 601** **TAARIIKH: 25-TA OKTOOBAR 2025**

**MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE SIYAASADDA AHNA ISKU-DUWAHA XAFIISKA ISKU-DUWIDDA BARNAAMIJKA SIYAASADEEDKA MADAXWEYNAHA J.F.S.**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

**MARKA UU ARKAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Mudanaha xilka loo magacaabayo xilkan.

**MARKA UU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo magacaabista La-Taliyahan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkaan, waxaa Mudanaha magaciisu hoos ku qoran yahay loo magacaabay jagada ku hor qoran.

| No. | Magaca | Jagada |
|---|---|---|
| 1. | Dr. Yaxya Ibraahim Macallin | La-Taliye Sare ee Siyaasadda ahna Isku-Duwaha Xafiiska Isku-Duwidda Barnaamijka Siyaasadeedka Madaxweynaha J.F.S. |

**Qodobka 2aad**

Waxaa xilkii La-Taliye Sare ee Siyaasadda Ahaana Isku-Duwaha Xafiiska Isku-Duwidda Barnaamijka Siyaasadeedka Madaxweynaha J.F.S laga qaaday **Marwo Hodan Maxamed Xasan**.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
DIIWAAN NO: Ham-0...
TAARIIKH: 13-...-2025
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S.**

**XEER MADAXWEYNE LR. 602** **TAARIIKH: 28-DA OKTOOBAR 2025**

**MAGACAABIS ERGAY GAARKA AH EE KA HORTAGGA IYO LA-DAGAALANKA FIKRADAHA XAGJIRKA AH EE RABSHADAHA WATA (PCVE)**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka J.F.S.
**MARKUU ARKAY:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu mudanaha loo magacaabayo xilkan leeyahay.
**MARKA UU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo magacaabista Ergay Madaxweyne oo aqoon fiican u leh arrimaha ka hortagga iyo la-dagaalanka fikradaha xagjirka ah ee rabshadaha wata (*PCVE*).

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkaan, waxaa **Mudane Xil. Aweys Maxamed Cumar** loo magacaabay in uu Ergay Gaarka ah ee Arrimaha Ka Hortagga Iyo La-Dagaalanka Fikradaha Xagjirka Ah Ee Rabshadaha Wata (*PCVE*).

**Qodobka 2aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-079-25
TAARIIKH: 13/12/2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S.**

**XEER MADAXWEYNE LR.605** **TAARIIKH: 05-TA NOFEEMBAR 2025**

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU ARKAY:** Xeerka Lr. 1, ee soo baxay **02/03/1962**, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Xeerka Lr. 7, ee soo baxay **02/02/1986** oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/2528/2025**, ku taariikheysan **01/11/2025**, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Cabdinuur Xasan Xuseen.**

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Cabdinuur Xasan Xuseen**, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

**Qodabka 2aad**

Waxaa **Dr. Cabdinuur Xasan Xuseen**, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

**Qodobka 3aad**

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-083-25
TAARIIKH: 13-12-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J. F.S.**

**XEER MADAXWEYNE LR.613** **TAARIIKH: 03-DA DISEEMBAR 2025**

**MAGACAABIS MAAREEYAHA GUUD EE HAY'ADDA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay **XRW/483/09/2025**, ku taariikheysan **27/09/2025**, kuna saabsan Soojeedinta Magacaabis Maareeyaha Guud Ee Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha.

**MARKUU ARKAY:** Taariikh nololeedka, aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay **Mudane Maxamed Nuur Cali.**

**MARKUU ARKAY:** Baahida loo qabo dardargalinta howlaha Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay **Mudane Maxamed Nuur Cali,** in uu noqdo Maareeyaha Guud ee Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Han-082-25
TAARIIKH: 13-12-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S**

**XEER MADAXWEYNE LR.614** **TAARIIKH: 03-DA DISEEMBAR 2025**

**MAGACAABIS XUBNAHA GUDDIGA MADAXA BANNAAN EE XUQUUQUL INSAANKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka "B"ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY:** Warqadda summadeedu tahay **XGGSH/0795/B11/25**, ku taariikheysan **26/11/2025**, kuna saabsan Magacaabis Xubnaha Guddiga Madax Bannaan Ee Xuquuqul Insaanka.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la magacaabo guddigan.

**Madaxweynuhu waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo xeerkaan Waxaa loo Magacaabay Xubnaha Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuquuqul Insaanka, oo kala ah:-

1- Dr. Maryam Qaasim Axmed.
2- Dr. Cumar Cabdulle Calasow (PhD).
3- Dr. Maxamed Cismaan Maxamuud (PhD).
4- Muumina Shiikh Cumar.
5- Faadumo Cabdiqani Yuusuf.
6- Farxaan Maxamed Jimcaale.
7- Maxamed Haaruun Maxamuud.
8- Cali Maxamed Cilmi.
9- Axmed Shiikh Xamsa Abshir.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: Hgn-081-25
TAARIIKH: 13/12/2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
11 DEC 2025
BY FADUMO MOHAMED OMAR SAAHIHI
SAACAD SAXIIX

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**
**Madaxweynaha J.F.S**

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.184 Taariikh: 16/08/2025

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHIRKADAHA SHAQA-SIINTA GAARKA AH.**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
20 AUG 2025
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **MOLSA/OM/270/25** ee ku taariikheysan **17/07/2025** ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Shaqa-siinta Gaarka ah;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.23.126.08.25** ee **14/08/2025,** kuna saabsan **Ansixinta Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Shaqa-siinta Gaarka ah** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda uu u leeyahay in la helo hannaan lagula xisaabtami karo shirkadaha shaqosiinta gaarka ah.

**Wuxuu Meelmariyay:**

**Qodobka 1aad:**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.23.126.08.25** ee **14/08/2025,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Shaqa-siinta Gaarka ah** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad:

## Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 3aad:

## Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN. 062
TAARIIKH :
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Saalax Axmed Jaamac,**
**Kusimaha Ra'iisul Wasaaraha, ahna Ra'iisul Wasaare kuxigeenka XJFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada

# XEER-NIDAAMIYAHA SHIRKADAHA SHAQO-SIINTA GAARKA AH

Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada, Xukuumadda JFS 2025

# QEYBTA 1AAD
# QODOBBO GUUD

## Qodobka 1aad

## Magaca Xeer-nidaamiyahan

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa "Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah".

## Qodobka 2aad

## Cuskasho

1. Xeer-nidaamiyahan wuxu waafaqsan yahay Xeerka Shaqada Soomaliyeed, Sharci Lr36 ee 24 December 2024 iyo:
2. Axdiyada Caalamiga ah ee ILO, sida:
   a. Axdiga ILO C181 (1997) Qodobbada 1, 1(1), 2, 3(2), 4, 5, 5(c), 7, 8, 10, 14 iyo 15aad;
   b. Axdiga ILO C143 (Supplementary Provisions) (1975) Qodobbada 2, 5,6, 7, 8, 9,10 iyo 11aad;
   c. Axdiga ILO C155 (1981) Qodobbada 4-5, 16-19, 17-22aad; iyo
   d. Axdiga ILO C097 (1949 revised), Qodobbada 1, 5aad iyo C097 (lifaaqa5aad).
3. Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 134 ee (17/06/2021) Xeerka Hab-raaca iyo Adeegga Guud Shaqaalaysiinta Dibadda eeShaqaalaha Xoogsatada Soomaaliyeed.
4. Sharci Lr. 10 ee 09/12/2015 Oggolaanshaha Ansixinta Sharciga Shaqo-qorista Shaqaalaha Shisheeye.

## Qodobka 3aad

## Ujeeddo

1. Xeer-nidaamiyahani ujeeddadiisu waxay tahay in la aqoonsado oo la rasmiyeeyo kaalinta shirkadaha gaarka loo leeyahay ee qorista iyo meeleynta shaqaalaha gudaha iyo dibadda.
2. Xeer-nidaamiyahani wuxuu fasiraad ka bixinayaa abuuridda shati-siinta iyo hawlgelinta shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah, wuxuuna dejinayaa hab-raacyada kormeerkooda, waxaana looga dan leeyahay in la hubiyo shirkadahaas iyo sida ay u shaqeeyaan, una dhawraan xuquuqda iyo daryeelka shaqaalaha iyo kuwa shaqodoonka ah ee ka-faa'iideysanaya adeegyadooda, iyadoo kor loo qaadayo socdaalka shaqo ee badbaadada iyo sharciga ah, iyo fursadaha shaqo ee shaqaalaha Soomaaliyeed.

## Qodobka 4aad

## Qeexid

Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, haddii aan si kale loogu qeexin, erayadan soo socda waxay yeelanayaan macnaha ku hor qoran:

1) "Maamul" waxaa loola jeedaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Xukuumadda JFS, ama wax kasta iyo mas'uul kasta oo ay Wasaaraddu u idmato fulinta xeer-nidaamiyahan.

2) "Shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah" waxaa loola jeedaa qof ama shirkad kasta oo leh shakhsiyad qaanuuneed oo ka tirsan shaqaalaha shirkadaha gaarka ah ee bixiya mid ama in ka badan adeegyadan soo socda:
    a) Shaqaaleysiinta shaqo-doonka si ay ugu shaqeeyaan loo-shaqeeye saddexaad, hadday tahay gudaha ama dibadda.
    b) Shaqaale-qoris loo marayo hay'ad kale oo loo xilsaaray in ay ka shaqeyso shaqaaleysiin cid saddexaad; iyo
    c) Shaqaale-qoris kasta oo kale oo loo sameeyo faa'iido-ka-raadin ama isku-xirka shaqo-doonka iyo loo-shaqeeyaha.
3) "Shati" waxaa loola jeedaa shatiga rasmiga ah ama shahaadada ay bixiso Wasaaradda Shaqada si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, taasoo u fasaxaysa shirkad shaqaaleysiineed oo gaar loo leeyahay inay ka shaqeyso oo ay bixiso adeegyada shaqoqorista iyo meeleynta.
4) "Shirkad shati leh" waxaa loola jeedaa hay'ad shaqo-siin oo gaar ah haysatana shati lagu bixiyey si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.

5) "Wasiir" waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Xukuumadda JFS.

6) "Shaqaale" waa qof kasta oo shaqo ka raadsada ama ka hela (ha ahaado mid gudaha ama dibadda ah) isagoo u maraya adeegyada shirkadaha shaqaaleysiinta ee gaarka loo leeyahay.

7) "Loo-shaqeeye" waxaa loola jeedaa qof kasta, shirkad ama urur doonaya in uu shaqaale qorto iyagoo u maraya shirkad shaqaaleysiin oo gaar ah.

8) "Diiwaan-gelin" waxaa loola jeedaa in la siiyo awood qoraal ah shirkad shaqaaleysiin oo gaar loo leeyahay si ay dad uga shaqaaleysiiso gudaha iyo dibadda dalka.

9) "Maareeye" waxaa loola jeedaa qofka maamula, kormeera ama xakameeya hawlaha shaqo ee shirkad shaqaaleysiin gaarka ah ama laamaheeda.

10) "JFS" waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
11) Hay'adda Maamulaysa: Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Xukuumadda JFS ayaa ah hay'adda u xilsaaran dhaqan-gelinta xeer-nidaamiyahan. Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay soo-saarista, cusboonaysiinta, hakinta iyo kala-noqoshada shatiyada shirkadaha shaqaaleysiinta gaarka ah, iyo ilaalinta guud iyo nidaaminta hawlahooda si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 5aad

## Shuruudaha Diiwaan-gelinta Shirkadaha

**1)** Codsadaha doonaya in la diiwaan-geliyo si uu uga shaqeeyo shaqaaleysiin gaarka ah waa in uu ku soo gudbiyaa codsiga si danabeysan (online) ama codsiga uu keenaa Wasaaradda waxaana loo soo gudbinayaa sidan soo socota:

a) Ugu yaraan 51% xubnaha guddiga maamulka sare ee shirkadda waa in ay yihiin muwaadiniin Soomaaliyeed, caddeynta jinsiyadana waa in lagu lifaaqaa codsiga;

b) Warqad codsi diiwaan-gelin shirkad shaqaaleysiinta gaar ah;

c) Nuqul la xaqiijiyey oo ah shahaado ka mid noqoshada shirkad mas'uuliyad xaddidan leh;

d) Xeerka ururka iyo xeer-hoosaadka shirkadda;

e) Raasamaalka ugu yar: Codsaduhu waa in uu soo bandhigaa raasumaal ama hanti aan ka yarayn US$60,000 (lixdan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama lacag shillin Soomaali ah oo u dhiganta, oo laga heli karo in lagu shaqeeyo. Awoodda maaliyadeed waxaa lagu xaqiijin karaa xisaabaadka banki (Bank Statement) ee shahaabadeysan 3da (saddexda) bilood ee ugu dambeysay;

f) Shahaadada diiwaan-gelinta shirkadda oo aan dhacsanayn;

g) Nuqul ka mid ah rukhsadda/shatiga ganacsiga ee maamulka Gobolka Banaadir ama Dawlad goboleedyada dalka;

h) Shahaadada u-hoggaansanaanta Canshuuraha shirkadda ee (TCC) oo ka timid maamulka canshuuraha Soomaaliya oo lagu lifaaqaa codsiga. Shahaadadan waa in ay xaqiijisaa Wasaaraada Maaliyadda in shirkaddu si buuxda u bixisay waajibaadkeeda canshuureed oo aan lagu lahayn wax canshuur ah;

i) Codsaduhu waa in uu muujiyaa jiritaanka cinwaanka xafiiska ay ku shaqeyneyso oo rasmiga ah ee Soomaaliya ka jira oo uu ganacsi ka sameyn doono, Caddeynta la aqbali karo waxaa ka mid ah nuqul heshiis ijaareed sax ah oo uu nootaayo dadweyne oo la aqoonsan yahay diiwaan-geliyey, ama warqad lahaanshaha dhismaha ganacsiga;

j) Maamulaha shirkaddu waa in uu keenaa dokumentiyada soo socda:

   i. Nuqul ka mid ah Kaarka Aqoonsiga ama Baasaboorka Soomaaliga;

   ii. 2 (labo) sawir oo cabbir baasaboor ah; iii. Shahaadada dembi-la'aanta (CID);

   iv. Oggolaanshaha rukhsadda shaqada iyo deganaashaha dalka haddii agaasinku yahay ajnabi; iyo

   v. Waa in uu haystaa ugu yaraan shahaado dugsi sare ama wax u dhigma oo ay aqoonsan tahay Wasaaradda Waxbarashada.

k) Maamulaha shirkaddu waa in uu keenaa dokumentiyada soo socda:

   i. Shahaado jaamacadeed oo la xiriita ganacsiga oo uu ka qaatay jaamacad la aqoonsan yahay, oo ay sugtay Wasaaradda Waxbarashada; ii. Warqad ballan ah oo uu saxiixay loo-shaqeeyaha, oo qeexaysa shuruudaha shaqada iyo aqbalaadda; iyo

   iii. Nuqul ka mid ah kaarka aqoonsiga ama baasaboorka maareeyaha.

l) Saamiga lahaanshaha Soomaalida: Muwaadiniinta Soomaaliyeed waa in ay lahaadaan oo ay maamulaan ugu yaraan boqolkiiba kontan iyo kow (51%) hantida

ama saamiga shirkadda. Heshiiska qaab-dhismeedka lahaanshaha waa in lagu shaaciyaa codsiga si loo xaqiijiyo xaaladan;

m) Bixinta khidmadda shatiga: Codsaduhu waa inuu bixiyaa lacagta shatiga ee loo baahan yahay oo uu ku lifaaqo caddeynta lacag-bixinta codsiga. Kharashku wuxuu ku xiran yahay baaxadda adeegyada shaqada, sida ku xusan shaxdan hoose:

n) Shaxda sharaxaada khidmadaha

| | SHARAXAADDA KHIDMADAHA | QADARKA (US$) |
|---|---|---|
| 1) | Kharashka arjiga bilowga ah ee diiwaan-gelinta shirkad ka shaqeysa shaqo-qorista gudaha iyo dibadda. | $ 2,000 |
| 2) | Kharashka arjiga bilowga ah ee diiwaan-gelinta shirkad ka shaqeysa shaqo-qorista ajaanibka. | $ 1,500 |
| 3) | Kharashka arjiga bilowga ah ee diiwaan-gelinta shirkad ka shaqeysa shaqaaleysiinta gudaha keliya/suuqa Soomaalida. | $ 1,000 |
| 4) | Kharashka cusboonaysiinta diiwaan-gelinta shirkad shaqo-qorista ee ajnabiga ah. | $ 750 |
| 5) | Kharashyada soo gudbinta arjiga dib u cusboonaysiinta diiwaan-gelinta shirkad ka shaqeysa shaqaaleysiinta gudaha/suuqa Soomaaliya. | $ 500 |
| 6) | Khidmadaha wax-ka-beddelka shahaadada diiwaan-gelinta, haddii uu dalbado macmiilku. | $ 100 |

o) In uu xubin ka noqdo urur la aqoonsan yahay oo ay leeyihiin shirkadaha shaqaaleysiinta ee gaarka ah;

p) Codsaduhu waa in uu dhigaa dammaanad lacageed Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo dhan US$25,000 (shan iyo labaatan kun) oo Doollarka Mareykanka ah ama shillin Soomaali u dhigma. Dammaanadda lacageed waxaa loo isticmaalayaa in lagu daboolo mushaar, mag-dhaw, ama deymo kale oo lagu yeesho looshaqeeyaha haddii ay dhacdo in loo-shaqeeyuhu ku fashilmo bixinta xuquuqdaas. Shuruudaha curaartan ayaa u oggolaanaya maamulka in uu tallaabo ka qaado looshaqeeyaha iyadoo matalaysa shaqaalaha ay khusayso, haddii loo baahdo. Caddeynta rahanka la fuliyey waa in lagu soo gudbiyaa codsiga:

**2)** Wasaaraddu waxay codsan kartaa macluumaad dheeraad ah ama dokumentiyo iyadoo loo eegayo mid mid, Haddii tafaasiil kasta oo loo baahan yahay uu maqan yahay ama loo baahdo caddeyn, Wasaaraddu waxay ogeysiinaysaa codsadaha in uu ku bixiyo macluumaadka dheeraadka ah muddo cayiman gudaheed. Ku-guuldarreysiga bixinta macluumaadka dheeraadka ah ee loo baahan yahay waxay keeni kartaa in codsiga la diido; iyo

**3)** Bixinta macluumaad been-abuur ah, marin-habaabin ah ama hilmaamidda warbixinnada qaar marxalad kasta oo uu nidaamka codsiga marayo waa mamnuuc. Haddii mid ka mid ah macluumaadka ku jira codsiga la caddeeyo in ay been yihiin, isla markiiba waa la diidayaa codsiga. Intaa waxaa dheer, haddii shatiga lagu bixiyo xog been ah, isla markiiba waa lagala noqonayaa marka la helo, waxaana laga yaabaa in shirkadda iyo shakhsiyaadka mas'uulka ka ah ay wajihi karaan tallaabo sharci. Sidaa darteed, codsadeyaasha waxaa si adag lagu adkaynayaa in ay hubiyaan in dhammaan macluumaadka iyo dokumentiyada la soo gudbiyey ay yihiin kuwo sax ah.

**4)** Codsaduhu waa in uu muujiyaa baaxadda shatiga uu ku caddeeyey dalabka arjigiisa, noocyada shaqo-qorista iyo hawlaha shaqaaleysiinta oo ay ku jiri karaan mid ama ka badan qeybaha soo socda:

i. Shaqaaleysiinta muwaadiniinta Soomaaliyeed si ay uga shaqeeyaan gudaha dalka (shaqaale maxali ah)
ii. Shaqaalaysiinta gudaha iyo dibadda: Shaqaaleysiinta muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ka shaqeynaya gudaha dalka iyo dalalka dibadda (shaqo dibadeed), taasoo noqon karta mid guud ama mid caalami ah marka loo eego baaxadda shatiga.
iii. Codsaduhu waa in uu si cad u caddeeyaa heerka ama heerarka shaqaaleysiinta ee uu doonayo in uu qabto, Wasaaraddu waxay soo saareysaa shatiga kaas oo leh oggolaansho cayimidda baaxadda, tusaale, "maxalliga keliya" ama "maxaliga iyo dibadda".

**5)** U-qalmid-la'aanta Shatiga ee Shirkadaha: Iyadoo aan loo eegin farqada (1), Wasaaradda ayaa diidaysa codsiga shatiga cusub ama dib-u-cusboonaysiinta shatiga jira, haddii codsadaha (ama xaalad shirkad, mid ka mid ah agaasimeyaasheeda ama saraakiisha maamulka) uu la kulmo mid ka mid ah shuruudahan soo socda ee keenaya u-qalmid-la'aanta:

A. Eedaymo Dembiyo Ciqaabo ah: Codsaduhu ay maxkamadi ku riday xukun dembi kasta oo ku lug leh shaqaaleysiin aan la oggolayn ama sharci-darro ah, ka ganacsiga dadka, tahriibinta muhaajiriinta, dembiyada abaabulan, ka ganacsiga daroogada, lacag dhaqidda, musuqmaasuqa, ama dembi kasta oo la xiriira damiir xumo ama ku xadgudbida xuquuqda shaqaalaha (oo ay ku jiraan dembiyada la xiriiraa ku shaqeynta carruurta ama shaqada khasabka ah). Codsadaha lagu riday xukun noocan oo kale ah waxaa loo aqoonsanayaa in uusan u qalmin, haddii si rasmi ah loogu soo oogay oo uu hadda wajahayo dacwad ku saabsan mid ka mid ah dembiyada kor ku xusan (oo uu kiisku hor yaallo maxkamad), Wasaaraddu waa inay dib u dhigtaa tixgelinta codsiga ilaa arrinta laga xallinayo.
B. Jebinta Nidaaminta ka hor: Haddii codsaduhu uu hore u jebiyey shuruudaha shatiga lagu bixiyey xeer-nidaamiyahan ama xeerarkii hore, uuna ku xadgudbay qodobbada xeer-nidaamiyahan ama Xeerka Shaqada, taasoo keentay in laga hakiyo ama la joojiyey rukhsadiisii hore ee Wasaaradda. Haddii hakinta ama ka joojinta caynkaas ahi sii socoto taasoo aan la qaadin ama aysan dhammaan muddada, codsadaha waa laga joojinayaa. sidoo kale, haddii codsadaha lagu helo in uu ku kacay jebinta sharciga, taasoo keentay in la ganaaxo, shatigiisa dib looma cusbooneysiin karo ilaa laga buuxiyo muddo cayiman ama shuruudo ay dejisay Wasaaraddu la fulinaayo;
C. Wareejinta Shatiga aan la oggoleyn: Shatiyada lama wareejin karo sida ku qeexan qoddobka 11aad ee Xeer-nidaamiyahan. Codsadihii isku daya in uu wareejiyo, ama hore u wareejiyey, shatiga ama oggolaanshaha shaqada qof kale ama Shirkad iyadoo aan oggolaansho laga helin Wasaaradda. Dhaqan kasta oo noocaas ah wuxuu keenayaa diidmada shatigiisa; iyo
D. Lumidda shahaadooyinka: Codsaduhu ma siibuuxinayo shuruudaha looga baahan yahay farqada (1) ee soo saarista shatiga, haddii isbeddelada dhacay tan iyo markii la bixiyey shatigii hore aan dib loo sixin. Haddii shirkad hore rukhsad u haysatay ay beddasho la haanshaha ama maamulka, sida in aanay yeelan

maareeye Soomaali ah, raasumaalkeeda uu hoos uga dhacdo inta ugu yar ee loo baahan yahay, ama shahaadooyinka maamulaheedu aanay u dhammayn shirkadaas uma qalanto shati cusub ama dib u cusboonaysiin inta laga soo dhammeystirayo dokumentiyada dhimman.

**6)** Codsadaha shatiga la siiyey iyo kuwa la siin doono waxaa ku waajib ah in ay ku ogeysiiyaan shirkadda qoraal afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahooda wixii isbeddel ah ee macluumaadka lagu sheegay codsiga. Arrintan waxaa ku jira isbeddellada dhaca inta lagu guda jiro xilliga hubinta codsiga sida beddelka maareyeyaasha shirkadaha, cinwaanka, ama isbeddellada maaliyadeed ee muhiimka ah. Bixinta macluumaadka cusub isla markiiba waxay hubinaysaa in go'aannada maamulku ay ku salaysnaadaan xogta hadda jirta ee saxda ah.

**7)** Khidmadda Codsiga: Codsi kastaa waa in uu la socdaa bixinta khidmadaha loo qoondeeyey si loo daboolo kharashaadka maamulka si waafaqsan qodobka 1[aad] faqradda (n) ee Shaxda sharaxaada khidmadaha. Wasaaraddu waxay wax ka beddeli kartaa khidmadaha iyadoo lagu salaynayo xeer, waxayna beddeli kartaa iyadoo lagu salaynayo baaxadda shatiga. Caddeynta lacag bixinta waxaa lagu lifaaqayaa arjiga. Ku guuldaraysiga bixinta khidmadaha waxay keenaysaa in arjigu la hakiyo ilaa laga soo dhammeystiro.

**8)** Khidmadaha Shirkadaha shaqaalaysiinta aan Faa’iido-doonka ahayn: Wasaaraddu waxay ka dhaafi ama ka dhimmi kartaa khidmadaha shirkadaha shaqaalaynsiinta aan faa’iido-doonka ahayn iyadoo dejinaysa heerar kala duwan oo khidmad ah, loona eegayo nooca shaqadooda sida adeegyada shaqaaleynta aan faa'iido-doonka ahayn. Codsadeyaasha waa in lagu wargaliyaa khidmadda laga dhaafay ama la dhimmay ka hor intaysan soo gudbin arjigooda.

**9)** Dib-u-eegista codsiyada iyo bixinta shatiga: Ka dib marka la helo codsiga la dhammeystiray iyo dokumentiyada taageeraya, Wasaaraddu waxay ku bixineysaa dadaallada lagama-maarmaanka ah si loo xaqiijiyo saxnaanta iyo xaqiiqda macluumaadka la bixiyey, tan waxaa ku jira xaqiijinta heerka diiwaan-gelinta shirkadda, hubinta tixraacyada, shahaadooyinka, iyo xaqiijinta ansaxnimada dammaanadaha maaliyadeed.

**10)** Wasaaraddu waxa ay kormeeri doonta goobaha shaqada ee codsadaha iyo adeegyada, si ay u xaqiijiso awoodooda waxqabadka, taasoo qeyb ka ah qiimaynta. Codsaduhu waa in uu oggolaadaa oo fududeeyaa wixii baaritaan ama weydiimo caynkaas ah, oggolaanshaa gelitaanka xafiisyadooda iyo diiwaanadooda, kana jawaabaan su'aalaha si ay awood ugu hesho Wasaaradda xaqiijinta u-hoggaansanaanta shuruudaha Xeer-nidaamiyahan.

**11)** Waqtiga Go'aan gaarista: Wasaaraddu waxay ku dadaalaysaa in ay ka soo saarto go'aan qoraal ah codsiga muddo ku siman soddon (30) maalmo shaqo gudahooda laga billaabo taariikhda la qabto arjiga oo dhammeystiran, watana dhammaan macluumaadka loo baahan yahay. Go'aanku wuxuu noqon karaa in la bixiyo shatiga ama la diido codsiga, iyadoo la raacinayo sababaha. Haddii codsiga la dhammeystiri waayo, arjiga waxa laga yaabaa in la hakiyo

**12)** Codsiyada aan dhammeystirnayn: Haddii ay wasaaraddu ogaato, inta ay dib-ueegisteeda ku jirto, in codsigu aanu dhammeystirnayn ama uu u baahan caddeyn dheeraad ah, waa in ay qoraal ku ogaysiisaa codsadaha, iyadoo caddeynaysa macluumaadka dheeraadka ah, dokumentiyada, ama caddeynta loo baahan yahay, Codsadaha waa in la siiyaa fursad macquul ah si uu u soo gudbiyo macluumaadka maqan ama uu caddeeyo mad madowga jira. Xaaladahan oo kale muddo 30 maalmo shaqo ah waa in laga dhigaa waqtiga go'aan qaadashada iyadoo xisaabta laga bilaabayo taariikhda ay Wasaaraddu hesho macluumaadka ama caddeynta oo dhammaystiran. Haddii codsaduhu ku bixin waayo macluumaadka loo baahan yahay muddada la cayimay, Wasaaraddu waxay diidi karta codsiga.

**13)** Oggolaanshaha iyo Soo saarista Shatiga: Haddii ay Wasaaraddu ku qanacdo in codsaduhu buuxiyey dhammaan shuruudaha, waxay oggolaaneysaa codsiga waxayna siinaysaa shati ay ku shaqeystaan hawlaha shirkadaha shaqo-siinta ee gaarka ah. Shatigu waa in uu ahaadaa qaabkii loo qoondeeyey oo lagu qeexaa magaca shirkadda, mulkiilaha ama maamulaha, goobta shaqada, baaxadda shaqada la oggolaaday, taariikhda bixinta, dhicitaanka, iyo lambarka shatiga gaarka ah

**14)** Diidmo: Haddii codsiga la diido, Wasaaraddu waxay go'aankeeda ku soo gudbinaysaa hab qoraal ah, iyadoo raacinaysa sababaha diidmada. ku guuldaraysiga shahaadooyinka qaarkood, arrimo ammaanka lid ku ah ama lahaansho diiwaan dembi, ama bixinta xog been ah. Ogeysiiska diidmada wuxuu kaloo ku wargelinayaa codsadaha in uu xaq u leeyahay qaadasho racfaan go'aanka wasaaradda mudada xeerku oggol yahay

**15)** Shatiga oo caddeyn ahaan loo Isticmaalo: Shatiga ay bixiso Wasaaraddu iyadoo la raacayo xeer-nidaamiyahan waa in uu noqdaa mid dhammeystiran oo ku saabsan uqalmidda shatiga si loo tuso loo-shaqeeyaha, shaqaalaha iyo dhinacyada ay khuseyso in si sharci ah loo fasaxay. Shirkaddu waxay isticmaali kartaa shahaadada shatiga ama nuqul shaabadaysan si ay ugu caddeyso shatigeeda sharciga ah loo-shaqeeyaha, shaqaalaha iyo dhinacyada kale ee ay khuseyso.

## Qodobka 6aad

## Bandhigidda Shatiga

1. Shirkad walba oo gaar loo leeyahay waa in ay ku soo bandhigtaa shatiga asalka ah ee ay bixisay Wasaaraddu meel la arki karo oo ku taal xarunteeda ugu weyn, Shatiga waa in lagu dhejiyaa meel muuqata oo loogu talo-galay in ka arki karaan macaamiisha iyo dadka soo booqanaya, sida goobta soo-dhaweynta, si loo xaqiijiyo sharcinimada shirkadda.
2. Marka laga reebo muuqaalka goobta xafiiska, lambarka shatiga, taariikhda la soo saaray iyo taariikhda uu dhacayo, waa in lagu daro shatiga dhammaan waraaqaha rasmiga ah iyo agabka xayeysiinta ee shirkadda, tan waxaa ku jira kara warqadda rasmiga ah ee shirkadda, cinwaanka email-ka, buug yaraha, xayeysiinta, mareegaha iyo bogagga warbaahinta

bulshada, ujeedaduna ay tahay in dadweynaha iyo Wasaaraddu ay si fudud u hubin karaan shatiga shirkadda.

3. Shirkad kasta oo war saxaafadeed, ogeysiis ama xayeysiis soo saarta iyadoo aan la isticmaalin astaan rasmiga ah. Shirkaddu waa in ay hubisaa in ogeysiisku si cad loogu xuso magaca shirkadda, lambarka shatiga iyo muddada uu shaqeynayo. Baahin kasta oo si rasmi ah shirkaddu u soo saarto lagama saari karo tixraaca lambarka shatiga shirkadda.
4. Shirkaddu waxba kama beddeli karto qaabka shatiga, ma amaahin karto shatigeeda qof kale ama shirkad kale, haddii ay dhacdo in ay lunto ama dhib gaaro shahaadada shatiga, shirkaddu waa in ay si degdeg ah u soo wargalisaa Wasaaradda, waxayna codsan kartaa in dib loogu daabaco nuqul si ay u soo bandhigto.

## Qodobka 7aad

## Diiwaan-gelinta Shirkadaha Shaqo-siinta Gaarka ah

1. Wasaaraddu waa in ay haysataa diiwaanka rasmiga ah ee shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah ee sharciyeysan. Diiwaanka waxaa lagu hayn karaa si danabeysan ama nuqul warqad ah, waana in lagu daraa ugu yaraan xogtan soo socota ee shirkad kasta oo sharciyeysan:
    a. Lambarka taxanaha shatiga ama aqoonsiga gaarka ah ee u taagan shatiga
    b. Magaca shirkadda shaqo-siinta gaarka ah (magaca shirkadda) ee shatiga la siiyey.
    c. Faahfaahinta lahaanshaha iyo maamulka, oo ay ku jiraan magaca agaasimayaasha shirkadda
    d. Cinwaanka xarunta dhexe ay shirkaddu ku fuliso hawlaheeda, iyo xafiis kasta oo laamo ah, haddii ay jiraan
    e. Macluumaadka xiriirka shirkadda (lambarka telefoonka, email-ka, website-ka ama faahfaahinta xiriirka kale ee internetka, haddii ay jirto)
    f. Baaxadda shatiga, oo ay ku jiraan qeybaha shaqada ee la oggol yahay sida; maxali, shisheeye, iyo shuruudo kasta oo gaar ah ama xaddidaadyo la xiriira shatiga
    g. Taariikhda soo-saarista bilowga ah ee shatiga iyo taariikhda uu dhacayo shatiga
    h. Sooyaalka shatiga - oo ay ku jiraan taariikhaha cusboonaysiinta, hakinta ama burinta dhacday, iyo tixraaca go'aamada khuseeya: Taariikhda uu qofka shatiga haystaa ka helay Wasaaradda shahaadada shatiga, aqoonsiga qofka helay iyo saxiixiisa.
2. Wasaaraddu waxay ku dari kartaa wixii macluumaad kale ah oo ay u aragto inay lagamamaarmaan u tahay diiwaanka, sida qoraallada u-hoggaansanaanta warbixinada baaritaanada, magacyadda saraakiisha muhiimka ah ee shirkadda, diiwaannada xad-gudubyada ama abaal-marinada muhiimka ah
3. Diiwaanka shirkadaha gaarka ah wuxuu noqonayaa mid u furan in lagu sameeyo kormeer guud saacadaha shaqada rasmiga ah ee xarumaha shirkadda. Qof kasta wuu arki karaa diiwaanka si uu u xaqiijiyo shatiyeynta shirkadaha gaarka ah iyo si uu u eego baaxadda shati bixinta.
4. Haddii qof uu codsado nuqul lagu darayo diiwaanka ama laga soo saarayo, Wasaaraddu way bixin kartaa nuqulkaas, waxayna ku soo rogi kartaa kharashyo maamul oo macquul ah si ay u daboosho kharashaadka raadinta, daabacaadda, ama nuqul ka sameynta diiwaanka, si waafaqsan shaxda kharashaadka gaar ah ee la oggol yahay.

## Qodobka 8aad

## Cusboonaysiinta Shatiga

1. Muddada Shatiga: Shatiga lagu bixiyey xeer-nidaamiyahan wuxuu jirayaa muddo hal (1) sano ah oo ka bilaabmaysa taariikhda la bixiyey, haddii aan la hakin ama aan dib loogala noqon. Taariikhda dhicitaanku waxay ku qoran tahay shahaadada shatiga.
2. Codsiga Cusbooneysiinta: Shirkadda shaqo-siinta gaarka ah, waa in ay soo gudbisaa arji cusbooneysiin ah, waana in lagu soo gudbiyaa ugu dambayn konton (50) maalmo shaqo, lagamana dib dhici karo muddo shan iyo labaatan (25) maalmo shaqo ka hor taariikhda uu dhacayo shatiga.
3. Shuruudaha isku midka ah ee codsiyada cusub: Shuruudaha cusboonaysiinta waxay la mid yihiin shirkad cusub. Shirkaddu waa in ay keentaa dhammaan dokumentiyada iyo caddeymaha cusub ee Xeer-nidaamiyahan oo ay ku jiraan dokumentiyada shirkadaha, shahaadada u-hoggaansanaanta canshuuraha, cinwaanka goobta shaqada, diiwaannada aqoonsiga iyo hab-dhaqanka xubnaha guddiga iyo sidoo kale, maareeyeyaasha aqoonsiyadooda iyo shahaadooyinkooda.
4. Cawaaqibta ka dhalan karta dib-u-dhigista codsiga: Haddii ay shirkaddu soo gudbin waydo dalabka cusboonaysiinta shatiga ugu yaraan shan iyo labaatan (25) maalmo shaqo ka hor taariikhda uu dhacayo. Ku shaqeynta shatiga dhacay lama oggola. Shirkaddu waa in ay joojisaa shaqada oo ay dib u codsato shati cusub. Maamulka kuma khasbana in uu u xalliyo cusboonaysiinta soo daahday sidii shati aan dhammeystirneyn oo sii socda.
5. Guddiga Qiimaynta iyo Hubinta: Marka lagu daro shuruudaha caadiga ah ee kor lagu soo sheegay, guddiga qiimaynta iyo hubinta wuxuu dib u eegayaa diiwaanka uhoggaansanaanta shirkadda, hab-dhaqanka guud iyo waxqabadkeeda, waxaana ka mid ah:
    i. U-hoggaansanaanta shuruudaha shatiga iyo waajibaadka sharciyeynta; iyo ii. Maqnaanshaha cabashooyinka aan la xallin, ganaaxyo, ama xad-gudubyo.
6. Diiwaanka Shaqaaleysiinta: Shirkadaha muujiya diiwaanno shaqo oo la xaqiijin karo, sharcigana sidiisa u raaca gaar ahaan shaqo-siinta dibadda, waxay helayaan tixgelin gaar ah. Shirkadaha sameeya shaqo-siin badan oo waafaqsan sharciga iyo qiyamka dadka mudnaan gaar ah ayey leeyihiin marka shatiga loo cusboonaysiinayo.

7. Go'aanka Cusboonaysiinta: Go'aanka Guddiga qiimeynta iyo hubinta wuxuu noqon karaa:
    a. Cusbooneysiinta la oggolaaday: Shatiga shirkaddda waa la cusboonaysiin karaa muddo sanad ah si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.

b. Cusbooneysiinta la diiday: Codsiga cusboonaysiinta waa la diidi karaa haddii shirkaddu ku guuldareysato in ay buuxiso shuruudaha ama la ogaado in aysan u-hoggaansamin xeer-nidaamiyahan.

8. Taariikhda dhaqan-gelidda Cusboonaysiinta: Wasaaraddu waxay oggolaanaysaa cusboonaysiinta shatiga dhacay, wuxuuna dhaqan-galayaa laga bilaabo maalinta uu dhacayo shatigii hore maalinta xigta, wuxuuna si caadi ah u shaqeynayaa muddo hal (1) sano ah haddii aysan jirin arrimo maamul kale.

9. Xilliga Kalaguurka: Haddii shirkad ay codsato cusboonaysiinta shatiga muddada la cayimay, go'aanka Wasaaradduna uu weli jiro marka shatiga dhacayo, Wasaaraddu waxay soo saari kartaa warqad wargelin ah oo u oggolaanaysa in ay sii shaqeyso si ku meel gaar ah ilaa go'aanka cusboonaysiinta laga soo saarayo. Si kastaba ha ahaatee, haddii natiijooyinka horudhaca ah ay muujiyaan sababo halis ah oo aan dib loo cusboonaysiin karin, Wasaaraddu waxay ku amri kartaa shirkadda in ay hakiso hawlaheeda inta go'aan laga gaarayo.

## Qodobka 9aad
## Wareejinta Shatiga

1. Shatiga lagu bixiyey xeer-nidaamiyahan wuxuu gaar u yahay qofka shatiga haysta iyo shirkaddii shatiga la siiyey. Shirkadda shaqo-siinta gaarka ah ma wareejin karto, ma iibin karo ama si kale uguma gudbin karto shatigeeda cid kale. Wareejin kasta ama wadaagis kasta oo la sheegay ee shatiga waa mid aan sax ahayn oo waxayna ka dhigan tahay ku xadgudubka xeer-nidaamiyahan.
2. Haddii ay dhacdo in wax laga beddelo lahaanshaha shirkad shati horey u lahayd, iibinta ganacsiga, isku darka, la wareegidda saamilayda cusub, ama wax kala beddel kasta oo si dhammeystiran ugu wareejiso maamulka shirkadda qof kale ama shirkad kale, shatiga wuxuu dhacayaa isla markiiba. Milkiilayaasha cusub waa in ay ku codsadaan shatiga cusub magaca shirkadooda oo hoos yimaada ganacsigooda cusub ka hor inta aysan sii wadin ganacsiga. Ku-shaqeynta shatiga mulkiilaha hore lama oggola
3. Wasaaradda waa in lagu soo wargeliyaa isbeddel kasta oo ku yimaadda xaalada jiritaanka qaanuuneed ee shirkadda ama qaab-dhismeedka shatiga. Wasaaradda ayaa go'aaminaysa haddii loo baahan yahay shati cusub, ama haddii ay ku filan tahay in la ansixiyo isbeddelka shatiga hadda jira.

## Qodob 10aad

## Kala-laabashada Shatiga

1. Wasaaraddu waxay joojin kartaa ama gabi ahaanba kala noqon kartaa shatiga shirkadaha shaqoqorista haddii ay go’aansato in tallaabo noocaas ah ay lagama-maarmaan tahay iyadoo lagu saleynayo mid ama in ka badan oo ka mid ah qodobbada soo socda:
    a. U-qalmid-la’aan Shuruudaha Shatiga: haddii ay soo baxdo caddeymo muujinaya in shirkaddu aanay buuxin shuruudaha ku xusan xeer-nidaamiyahan ama ay ku dhacday mid ka mid ah xaaladaha ka reebaya haysashada shatiga markii shatiga la siiyey ka dib, sida haddii saraakiisha shirkadda lagu helo in ay galeen dembiyo ka mid ah kuwa shatiga loogala laaban karo.
    b. Arrimo la Xiriira Waxqabadka: Waxqabadka shirkadda shatiga haysata haddii ay ka hoos marto waxqabadkii laga filaayey ee la xiriiray shaqo-qoris iyo meeleyn shaqodoonka soomaaliyeed, ama ay ku kacaan wax ka baxsan xayndaabka iyo ujeeddada shatiga la siiyey. Arrimahaas waxaa ka mid ah:
        i. Fashil joogto ah oo ku aaddan in si guul leh loo meeleeyo shaqaalaha iyadoo la waafajinayo ballanqaadyadii shirkaddu sameysay, ama
        ii. Shaqaale si aan sharci ahayn loogu meeleeyey ama loogu diray waddamo ka baxsan aysan kuwa wasaaraddu ay heshii kula jirto.
        iii. Arrimahaas waxay keeni kartaa in shirkadda laga joojiyo ama lagala noqdo shatiga si waafaqsan xeer-nidaamiyahan.
    c. Ku-xad-gudbidda Shuruudaha Shatiga: Ku-guul-darreysiga u-hoggaansanaanta shuruudaha lagu bixiyey shatiga, ama jebinta awaamiirta gaar ah ee ay wasaaraddu soo saartay waxay keeni kartaa shati kala noqosho.
    d. Warbixinta iyo Bixinta Macluumaad: Ku-guul-darreysta soo-gudbinta warbixin, macluumaad ama xog kale oo laga codsaday in shirkaddu soo gudbiso si waafaqsan xeer-nidaamiyahan sida gudbinta warbixin lix-biloodle ah, ama sanadle ah, ama xog kale ee la codsado.
    e. U-hoggaansanaan-la’aanta ogeysiisyada rasmiga ah: Ku-guul-darreysta uhoggaansanaanta ogeysiis rasmi ah ama amar toosin ah oo ka soo baxay wasaaradda, sida amar lagu farayo in la saxo jebin xeer, ama lagu joojiyo dhaqan aan sharci ahayn.
    f. Cabashooyinka iyo Anshax-xumida: Waxaa laga soo gudbiyey dacwooyin culus oo soo noqnoqday oo ka dhan ah shirkadda, taasoo ay ka soo gudbiyeen shaqaalaha, looshaqeeyeyaasha, ama dhinacyo kale, baaritaankuna muujiyo jiritaanka anshax-xumo, ama sidoo kale lagu helo caddeymo muujinaya in shirkaddu ku lug leedahay dhaqanxumo, ku-xad-gudubka xuquuqda shaqaalaha ama xeer-nidaamiyahan.

2. Jebinta mid kasta oo ka mid ah qodobbadan waxay sababi kartaa in la hakiyo ama gabi ahaanba lagala noqdo shatiga shirkaddu ku hawl-gasho.

## Qodobka 11aad

## Hab-raaca Ka Horeeya Tallaabooyinka Anshax-marinta

1. Marka laga reebo xaaladaha u baahan in tallaabo si degdeg ah loo qaado, Wasaaraddu waa in ay raacdaa nidaamkan ka hor inta aysan joojin ama baabi'in shatiga:
    a. Ujeeddada Wargelinta: Wasaaraddu waxay qoraal ahaan ku wargelinaysaa shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah damaceedu yahay in ay qaaddayso tallaabooyin la qorsheeyey ee noqon kara joojinta ama baabi'inta, iyadoo si cad u sheegaysa sababaha ama saldhigga tallaabadaas degdega ah, iyo weliba iyadoo raacinaysa caddeymo ku filan ama natiijooyin taageeraya sababahaas.
    b. Fursadda Jawaabta: Shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah waxaa la siinayaa fursad macquul ah oo ay ku bixiso jawaab celin ku saabsan ogeysiiska. Sida caadiga ah shirkaddu waxay helaysaa shan (5) maalmood oo shaqo ama muddo ka badan haddii ay Wasaaraddu ku sheegto ogeysiiska, laga billaabo marka la helo ogeysiiska, si ay u soo gudbiso qoraal difaac ah ama ay u saxdo khaladka haddii uu yahay mid la sixi karo. Shirkaddu waxay soo bandhigi kartaa difaac, sharaxaad, ama tallaabooyin sixid ah oo la qaaday.
    c. Tixgelinta Jawaabta: Wasaaraddu waxay tixgelinaysaa jawaab kasta ama caddeynta ay shiraddu u soo gudbiso muddada loo oggol yahay, ka hor inta aysan gaarin go'aan kama dambeys ah.
    d. Go'aan iyo Ogeysiis: Ka dib marka la tixgeliyo dhammaan xogta la heli karo iyo wixii jawaabo ah ee la helay, Wasaaraddu waxay gaaraysaa go'aan waxayna qoraal ahaan ugu wargelinaysaa shirkadda shaqo-siinta gaarka ah, haddii go'aanka yahay in shatiga la joojinaayo ama la baabi'inaayo, ogeysiisku waxaa ku jiraya sababaha go'aankaas lagu gaaray.
    e. Cusboonaysiinta Diiwaanka: Haddii shatiga la joojiyo ama la baabi'iyo, Wasaaraddu waa in ay si degdeg ah u cusboonaysiisaa diiwaanka si waafaqsan Qodobka 9aad ee Xeer-nidaamiyahan si loogu muujiyo isbeddelka xaaladda.
2. Muddo Go'aan Ka hakinta
    a. Hakad kasta oo lagu sameeyo shatiga waa in uu ahaadaa mid leh muddo cayiman ama uu socdaa ilaa la fuliyo shuruudo gaar ah, ogeysiiska hakadka waa in uu qeexaa taariikhda bilowga iyo dhammaadka hakadka, ama shardi lagu xiro soo celinta shatiga tusaale ahaan: ilaa mushaharka la bixiyo oo caddeyn la keeno.
    b. Inta lagu jiro muddada hakinta, waa in shirkaddu joojisaa dhammaan hawlaha shaqaaleysiinta iyo meeleynta.
3. Haddii shirkaddu buuxiso shuruudaha ku keenay hakinta, waa inay wargelisaa Wasaaradda kana codsataa in shatiga dib loo hawlgeliyo.
4. Saameynta Joojinta (Kala-noqoshada) Shatiga: Marka shatiga la baabi'iyo lagala laabto, shirkaddu waa in ay si degdeg ah u joojisaa dhammaan hawlaheeda. Waxa la farayaa shirkadda in ay ku soo celiso shahaadada shatiga asalka ah Wasaaradda muddada la cayimay gudaheeda. Magacyada shirkadda lagala laabtay shatiga ayaa la shaacinayaa si waafaqsan qodobka 13aad ee Xeer-nidaamiyahan si bulshada loo wargeliyo.
5. Iska dhiibid Ikhtiyaari ah (Iskaga tegid Shatiga):

a. Shirkadaha haysta shatiga waxay si ikhtiyaari ah uga tanaasuli karaan shatiga, iyagoo qoraal ahaan ugu soo wargelinaya Wasaaradda sababaha sida xiritaanka ganacsiga.
b. Wasaaraddu waxay baabi'inaysaa shatiga laga bilaabo taariikhda tanaasulka waxayna cusboonaysiinaysaa diiwaanka. Iska dhiibidu kama saamaxayso shirkadda ama saraakiisheeda mas'uuliyada xad-gudub kasta ee horey u dhacay.

## Qodobka 12aad

## Diiwaanka Guud iyo Keydka Xogta Macluumaadka ee Xarumaha Shirkadaha Shaqo-siinta Gaarka ah

1. Wasaaraddu waa inay xaqiijisaa hufnaanta iyadoo soo bandhigaysa, cusboonaysiinaysana liiska dhammaan Xarumaha Shirkadaha Shaqo-siinta Gaarka ah ee shatiga haysta. Liiskan waa in ugu yaraan lagu daabacaa bogga rasmiga ah ee Wasaaradda Shaqada, waxaana sidoo kale lagu baahin karaa warbaahin kale ama wargaysyo rasmi ah. Liiska la daabacay waa inuu ka kooban yahay magaca xarunta shirkadda shaqo-siinta gaarka ah ee shatiga leh iyo lambarka shatigeeda, iyadoo lagu dari karo faahfaahin dheeraad ah sida baaxadda shatiga ama xogta xiriirka.
2. Liiska xarumaha shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah ee shatiga haysta waa in si joogto ah loo cusboonaysiiyaa si uu uga tarjumo shatiyada cusub ee la bixiyey, kuwa dhacay ama aan la cusboonaysiin, iyo sidoo kale joojinta ama baabi'inta shatiyada. Tani waxay suurtagelinaysaa in dadka shaqo-doonka ah iyo loo-shaqeeyeyaashu si sahlan u hubiyaan xaaladda rasmiga ah ee xarumaha ay la macaamilayaan.
3. Wasaaraddu sidoo kale waa inay horumarisaa oo ilaalisaa keyd xogeed (database) danabeysan ah oo dhammeystiran oo ku saabsan xarumaha shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah ee shatiga haysta. Keyd xogeedku waa inuu ka tarjumo xogta ku jirta diiwaanka rasmiga ah sida ku cad qodobka 9aad ee xeer-nidaamiyahan, waafaqsana heerarka la oggol yahay ee xogta dadweynaha. Wuxuu ka koobnaan karaa, xog kooban oo ku saabsan astaanta xarunta, adeegyada ay bixiso, taariikhaha ansaxnimada shatiga, iyo tirakoobka waxqabadka.
4. Keydka xogeed sidoo kale waa inuu ka koobnaadaa xogaha laga helay warbixinnada ay xarumaha shaqaaleyntu waajibka ku tahay inay soo gudbiyaan iyadoo la raacayo si waafaqsan qoddobka 17aad ee xeer-nidaamiyahan, iyo xog kasta oo kale oo ay Wasaaraddu uruuriso inta ay fulinayso shaqadeeda kormeerka sida xog kooban oo ku saabsan cabashooyinka ama tallaabooyinka fulineed. Ujeeddadu waa in la helo nidaam dhexe oo lagu kormeero shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah iyo isbeddellada socda ee socdaalka shaqaalaha.
5. Markay shirkaddu horumarinayso oo ilaalinayso keydkan xogeed, waa inay si buuxda ula jaanqaadaa shuruucda khuseysa ee ku saabsan asturnaanta iyo ilaalinta xogta. Xogta shakhsiyadeed ee shaqaalaha ama xubnaha kale ee shaqaalaha waa in si adag loo ilaaliyaa.

Qeybaha laga heli karo dadweynaha ee keydkan xogeed looma oggola in ay muujinayaan aqoonsiyo shakhsiyeed ama xog xasaasi ah oo ku xadgudbi karta xuquuqda gaarka ah.

6. Keydka xogeedka ama ugu yaraan liiska xarumaha shatiga haysta ee hadda ansax ah waa inuu si bilaash ah ugu furnaadaa dadweynaha, iyadoo loo marayo hab danabeysan. Wasaaraddu sidoo kale waxay bixin kartaa adeeg xaqiijin ah oo u oggolaanaya muwaadiniinta inay weydiiyaan xaaladda sharci ee xarun gaar ah.
7. Wasaraaddu waxay la shaqeynaysaa hay'adaha kale ee dowliga ah ee khuseeya sida Hay'adda Socdaalka iyo jinsiyadda ama Booliiska si ay u wadaagaan xogaha khuseeya ee ka yimaada keydka xogkeydiyaha danabeysan wasaaradda ee khuseeya arrimaha shaqaaleysiinta si ay uga qeyb qaataan maareynta guud ee socdaalka shaqaalaha, iyadoo la hubinayo in xog ilsa wadaagiddaasi ay la jaanqaadayso heerarka ilaalinta xogta.

## QEYBTA 2AAD
## WAAJIBAADKA SHAQO-SIINTA SHIRKADAHA GAARKA AH

### Qodobka 13aad Xayeysiin

1. Waa in shirkada shaqo-siinta gaarka ah ay xayeysiiyaan dhamman jagooyinka bannaan ee ay shaqaalaysiinayaan iyagoo isticmaalaya wargeysyada, TV-yada, Raadiyeyaasha, websiteyada iyo baraha bulshada si shaqo-doonku u awoodo in uu fursad u helo in uu codsado shaqada la soo xayeysiiyey. Haddii fursad shaqo soo baxdo shirkaduhu waxay marar naadir ah adeegsan karaan liiska keydka shaqo-doonka ee jira iyagoo cuskanaya sababo sharci ah. Baahinta xayeysiinta loo sameeyo si hufan waxay dhiirri-gelinaysaa dhammaan shaqo-doonka in ay uga faa'iidaystaan fursadaha shaqada si siman.
2. Faahfaahinta Xayeysiinta Waajibka ah: Dhammaan xayeysiinta shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah ay sameynayaan iyagoo isticmaalaya wargeysyada, TV-yada, raadiyeyyaasha, website-yada iyo baraha bulshada, ama madal kale waa in ay ku jiraan macluumaadkan soo socda:
    a. Magaca shirkada iyo lambarka shatiga, iyo taariikhda bixinta iyo dhicitaanka shatiga.
    b. Cinwaanka iyo macluumaadka kale ee xiriirka shirkadda sida telefoonada, emailska si shaqo-doonka iyo Wasaaradda ay si sahlan ula xiriiri karaan shirkadda
    c. Magaca ama faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan shirkadda shaqada laga filayo, goobta shaqada, magaalada iyo dalka, haddii ay tahay dibadda, iyo caddeyn muujineysa in shirkaddu tahay mid qaanuuni ah sida in ay tahay shirkad diiwaangashan oo jirta.
    d. Cinwaanka iyo nooca shaqada la bixinayo iyo tirada jagooyinka jira ee bannaan.
    e. Soo-koobidda shuruudaha iyo xaaladaha shaqada, oo ay ku jiraan ugu yaraan: muddada heshiiska la filayo, heerka mushaharka ama dakhliga, saacadaha shaqada, faa'iidooyinka ama gunnooyinka muhiimka ah, nidaamka fasaxa iyo maalmaha nasashada, iyo cidda qaadaysa kharashyada shaqaalaynta fiisaha, tikidyada duulimaadka, baaritaannada caafimaadka. Xayeysiintu waa in ay si cad u sheetaa haddii milkiilaha shirkadda uu bixinayo hoy, cunto, ama gaadiid.

f. Shuruudaha asaasiga ah ee aqoonta iyo khibradda loo baahan yahay, heerka waxbarashada, sanadaha khibradda, xirfadaha gaarka ah ama heerka luqadda, iyo shuruudo kale oo muhiim u ah shaqada.
g. Tilmaamaha codsiga iyo waqtiga kama dambeysta ah iyo sida loo codsado iyo taariikhda xiritaanka codsiyada.

**3.** Ka-ilaalinta Xogta Khiyaano iyo Been-abuur: Dhammaan macluumaadka ku jira xayeysiiska waa in uu noqdaa mid sugan oo run ah, isla markaana aysan ku jirin wax marin habaabin ah. shirkadda shaqo-siinta gaarka ah waa in ay ka fogaataa faafinta macluumaad been-abuur ah ama sheegashooyin ka baxsan xaqiiqda oo ku saabsan shaqada. Isticmaalka astaamaha ganacsi ama calaamadaha shirkadda shaqada waa in loo oggolaadaa si looga hortago khiyaano.

**4.** Takoor-la'aan: Xayeysiintu waa in aysan ku jirin wax luqad ama shuruudo takoor ah oo ka soo horjeeda Xeerka Shaqada Soomaaliya ama heerarka caalamiga ah ee shaqada sida ka doorbidid ku saleysan qabiil, diin, rag iyo dumar. Marka laga reebo arrimo la xiriiro shuruud xirfadeed oo dhab ah. Qoraalka xayeysiisku waa in uu dhiirri-geliyaa in dhammaan musharixiinta u qalma ay soo codsadaan

**5.** Ku-wargelinta Wasaaradda: Shirkada shaqo-siinta gaarka ah waa in ay Wasaaradda ku soo ogeysiiso dhammaan xayeysiinta ay baahinayso. Shirkaddu waxay soo gudbinaysaa nuqul ku saabsan xayeysiinta inta aan la daabicin ama la baahin iyadoo loo marayo hannaan emails ah ama xogkeydiye danabaeysan. Wasaaraddu waxay dib u eegaysaa xayeysiinta si loo hubiyo u-hoggaansanaanta xeer-nidaamiyahan iyo shuruucda kale ee khuseysa shaqada.

**6.** Wasaaraddu waxay soo saari kartaa tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan heerarka xayeysiinta ee shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah, oo ay ku jiraan qoraal iyo caddeyn mas'uuliyadeed ay tahay in lagu lifaaqo xayeysiinta.

**7.** Haddii shirkadda shaqo-siinta gaarka ah aysan u-hoggaansamin shuruudaha xeernidaamiyahan sida xayeysiinta shaqooyin aan la oggoleyn, ka tagida faahfaahinta shatiga, ama xayeysiin been-abuur ah, waxaa laga qaadayaa tallaabooyin fulineed oo ay ku jiraan amarro lagu joojinayo xayeysiinta ama ganaax.

## Qodobka 14aad Mamnuucidda Kharashaadka Shaqo-siinta

**1.** Shirkada shaqo-siinta gaarka ah waxaa ka reeban in ay qaadaan ama oggolaadaan kharash, lacag ama dalaal kasta oo la xiriirta adeegyada shaqaaleynta, meeleynta shaqada, ama hawlaha la xiriira qof shaqo-doon ah ama shaqaale. Mamnuuciddani waxay khusaysaa qaab kasta oo lacag ururin ah, ha ahaato mid toos ah ama dadban, sida lacag caddaan ah, ay ka jaraan mushaharka, kharashaad dheeraad ah si shaqada loo helo.

**2.** Dhammaan kharashaadka sharci ah ee la xiriira shaqaaleynta, dokumentiyada iyo meeleynta shaqaalaha waa in ay iska bixiyaan shirkada ama loo-shaqeeyaha. Shirkadda waxay xaq u leedahay in ay ka qaado kharashaadkaas loo-shaqeeyaha sida heshiiska u dhaxeeya, laakiin kharashaadkaas lama dulsaari karo shaqaalaha. Kharashaadkaas waxaa
ka mid noqon kara qarashaadka xayeysiinta, wareysiyada, dokumentiyada, habaynta fiisaha, iyo adeegyada shaqaaleysiinta.

**3.** Loo-shaqeeyaha ayaa mas'uul ka ah in uu daboolo kharashaadka safarka ee shaqaalaha laga keenay meesha uu degan yahay ama meesha lugu heshiiyey ee laga dhoofinayo ilaa goobta shaqada oo ay ku jiraan tikidyada diyaaradda, haddii shaqada ay tahay mid dibadda ah, gaadiidka dhulka, hoy ku habboon inta safarka socdo iyo lacagaha habeen dhaxa ah ee lagu noolaado inta safarka lagu guda jiro, haddii ay jirto. kharashaadka baarista caafimaadka,

tallaalada, ama COVID-19 ee looga baahan yahay shaqada ka hor, waa in uu bixiyo loo-shaqeeyaha. Dhammaan kharashaadkaas kor ku xusan lagama qaadi karo shaqaalaha.

4. Lacagaha iyo kharashaadka ay tahay in ay bixiyaan shirkadda ama loo-shaqeeyaha si waafaqsan qodobbada 2aad iyo 3aad lagama jari karo mushaharka shaqaalaha ama faa'iidooyinka uu ku muteystay shaqada waqti kasta. Mushaharka shaqaalaha waa in si buuxda loo siiyo sida ku qoran heshiiska shaqada, iyadoo aan wax qarsoon laga qaadin si lagu daboolo kharashyada shaqaaleynta.
5. Ku Caddeynta Heshiisyada: Marka shirkadda shaqo-siinta gaarka ah ee ku hawlan shaqosiinta xoogsatada Soomaaliyeed ee dibadda ama shaqasiinta ajaanibta gudaha dalka ee la qoray, heshiiska shaqada waa in uu si cad u qeexaa mas'uuliyada bixinta kharashaadka soo socda: lacagaha fiisaha ama rukhsadaha shaqada, kharashaadka safarka, tikidyada, diyaaradda, lacagaha baaritaanka caafimaadka, caymiska, iyo kharashaadka kale ee la xiriira shaqaaleynta sida waafaqsan qodobka 3aad ee sare ku xusan. Ujeeddada waa in la hubiyo hufnaanta, lana ilaaliyo in shaqaalaha laga qaadi karin kharashaadkaas.
6. Xaaladaha gaarka ah: Marka loo-shaqeeyaha aanu qaadin wax kharash ah, sida lacagaha fiisaha, tikidyada diyaaradda, baaritaanka caafimaadka, iyo kharashaadka kale ee safarka shaqada, shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah waxaa keliya ee loo oggol yahay inay ka qaadaan shaqaalaha u safraya dibada lacag dhan hal bil oo ka mid ah mushaarkooda. Arrimahan waa in si adag loogu xaddido oo keliya xaaladaha noocaas ah ee kor ku xusan, looguna sheego si hufan shaqaalaha u safraya dibadda. Oggolaanshaha qoraalka ah ee shaqaalaha waa in la helo ka hor inta aanu aqbalin wax dalab shaqo ah. Wasaaradda ayaa mar walba kormeereysa nidaaminta xaaladaha noocaas ah si loo hubiyo cadaaladda loogana hortago xad-gudubka.
7. Dhaqan-gelinta: Shirkaddii ku xad-gudubta xeer-nidaamiyahan oo lacag ka qaada shaqaalaha, waxaa lagu amrayaa inay lacagtii ay ka qaadeen u soo celiyaan shaqaalaha u safraya dibadda, waxaana laga qaadayaa tallaabooyin ciqaabeed sida ku cad xeernidaamiyahan. Wasaaradda waxay xaq u leedahay inay joojiso ama hakiso shatiga shirkadda ku kacda sababo la xiriira xad-gudubyada noocaas ah.

## Qodobka 15aad Heshiisyada Shaqada

1. Heerarka Shaqada Hufan: Shirkadaha shaqo-siinta gaarka ah waa inay xaqiijiyaan in heshiiska shaqada loo dejiyey shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha uu noqdo mid loo marayo nidaamkan si waafaqsan Xeerka Shaqada Soomaaliyeed, marka shaqada ay tahay Soomaaliya ama Xeerka Shaqada ee dalka martida loo yahay haddii shaqadu dibadda tahay, iyad aoo la raacayo midka shaqaalaha aadka ugu roon isla markaana ilaalinaya shaqaalaha. Shirkadda marnaba kama qeyb qaadan karto fududeynta heshiis jebinaya xuquuqda asaasiga ah ee ku xusan Xeerka Shaqada Soomaaliyeed ama ama xeerka shaqada dalka martida looyahay ama heerarka shaqo ee caalamiga ah.
2. Ansixinta Heshiiska: Ka hor inta aan shaqaalaha la dhoofin, shirkaddaha shaqo-siinta gaarka ah waa inay soo gudbisaa nuqul ka mid ah heshiiska shaqada ee la saxiixey oo ay u keento Wasaaradda Shaqada si loo eego, loona diiwaan-geliyo. Wasaaradda waxay baaraysaa heshiiska si loo xaqiijiyo inuu u hoggaansamay dhammaan shuruudaha Xeerka Shaqada Somaliyeed, Xeer-nidaamiyahan, iyo shuruucda kale ee khuseeya ama heshiisyada labada dhinac. Wasaaradda ayaa diidi karta ama codsan karta wax-ka-beddel heshisyada aan buuxin shuruudaha xeerka shaqada soomaaliyeed.
3. Qoraal iyo Luqad: Dhammaan heshiisyada shaqada ee ay fududeyaan shirkadda shaqo-siinta gaarka ah waa inay noqdaan qoraal oo ku qoran luqad uu fahmi karo shaqaalaha, sidoo kalena u fahmi karo loo-shaqeeyaha. Haddii heshiiska uu ku qoran yahay luqad

qalaad, waa in shaqaalaha la siiyo nuqul la turjumay oo Af-Soomaali ah ama luqad kale oo uu shaqaalaha fahmayo iyadoona Saxiixa ama Suulsaarka shaqaalaha ee heshiiska la turjumay markuu jiro waa in la siiyaa shaqaalaha, waana in arrintaas lagu xaqiijiyaa is-faham iyo heshiis dhinacyada.

4. **Habka Heshiiska Caadiga ah:** Wasaaraddu waxay sameyneysaa hab-raac heshiis shaqo oo caadi ah oo ku lifaaqan xeer-nidaamiyahan kaasoo ka kooban dhammaan qodobbada khasabka ah ee shaqada dibadda. heshiisyada shaqada ee la jaanqaada hab-raacan caadiga ah ama leh dhammaan qodobada muhiimka ah ee ku jira ayaa loo aqoonsanayaa in uu sax yahay marka ay diyaarinayaan shirkaddaha shaqo-siinta. Wax ka baxsan qodobada hab-raaca caadiga ah waa in marka hore ay helaan oggolaanshaha Wasaaradda. Hab-raacan caadiga ah wuxuu daboolayaa qodobada mushaharka, saacadaha shaqada, magdhawga, shaqada dheeraadka ah, maalmaha nasashada, hoyga iyo cuntada haddii la bixiyo, daryeelka caafimaadka, caymiska, dib u celinta, cusboonaysiinta iyo joojinta heshiiska, xallinta khilaafaadka, iyo wixii la mid ah.
5. **Nuqulka Shaqaalaha:** Shirkadda shaqo-siinta gaarka ah waa inay hubisaa in shaqaaluhu helo nuqul ka mid ah heshiiska shaqada ee la saxiixey waqti ku filan ka hor inta uusan shaqaalaha dhoofin haddii shaqadu tahay dibadda ama ka hor billaabidda shaqada marka shaqadu gudaha tahay. Waa in shirkadda heshiiska ugu sharaxdaa shaqaalaha luqad uu fahmi karo, iyadoo lagu muujinayo xuquuqda iyo waajibaadka si shaqaaluhu u noqdo mid xog ogaal ah.
6. **Ka-hortagga Beddelaada Heshiiska:** Shirkadda marnaba ma oggolaan karto ama ma fududeyn karto in shaqaalaha loo soo bandhigo heshiis beddel ama si weyn uga duwan kan horey loo oggolaaday ee goobta shaqada dalka martida loo yahay ama kadib marka la geeyo, kaasoo yareynaya shuruudihii shaqaalaha lagula heshiiyey. Haddii wax-ka-beddel lagu sameynayo heshiiska sababo aan la filayn awgood, waa in wax-kabeddelkaas ay ansixiso Wasaaradda, shaqaaluhuna uu si qoraal ah u oggolaadaan iyadoo aan wax cadaadis ah lagu saarin.
7. **Muddada Heshiiska iyo Cusboonaysiinta:** Heshiiska waa inuu si cad u qeexaa muddadiisa. Haddii ay jirto suurtagalnimada cusboonaysiin ama kordhin, waa in shuruudaha cusboonaysiinta heshiis wadajir ah uu jiro, sida ogeysiiskii hore lagu caddeeyey. Shirkadda waa inay la socotaa dhicitaanka heshiisyada shaqaalaha ay shaqaaleysiisay oo ay ka caawisaa, haddii loo baahdo hab-raacyada soo celinta ama cusboonaysiinta heshiiska iyadoo loo eegayo go’aanka shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha.

## Qodobka 16aad Ururinta Xogta iyo Warbixinta

1. Shirkad kasta oo rukhsad u haysata shaqasiinta gaarka loo leeyahay waa inay si joogto ah uga warbixisaa hawlaheeda Wasaaradda. Warbixin bille ah waa in la soo gudbiyaa dhammaadka bil kasta, inta rukhsaddu wali shaqeynayso. Wasaaradda waxay ogeysiinaysaa shirkadda taariikhaha saxda ah ee la rabo iyo haddii ay jiraan qaab gaar ah oo warbixintu u baahan tahay.
2. Wasaaraddu waxay xaq u leedahay in ay dalbato warbixinno dheeraad ah, haddii ay jiro walaac ama shaki ku saabsan waxqabadka ama waafaqsanaanta shirkadda. Haddii cabashooyin la helo

ama shirkaddu ay tahay mid cusub, waxaa la farayaa inay si joogto ah u soo gudbiso warbixin ilaa lagu qanco in ay waafaqsan tahay xeer-nidaamiyahan. Shirkadda waa inay raacdaa amar kasta oo la xiriira warbixin dheeraad ah.

**3.** Waa waajib saaran shirkad kasta oo ah in ay si sax ah u keydiso ayna cusboonaysiiso dhammaan diiwaannada la xiriira hawlaheeda shaqaalaysiinta iyo meeleynta. Diiwaannadani waa inay ku filan yihiin in laga diyaariyo warbixinada loo baahan yahay, oo ay ka mid yihiin:

a. Macluumaadka musharraxiinta ama shaqo-doonka
b. Amarrada shaqo
c. Heshiisyada
d. Meeleynta shaqaalaha;
e. Diiwaannada waa in si ammaan ah loo hayo si loo xaqiijiyo saxnaantooda loogana baaro shirkadda waa inay diiwaannadan shirkaddu haysaa ugu yaraan saddex (3) sano kadib marka ay dhacdo shaqaalaysiinta ama meeleynta la xiriirta.

**4.** Xafididda Xogtaa: Marka shirkadda shaqasiinta gaarka loo leeyahay ay ururinayso ama soo gudbineyso xog, waa in la hubiyaa in xogta shakhsiyadeed ee shaqaalaha si buuxda u waafaqsan tahay shuruucda iyo mabaadi'da ilaalinta xogta iyo asturnaanta. Haddii suurtagal ah, warbixinnada waa in lagu soo bandhigaa si guud oo aqoonsiyada shakhsiyeed gaar ahaan haddii warbixinaha la daabacayo. Xogta khaaska ah ee shakhsiyaadka ama loo-shaqeeyeyaasha waa in si adag loo ilaaliyaa. Gudbinta xogta shakhsiyadeed ee loo gudbinayo Wasaaradda waa inay u xafiddaa si ammaan ah. Wasaaraddu waxay sidoo kale mas'uul ka tahay in si qarsoodi ah u isticmaasho xogta warbixinnada, iyadoo keliya ugu adeegsanayso ujeeddooyin sharci ah.

**5.** Nuxurka Warbixinta: Wasaaraddu waxay siinaysaa shikadaha foom mideysan oo warbixinta lagu soo gudbiyo. Guud ahaan, warbixin xilliyeedku waa in uu ka koobnaadaa xogtan hoos ku xusan:

a. Xogta shirkadda:

i. Magaca shirkadda
ii. Lambarka shatiga
iii. Xogta xiriirka
iv. Qaab-dhismeedka shirkadda
v. Shaqaalaha muhiimka ah
vi. Isbeddel kasta oo ku dhacay qodobadan muddada warbixinta
vii. Caddeynta ansaxnimada iyo faahfaahinta shaatiga

b. Shaqooyinka La Xayeysiiyey:

i. Tirada xayeysiisyada ama ogaysiisyada shaqo ee shirkaddu bixisay
ii. Kala saarid ku saleysan qeybaha shaqada
iii. Kala saarid haddii shaqadu tahay gudaha dalka ama dibadda.

c. Codsiyada La Helay: Tirada guud ee codsiyada shaqo-doonka ee shirkadda heshay muddadaas, oo loo kala saaro iyadoo lagu saleynayo:

i. Meesha u ka yimid codsiga (gobol ka mid ah Soomaaliya ama dibadda)
ii. Jinsiyadda
iii. Jinsiga (lab/dheddig)
iv. Da'da
v. Heerka waxbarasho ama xirfadeed
vi. Xaaladaha kor xusan waxay muujinaysaa muuqaal guud oo ku saabsan dadka raadinaya shaqada iyadoo loo marayo shikadaha

d. Tirada Shaqo-doonka La Shaqaaleysiiyey: Tirada guud ee dadka lagu guuleystay in shaqo loo helo iyadoo la adeegsaday shirkadda muddada warbixinta. Tani waxay si gaar ah u kala saaraa:

  i. Astaamaha shaqaalaha: jinsiga, da'da, heerka waxbarasho, heerka xirfadeed
  ii. Nooca meeleynta: tirada shaqaalaha Soomaaliyeed ee lagu meeleeyey gudaha dalka, iyo kuwa dibadda loo diray
  iii. Wadamada loo diray: wadamada ay shaqaaluhu u dhoofeen iyo tiradooda mid kasta
  iv. Qeybta shaqada: warshadaha/shaqooyinka (sida shaqooyinka guryaha, dhismaha, caafimaadka, hoteelada, amniga)
  v. Muddada heshiiska: haddii shaqadu tahay muddo gaaban ka yar (1) sano, dhexdhexaad (1-2 sano), ama mid joogto ah.

e. Dulmar Shuruudaha iyo Xaaladaha Heshiiska: Caddeyn muujinaysa in dhammaan shaqaalaha la meeleeyey ay heleen heshiisyo buuxinaya shuruudaha loo baahan yahay. Shirkaddu waxay soo bandhigi kartaa tusaalooyin aan magacyo lahayn oo heshiisyo caadi ah, ama ay tilmaami karto kiisaska mushahar aad u sarreeya ama aad u hooseeya. Waxaa sidoo kale lagu xusaa haddii shaqaalahaas la siiyey caymis bulsho, badbaado shaqo.

f. Dhacdooyinka iyo Cabashooyinka Macluumaad ku saabsan:

  i. Cabashooyinka shirkaddu ka heshay shaqaale ama loo-shaqeeye
  ii. Khilaafaadyo ama dhibaatooyin muhiim ah oo soo baxay iyo sida loo xalliyey
  iii. Shilalka ama dhacdooyinka goobaha shaqada ee la xiriira shaqaale shirkaddu dhoofisay

g. Iskaashiga:

Macluumaad la xiriira:

  i. Wada-shaqeynta shirkaddu la samaysay adeegyada shaqo ee dawladda
  ii. ka-qeyb-galayaasha tababbarka
  iii. ka-qeyb-galayaasha bandhigyada shaqo iv. Tababbaridda tababbareyaal gaar ah

h. Xogaha Kale ee Muhiim ah:

  i. Wixii xog ah ee Wasaaraddu ku amarto in la keeno
  ii. Xogta ay shirkaddu u aragto mid muhiim ah sida:
  iii. Isbeddelada suuqa shaqada
  iv. Caqabadaha
  v. Talooyin ku saabsan hagaajinta sharciyada

**6.** Codsiyo xog dheeraad ah: Wasaaraddu waxay dalban kartaa in ay shirkaddu keento xog ka baxsan midda caadiga ah haddii loo baahdo in la falanqeeyo.

**7.** Asturnaanta Xogta: Marka shirkadda shaqo-siinta gaarka ah ay ururinayso ama soo gudbineyso xog, waa in la hubiyaa in xogta shakhsiyadeed ee shaqaalaha si buuxda ugu waafaqsan tahay shuruucda iyo mabaadi'da ilaalinta xogta iyo asturnaanta. Haddii ay suurtagal tahay, warbixinta waa in lagu soo bandhigaa si guud ama la qarxiyo aqoonsiyada shakhsiyeed, gaar ahaan haddii warbixinta la daabacayo. Xogta khaaska ah ee shakhsiyaadka ama loo-shaqeeyaha waa in si adag

loo ilaaliyaa. Gudbinta xogta shakhsiyadeed ee loo gudbinayo cid kale waa in lagu sameeyaa si ammaan ah. Shirkaddu waxay sidoo kale mas'uul ka tahay in si qarsoodi ah u isticmaasho xogta warbixinaha, iyadoo keliya ugu adeegsanaysa ujeeddooyin sharci ah.

**8.** Nuxurka Warbixinta: Wasaaraddu waxay siinaysaa shirkadaha foom cayiman, mideysan oo warbixinta lagu soo gudbiyo. Guud ahaan, warbixinta waqti ka waqti ah waa inay ka kooban yihiin xogtan hoos ku xusan:

a. Xogta Wakaaladda:
   i. Magaca shirkadda
   ii. Lambarka shatiga
   iii. Xogta xiriirka
   iv. Qaab-dhismeedka shirkadda
   v. Shaqaalaha muhiimka ah
   vi. Isbeddel kasta oo ku dhacay qodobadan muddada warbixinta
   vii. Caddeynta ansaxnimada iyo faahfaahinta shatiga

b. Shaqooyinka La Xayeysiiyey:
   i. Tirada xayeysiinta ama ogaysiisyada shaqo ee shirkaddu bixisay
   ii. Kala saarid ku saleysan qeybaha shaqada
   iii. Kala saarid haddii shaqadu tahay gudaha dalka ama dibadda

c. Codsiyada La Helay: Tirada guud ee codsiyada shaqo ee shirkaddu heshay muddadaas, oo loo kala saaro iyadoo lagu saleynayo:
   i. Meesha laga yimid (gobol ka mid ah Soomaaliya ama dibadda)
   ii. Jinsiyadda
   iii. Jinsiga (lab/dheddig)
   iv. da'da
   v. Heerka waxbarasho iyo xirfadeed
   vi. Tani waxay bixisaa muuqaal guud oo ku saabsan dadka raadinaya shaqada iyadoo loo marayo shikad shaqo-siin gaar ah.

d. Tirada Shaqaalaha La Shaqaaleysiiyey: Tirada guud ee dadka lagu guuleystay in shaqo loo helo iyadoo la adeegsaday sihrkadda muddada warbixinta. Tani waa in si gaar ah loogu kala saaraa:
   i. Astaamaha shaqaalaha: jinsiga, da'da, heerka waxbarasho, heerka xirfadeed
   ii. Nooca meeleynta: tirada shaqaalaha Soomaaliyeed ee lagu meeleeyey gudaha Soomaaliya, iyo kuwa dibadda loo diray iii. Wadamada loo diray: wadamada ay shaqaaluhu u dhoofeen iyo tiradooda mid kasta
   iv. Qeybta shaqada: warshadaha/shaqooyinka (sida shaqooyinka guryaha, dhismaha, caafimaadka, hoteelada, amniga, iwm)
   v. Muddada qandaraaska: haddii shaqadu tahay muddo gaaban ka yar 1 sano, dhexdhexaad (1-2 sano), ama mid joogto ah

e. Dulmar Shuruudaha iyo Xaaladaha Heshiiska: Caddeyn ama dulmar muujinaya in dhammaan shaqaalaha la meeleeyey ay heleen heshiisyo buuxinaya shuruudaha loo baahan yahay. Shirkaddu waxay soo bandhigi kartaa tusaalooyin aan magacyo lahayn oo heshiiyo caadi ah, ama tilmaami kara kiisaska mushahar aad u sarreeya ama aad u hooseeya. Waxaa sidoo kale lagu xusaa haddii shaqaalahaas la siiyey caymis bulsho, badbaado shaqo.

f. Dhacdooyinka iyo Cabashooyinka:
   Macluumaad ku saabsan:
   i. Cabashooyinka shirkaddu ka heshay shaqaale ama loo-shaqeeye

ii. Khilaafaadyo ama dhibaatooyin muhiim ah oo soo baxay iyo sida loo xalliyey
iii. Shilalka ama dhacdooyinka goobaha shaqada ee la xiriira shaqaale shirkaddu dirtay

g. Iskaashiga: Macluumaad la xiriira:
   i. Wada-shaqeynta shirkaddu la samaysay adeegyada shaqo ee dawladda
   ii. La hawl-galeyaasha tababbarka
   iii. Ka-qeyb-galka bandhigyada shaqo
   iv. Tababrida musharaxiinta xirfado gaar ah

h. Xog Kale oo Muhiim ah: Wixii xog ah ee Wasaaraddu ku amarto in la keeno Ama ay u aragto mid muhiim ah sida:
   i. Isbeddelada suuqa shaqada
   ii. Caqabadaha
   iii. Talooyin ku saabsan hagaajinta xeer-nidaamiyahan

**9.** Codsiyo Xog Dheeraad ah: Wasaaradda waxay dalban kartaa in ay shirkaddu keento xog ka baxsan midda caadiga ah haddii loo baahdo in la falanqeeyo:
   i. Baahida suuqa shaqada;
   ii. Isbeddelada socdaalka shaqaalaha;
   iii. Arrimaha waafaqsanaanta sharciga sida, xog ku saabsan mushaarka shaqaaleysiinta ee laga qaatay loo-shaqeeyaha ama xaalado gaar ah oo meeleyn shaqaale; iyo
   iv. Shirkadda waa in ay u hoggaansantaa amarada haddii ay yihiin kuwo macquul ah oo sharci ah. Ujeeddada xogtan dheeraadka ah ayaa la sharxayaa marka loo baahdo.

**10.** Isticmaalka Xogta ee Shirkadda:
   a. Marka Wasaaradda ay hesho warbixinaha shirkadaha, waxay sameynaysaa: i. Ururin;
      ii. Falanqeyn;
      iii. Isticmaalka xogta si ay Go'aanno siyaasadeed u qaadato; iyo iv. U la socoto nidaamka socdaalka shaqaalaha
   b. Waxaa laga sameynayaa tirokoobyo guud sida:
      i. Tirada shaqaalaha Soomaaliyeed ee dibadda loo diray sannadkiiba;
      ii. Wadamada ugu badan ee loo dhoofiyey; iyo
   c. Xogta muhiimka ah waxaa lagu qorayaa Mareegta Danabeysan (database) iyadoo si buuxda loo ilaalinayo amaankeeda.

**11.** Daabacaadda Isbeddellada: In kasta oo xogta shirkadaha gaar ah ay yihiin kuwa qarsoodi ah, waxaa la dhiirri-gelinayaa in wasaaradda daabacdo:
   i. Xog guud;
   ii. Isbeddelo lagu helay warbixinnada;
   iii. Si loo helo, loona kordhiyo daah-furnaanta; iyo iv. Loona wacyi-geliniyo bulshada.

Tusaale:
   i. In la faafiyo inta shirkadood oo firfircoon

ii. Tirada guud ee shaqaalaha dibadda loo dhoofiyey iii. Guud ahaan natiijooyinka la gaaray.

## Qodobka 17aad Hawlaha ay qabtaan Shirkadaha Shaqo-siinta Gaarka ah

1. Shirkad kasta oo haysta shati shaqo-siin si waafaqsan xeer-nidaamiyahan, waana in ay u hoggaansantaa marka ay fulinayso inta lagu guda jiro hawlaha ganacsigeeda isla markaana si joogto ah arrimahan:
   a. U-hoggaansanaanta Xeer-nidaamiyaha: Shirkadaha waa in ay si buuxda u ballanqaadaan kuna dhaqanto dhammaan xeer-nidaamiyahan iyo xeerarka kale ee khuseeya shaqada, gaar ahaan Xeerka Shaqada Somalia, iyo dhammaan tilmaamaha ama siyaasadaha ay soo saarto Wasaaradda Shaqada. Sidoo kale, waa in la ixtiraamaan heerarka caalamiga ah ee shaqada iyo heshiisyada labo-geesoodka ah ee la xiriira socdaalka shaqaalaha oo ay Soomaaliya saxiixday.
   b. Xilka ka saaran Shirkadaha iyo Shaqaalaha: Shirkadaha waxaa si buuxda xil uga saaran yahay dhammaan ficillada mas'uuliyiinteeda, shaqaalaheeda, wakiilladeeda ama cid kasta oo ku matasha shirkadda marka ay fulinayaan hawlaha la xiriira qorista iyo meeleynta shaqaalaha. Shirkaduhu iskama fogeyn karaan mas'uuliyadda khaladaadka ay galaan ama ficilka kasta uu shaqaale ama qandaraashoosaadle sameeyey. Waa in shaqaalaha oo dhan la siiyo tababbar habboon lana kormeeraa, si loo hubiyo uhoggaansanaanta xeer-nidaamiyahan, waana lagula xisaabtamayaa ficilladooda.
   c. Ka-warbixinta Xad-gudubyada:
      i. Wasaaradda waa in si degdeg ah loogu wargaliyaa ku xad-gudub, ficil ama macluumaad kasta oo liddi ku ah Xeerka Shaqada, Xeer-nidaamiyahan iyo sharuucda kale ee khuseysa shaqada.
      ii. Haddii shirkaddu ogaato hawlo sharci-darro ah oo la xiriira shaqaaleysiin, shabakado tahriibin ah, ama khiyaamooyin uu sameeyo qof ama shirkad kale, waa in si rasmi ah loola socodsiiyo wasaaradda si looga qaado tallaabada sharciga ah ee ku habboon.
   d. Fududeynta Baarista: Shirkadda kasta waxaa waajib ku ah in aysan carqaladeyn baarista ama fatashaad ay sameyso wasaardda ama wakiilladeeda sharciyeysan. Baarista waxaa ka mid in loo oggolaado gelista xarumaha, baarista diiwaannada la xiriira shaqaalaha. Shaqaalaha shirkadda waa in si cad loogu wargeliyaa in ay la shaqeeyaan baareyaasha, waxaa reeban wax isdabamarin, wax qarin ama bixinta xog been ah.
   e. Warbixin Xilliyeed: Shirkaduhu waa in si xilliyeysan wasaaradda ugu soo gudbiyaan warbixin iyo macluumadka tirakoobyada hadba sida loogu baahdo oo waafaqsan xeernidaamiyahan, iyo xog kasta oo dheeri ah oo muhiim u ah suuqyada shaqada ama baaritaanno gaar ah. Warbixinnadaas waa in ay noqdaan kuwo sax ah, dhammeystiran oo waqtigooda lagu soo gudbiyo.
   f. Shati aan Dhacsanayn: Shirkaddu waa in ay ka shaqeysaa oo keliya hawlaha shaqaaleysiinta iyo meeleynta shaqaalaha inta ay haysato shati ansax ah oo ku eg xudduuda hawlaheeda. Shirkaddu kama shaqeyn karto hawl ka baxsan kuwa lagu xusay rukhsaddeeda. Ma shaqaaleysiin karto shaqaale dibadda ah haddii shatigu yahay mid gudaha uun ku eg. Laguma hawl-gelin karo shati dhacsan, hakad ku jirta, ama shaqo ka baxsan baaxadda shatigeeda, taasoo ka hor imaanaysa waajibaadkeeda shaqo.

g. Xulasho Cadaalad ah: Shirkaddu waa in ay adeegsato oo kor u qaaddo nidaam hufan, cadaalad ah oo daah furan marka ay qoraneyso shaqaale. Tani waxay ka dhigan tahay in shaqaaleysiintu ku saleysnaato karti iyo hufnaan, lagana fogaado musuqmaasuq, eex ama takoorid. Waa in shirkaddu leedahay shuruudo qeexan oo lagu qiimeeyo musharrixiinta, laguna caddeeyo hab-raaca xulashada si loo sugo islaxisaabtan iyo cadaalad.

h. Lacago aan Sharciyeysnayn: Shirkaddu ma qaadi karto wax kharash ama lacag ah oo ka baxsan kuwa si sharci ah loogu oggolaaday in laga qaado shaqo-doonka. Mas'uuliyaddaas waxay adkeynaysaa in shirkaddu aysan ku khasbi doonin shaqodoonka in ay bixiyaan lacago aan sharci ahayn, iibsadaan adeegyo ama dokumentiyo tababbar ilaa ay ka helaan oggolaansho rasmi ah oo sharci ah.

h. Ka-qaadista Shaqo-doonka Lacag Sharci-darro ah: Shirkadaha waxaa ka reebban in ay qaadaan wax kharash ah ama khidmad adeeg bixin ah oo aan xeerka lagu qeexin ama aysan Wasaaradda oggolaan. guud ahaan, ma bannaana in shaqaale laga qaado lacag shoqo qoris. Shirkaduhu waa in ay ka fogaadaan in ay ku qasabto shaqo-doonku bixinta khidmad toos ah ama qarsoon iyo in lagu khasbo in ay iibsadaan adeegyo iyo tababbaro khasab ah iyadoo shuruud looga dhigayo meeleyn, haddii aan si cad loogu qeexin lacagahaas sharciga.

i. Ilaalinta Xogta Shakhsi: Shirkaduhu waxay xogta shakhsiga u ururin karaan, keydinna karaan oo keliya marka ay lagama-maarmaanka u tahay qiimeynta ku habboonaanta shaqo-doonka, kana saarto diiwaankeeda marka aysan jirin baahi sharci ah oo sii haynteeda kallifaysa, ama shaqo-doonku uu dalbado in laga tirtiro. Shirkaddu waa in ay macluumaadka shaqaalaha iyo shaqo-doonka u la dhaqanta si sir ah loona adeegsado ujeeddooyin sharciga ah ee la xiriira shaqaaleysiinta. Xogta waa in loo keydiyaa si hubanti ah, iyadoo aan lala wadaagayn cid aysan khuseyn, sida haddii uu oggolaado shaqo-doonka in taariikh nololeedka loo gudbiyo shirkadaha laga filayo adeeg shaqo bixin.

j. Hanuuninta Shaqaalaha Baxitaanka ka hor: Shirkad kasta waa in ay bixisaa ama fududeyso tababbar ku habboon ka hor inta aan shaqaalaha billaabin shaqadooda, gaar ahaan inta aan loo dhoofin dibadda. Shirkad kasta waa in ay hubisaa shaqaalaha la qoray ay si buuxda u fahamsiisaa nooca shaqada, nuxurka heshiiska, xuquuqdooda iyo waajibaadkooda, dhaqanka, shuruucda, iyo macluumaadka kasta oo muhiim u ah badbaadadooda iyo la qabsigooda shaqada cusub. Haddii wasaaraddu ay amarto ama waddanka loo socdo dalbado in barnaamijyo wacyi-gelinin ah la siiyo dhammaan shaqo-doonka, waana in la xaqiijiyaa in shaqaaluhu si dhammeystiran u qaateen tababbaradaas.

k. Adeegsiga Heshiis Cayiman: Shirkad kasta waa in ay adeegsataa oo keliya nooca heshiis shaqo oo ay oggolaato Wasaaradda Shaqada, gaar ahaan marka ay timaado shaqo-siinta dibadda. Shirkaddu ma sameyn karto heshiis ka duwan foomka cayiman ee Wasaaraddu ansixisay. Sido kale, kuma khasbi karto shaqaale in uu saxiixo heshiis ka baxsan mid ka la ansixiyey, iyadoo la hubinayo in ay isku mid yihiin dhammaan heshiisyada shaqada si loo ilaaliyo xuquuqda shaqaalaha.

l. Dabagalka Meeleynta Shaqaalaha ka dib: Shirkad kasta waa in ay dadaal u gasho dabagalka xaaladda shaqaalihii la meeleeyey, gaar ahaan marka ay shaqada billaabaan, waana in la hubiyaa in loo-shaqeeyuhu u hoggaansamay heshiiska iyo in shaqaaluhu aysan la kulmin xad-gudub ama xaalado aan la aqbali karin. Haddii ay dhibaato dhacdo,

shirkaduhu waa in ay gacan ka geysataan xallinta khilaafka ama ay si degdeg ah ugu wargeliyaan Wasaaradda Shaqada si tallaabada ku habboon loo qaado.

m. Caawinta Shaqaalaha: Haddii shaqaale la kulmo dhibaatooyin sida mushaar-la'aan, jebinta heshiiska, ama dhibaatooyin kale, Shirkad kasta waa in ay siiso shaqaalaha talo, dhexdhexaadin, ama u gudbinta u qeybasanaha arrimaha shaqaalaha ee jooga Safaaradda dalkaas si shaqaaluhu u helo xuquuqdiisa. Shirkaddu waa in ay isla markiiba ku wargelisaa Wasaaradda haddii ay jiraan xad-gudubyo culus sida tacaddiyo, ka faa'iidaysi, ama tahriibinta dadka ama geeri ku timaada shaqaalaha.

n. Dhab ahaanshaha Dokumentiyada: Shirkad kasta waa in aysan waligeed bixin macluumaad ama dokumenti been-abuur ah si ay uga hesho Wasaaradda shati ama oggolaansho kale. Dhammaan Dukuminitiyada, warbixinnada, codsiyada, ama xiriirada kale ee lala yeesho Wasaaradda waa in ay noqdaan kuwo run ah, sax ah oo ay shirkaddu hubisay inta aysan soo gudbin.

o. Xayeysiin Sax ah: Shirkaddu waa in ay ka fogaataa daabacaadda xayeysiisyo been ah ama marin habaabin ah oo ku saabsan fursado shaqo-siin. Xogta shaqada la bixinayo iyo faafinteedaba waa in ay ahaadaan shaqooyin jira oo dhab ah. Ma bannaana xayeysiinta shaqooyin aan jirin ama khaldan.

p. Takoor-la'aan: Shirkaddu waa in ay si siman ula dhaqantaa dhammaan shaqo-doonka iyadoo aan loo eegin jinsiyad, qabiil, midab, jinsi, diin, da', naafonimo, ama sifo kale oo sharcigu diiday. Sidoo kale, Shirkaddu ma taageeri karto loo-shaqeeye doonaya in uu sameeyo takoorka haddii aysan jirin sabab kale oo sharci ah.

q. Meeleynta Shaqaalaha: Shirkaddu waa in ay ka fogaataa meeleynta shaqaalaha shaqooyin ay ka jiraan wax aan la aqbali karin, xad-gudub, takoorka, ama ku xadgudbidda xuquuqda aadamaha kana hor imaanaya xeer-nidaamiyahan iyo Xeerka Shaqada Sooomaliya. Shirkad kasta waa in ay sameysaa baaritaan horadhac taxaddar leh oo ku saabsan dhinaca loo-shaqeeyaha iyo xaaladaha shaqo, si looga hortago in shaqaalaha loo diro shaqooyin halis ku ah xuquuqdooda ama caafimaadkooda, gaar ahaan kuwa la xiriira, sida Shaqo khasab ah, Shaqo aad khatar u ah oo aan la hayn agab iyo badbaado ku filan, ama, Shaqo lid ku ah caafimaadka, bed-qabka guud ama anshaxa bulshada. Haddii deegaanka shaqada la og yahay in uu leeyahay halis muuqata oo la taaban karo, shirkaddu waa in ay hubisaa in shaqaalaha si buuxda loogu wargeliyo halistaas, isla markaana la xaqiijiyo in tallaabooyin badbaado oo ku filan in la qaado si loo yareeyo ama looga hortago waxyeello imaan karta. Shirkadda waxaa mas'uuliyadi ka saaran tahay ilaalinta xeerarka shaqaalaha si waafaqsan xeerka shaqada ee dalka, qawaaniinta caalamiga ah ee ilaalinta xuquuqda shaqaalaha iyo heshiisyada caalamiga ah ee ay saxiixday Soomaaliya.

r. Mamnuucidda Shaqo-qoris Sharci-darro ah: Shirkaddu ma sameyn karto hawlo shaqo-qoris oo sharci-darro ah, oo ay ku jiraan tahriibinta dadka, shaqo khasab ah, shaqaaleynta carruurta, ama shaqo-siin suuqa madow ee shaqaalaha doolka ah. Shirkaddu waa in ay ka feejignaato hawlaha la xiriira musuqmaasuqa ama lacag dhaqidda, waana in ay iska

ilaalisaa danaha isdiidan, gaar ahaan marka shaqaalaheeda ay xiriir dhaqaale la leeyihiin loo-shaqeeyaha.

s. Madax-bannaanida Loo-shaqeeyaha ee Go'aanka Shaqo-qorista: Shirkaddu ma saameyn karto go'aannada loo-shaqeeyaha, mana ku khasbi karto inay shaqaaleeyaan qof gaar ah. Sidoo kale, Shirkaddu ma xannibi karto loo-shaqeeyaha in uu shaqaale si joogto ah u qorto ama u adeegsado ilo kale oo aan ahayn shirkadda. Sidoo kale, shirkadda looma oggola in ay ka hor-istaagto loo-shaqeeyaha xaqiisa ah in uu si joogto ah u shaqaaleysiiyo shaqaale markii hore si ku-meel-gaar ah loogu meeleeyey, haddii labada dhinac ay heshiis rasmi ah gaaraan. Shirkadda looma oggola in ay ku xirto looshaqeeyaha shuruudo ku khasbaya in uu sii wato adeegga, taasoo ka baxsan heshiiska. Kaalinta shirkdda waa in ay fududeyso helitaanka fursado shaqo iyo isku xirka looshaqeeyaha iyo shaqaalaha, balse awood u malaha in ay xaddido xorriyadda shaqaalaha ee raadinaya fursado shaqo kale, ama doorashada loo-shaqeeye kale shaqo bixintiisa mustaqbalka. Tallaabo kasta oo shirkaddu ku carqaladeynayso heshiis xor ah oo labada dhinac gaaraan waxay noqonaysaa ku xadgudbid sharciga iyo mabaadi'da shaqo ee hufan.

t. Xorriyadda Dhaqdhaqaaqa Shaqaalaha:

   i. Shirkaddu waa in ay ka fogaataa ku lug yeelashada qalqaalinta shaqaalaha ka tagista shaqada ay hadda ku jiraan si ay ugu wareegaan shaqo kale oo u dhaanta midda ay hadda ka shaqeeyaan. Waxaa reebban in la qalqaaliyo shaqaalaha si loogu wareejiyo loo-shaqeeyey kale, gaar ahaan haddii shaqaaluhu ku sugan yahay shaqo rasmi ah. Sameynta dhaqanka qalqaalinta waa dhaqan-xumo keeni kara anshaxmarin, haddii aanay shaqaalaha laftoodu si xor ah u raadsan fursad shaqo oo cusub, isla markaana aanay oggolaaneyn shuruudaha heshiiska ay hadda ku jiraan.
   ii. Shirkaladda waa in aysan xaddidin xorriyadda dhaqdhaqaaqa shaqaalaha ee ka tagista shaqada ay hadda ku jiraan si ay u raadsadaan fursado shaqo kale, kama dhalan karo wax ganaaax lacageed ah kamana saameyn kartohelitaanka fursado shaqo kale haddii loo soo bandhigo. Isbeddel kasta shaqo ee dhacaya waa in uu ahaadaa mid xalaal ah, waafaqsanna xeer-nidaamiyahan, isla markaana la dhowrayo xuquuqda iyo xorriyadda shaqaalaha iyo waajibaadka heshiiska ee looshaqeeyihii hore.

u. Heshiis Sharci-darro ah: Shirkaddu kuma khasbi karto shaqaale in ay saxiixaan heshiis aan waafaqsanayn Xeerka Shaqada Soomaaliya, xeer-nidaamiyahan, ama sharciyada kale ee khuseeya shaqada. Shirkaddu waa in ay si daacad ah oo hufan ugu sharaxdaa shaqaalaha dhammaan qodobbada ku xusan heshiiska shaqada, iyadoo aan marnaba laga faa'iidaysan karin faham-la'aanta ama aqoon-darrida shaqaalaha. Heshiis kasta oo jebinaya xeerarka shaqada ee dalka, gaar ahaan kuwa meesha ka saaraya xuquuqaha

asaasiga ah ee shaqaalaha ama hoos u dhigaya heerarka ugu yar ee uu xeerku dhigayowaa mamnuuc, waana lagama-maarmaan in shirkaddu aysan qeyb ka noqon wax heshiisyo ah oo sharci-darro ah.

v. Iskaashiga Horumarinta Qeybta Shaqo-siinta Dibadda:
   i. Shirkadaha shaqo-siinta, loo-shaqeeyaha, ururrada shaqaalaha iyo hay'adaha dawladda ee ku hawlan shaqo-siinta waa in ay iska kaashadaan horumarinta shaqo-siinta gudaha iyo dibadda si kor loogu qaado dhaqanka wanaagsan ee ku salaysan shaqaaleysiin ku dhisan karti, daah-furnaan iyo cadaalad.
   ii. Iskaashigani wuxuu ka mid yahay ka-qeyb-galka hindiseyaal wadajir ah, uhoggaansanaanta xeerarka anshaxa shaqada ee lagu heshiiyey kana dhexjira qeybaha shaqo-qorista, iyo kor-u-qaadista heerarka xirfadeed ee dalka. Shirkadda waxaa si gaar ah loogu dhiirri-gelinayaa in ay xog iyo aragtiyo la wadaagaan Wasaaradda si loo horumariyo xaaladda suuqa shaqada.
   iii. Shirkadaha waa in ay si dhow ula shaqeeyaan Wasaaradda si loo xaqiijiyo isdhexgal dhammeystiran, halkii laga abuuri lahaa isbarbaryaac iyo tartan aan loo baahnayn. Haddii ay munaasab tahay, shirkaduhu waa in ay shaqoooyinka ku xayeysiinyaan Xogkeydiyaha danabaysan ee Wasaaradda, midka ay iyagu leehiyiin iyo kuwa kale ee caanka ah, waana muhiim ah in ay adeegsadaan baraha bulshada, iyadoo la hubinayo in dhammaan dhinacyadu ay u marayaan hannaan qoritaan oo ilaaliya xuquuqda iyo badbaadada shaqaalaha.

w. Marka shirkadda lagu soo wargeliyo in loo-shaqeeye uu ku kacay xad-gudub, sida tacaddiyo ka dhan ah shaqaalaha Soomaaliyeed ee dibadda ku sugan, Shirkaddu waxaa waajib ku ah in ay gacan ka geysato xallinta dhibaatadaas oo ay raacdo habab lagu heli karo magdhaw ama garsoor cadaalad ah iyadoo la kaashaneysa Wasaaradda Shaqada, halkii ay iska indhatiri lahayd ama ay qarin lahayd arrintaas.

## Qodobka 18aad Mabaadi'da Hagta Anshaxa Shaqada

Shirkadaha inta ay ku gudaha jiraan hawlaha shaqo-qorista iyo meeleynta shaqaalaha waa in ay ku dhaqmaan mabaadi'da guud ee anshaxa shaqada iyo hannaanka shaqo sharfan, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

1. U-sinnaanta Fursadaha Shaqo: Shirkaduhu waa in ay dhiirri-geliyaan kuna dhaqmaan mabda'a u sinnaanta fursadaha shaqo, si dhammaan shaqo-doonka loo siiyo fursado siman oo aan lagu kala takoorin. Taas macnaheedo waa in la xaqiijiyaa in qof kasta helayo shaqo ku habboon xirfadiisa iyo hamigiisa iyadoo aan loo eegin asalkiisa ama duruufihiisa, si waafaqsan shuruucda qaranka ee sinnaanta fursadaha shaqo.
2. Takoor-la'aanta Xagga Shaqo-siinta: Dhammaan shaqo-doonka iyo shaqaalaha waa in loola dhaqmaa si cadaalad ah, iyadoo la baabi'inayo dhammaan noocyada takoorka xagga shaqada iyo xirfadaha. Shirkaduhu waa in ay ka fogaadaan ayna muujiyaan si looga hortago eexda ku saleysan qabiil, jinsi, diinta, da'da, naafonimada, ama wax kasta oo kale oo uu mamnuucayo Xeerka Shaqada Soomaaliya ama xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha. Shirkaduhu waa in ay ka codsadaan loo-shaqeeye kasta in aysan ku dhaqmin ficil takooreed, isla markaana diidaan codsiyada si cad u takooraya shaqo-doon gaar ah, sida shaqaale ka soo jeeda qabiil gaar ah.

3. Taageeridda Shaqaalaha Nugul: Shirkaddu waa in ay si gaar ah u tixgeliyaan shaqaalaha nugul ama la hayb-sooco, iyagoo u sameynaya adeegyo gaar ah ama barnaamijyo taageeraya, waxaana ka mid noqon kara, dhiirri-gelinta haweenka, dhallinyarada, dadka gudaha ku barakacay, dadka naafada ah, ama dadka ka soo jeeda deegaannada aan horumarsanayn. Taageeradu waxay noqon kartaa tababarro xirfadeed, diyaarin Taariikh-nololeed (CV), ama caawinta diyaarinta wareysiyada shaqo. Shirkaduhu waa in ay kaalin mug leh ka qaadataan hirgelinta siyaasadaha suuqa shaqada, gaar ahaan barnaamujyada ay dawladdu wado si loo helo sinnaan shaqo oo cadaalad ah.
4. Asturnaanta Xogta iyo Keydinteeda: Shirkaddu waa in ay hannaan sugan u maamushaa xogta shakhsiga shaqo-doonka ah iyadoo ilaalinayo asturnaanteeda iyo karaamadooda. Ururinta xogtu waa in ay si toos ah ugu koobnaataa wixii la xiriira qiimeynta kartida iyo waayo-aragnimada xirfadeed ee shaqo-doonka. Ma aha in la weydiiyo ama la isticmaalo macluumaad aan khuseyn shaqada sida qabiilka, diinta, ama xaaladda qoyska. Haddii xogta lagu keydiyo hannaan danabeysan, shirkaddu waa in ay qaaddo tallaabooyin sugan oo amni si looga hortago in xogtaasi baxdo ama ay helaan dad aan loogu talo-gelin.
5. Ilaalinta Shaqaalaha Doolka ah:
   Shirkaddu waa in ay qaaddo dhammaan tallaabooyinka suurtagalka ah ee lagu ilaalinayo xuquuqda shaqaalaha doolka ah, si looga hortago tacaddiga iyo dhiigmiiradkood. Ilaalinta xuquuqdaas waxaa ka mid ah: wacyi-gelininta shaqaalaha si ay u fahmaan xaqooda, lana siiyo macluumaad ku saabsan cidda ay la xiriiri karaan marka ay dhibaato kala kulmaan dibadda sida telefoonada Wasaaradda, Safaaradda iyo looshaqeeyaha.
   Haddii shirkaddu ogaato in shirkad kale ama dallaal ku hawlan khiyaano, xad-gudub, ama tacaddi ku wajahan shaqaalaha, waa in ay si degdeg ah loogu soo wargeliyaa Wasaaradda si tallaabo sharci ah looga qaado. In si wadajir ah lagu wajaho shirkadaha si xun u la dhaqma shaqaalaha, waxay sare u qaadaysaa sumcadda iyo heerka adeeg ee la bixiyo guud ahaan.
6. Ixtiraamka Heshiisyada Labo-geesoodka ah: Wasaaraddu waa in ay ku ixtiraamtaa si waafaqsan dhammaan heshiisyada shaqo ee labo-geesoodka ah ama Is-afgaradyada (MoUs) ay Dawladda Federaalka Soomaaliyeed la gashay dawlado kale. Heshiisyadani waxay tilmaamayaan shuruudo gaar ah sida hab-raacyada qorista shaqada, shuruudaha ugu yar ee shaqada, hababka xallinta khilaafaadka. Markay shirkaddu qoranayso shaqaale loogu talo-galay waddan heshiis lala galay, waa in si buuxda loo raaco tilmaamaha ku cad heshiiskaas si looga hortago khiyaano iyo tacaddi.
7. Xorriyadda Kullamada iyo Xuquuqda Shaqaalaha: Marka shirkaddu shaqo siiso shaqaale waa in heshiisyadooda shaqo lagu caddeeyaa xuquuqda asaasiga ah. Waa in shaqaalaha la meeleeyey ay helaan:
   Xorriyadda isu-tagidda iyo wada-xaajoodka gorgortan guud, haddii ay khuseyso;
   Mushaarka ugu yar ama midka qeybtaas laga qaato;
   Xuquuqda saacadaha shaqada ee caadiga ah iyo waqti dheeraadka ah;
   Caafimaadka iyo bed-qabka goobaha shaqada;
   Xuquuqda caymiska bulshada sida uu qabo xeerka; iyo
   Caymis shilalka iyo cudurada mihnadaha ee la xiriira goobaha shaqada.
   Shaqaalaha doolka ah waa in aysan helin xuquuq ka hooseysa tan ay helaan shaqaalaha gudaha. Heshiisyada shaqadu waa in ay daboolaan fasaxa dhalmada, dheefaha shaqada,

ilaalinta shaqaalaha haddii loo-shaqeeyuhu musallafo. Dhammaan arrimahan waa in lagu saleeyaa waajibaadka Soomaaliya ka saaran fulinta heshiisyada caalamiga ah ee shaqaalaha iyo sharciyada waddanka shaqaalaha loo diray.

**8.** Ka-hortagga Tacaddiyada Ku Saleysan Jinsiga (lab iyo dheddig): Shirkaddu waa in ay qaado tallaabooyin ku habboon oo looga hortago tacaddiyada jinsiga ku saleysan ee loo geysto xilliyada shaqo-qorista ama goobaha shaqada, waxaana ka mid ah: In la dejiyo siyaasad cad oo mamnuucaysa in shaqo-siinta lagu beddesho xiriir galmo; In shaqaalaha la siiyo tababbar ku saabsan sida loo aqoonsado loona xalliyo tacaddiga ama faro-xumeynta;

In la baaro lana qiimeeyo loo-shaqeeyeyaasha, gaar ahaan kuwa shaqaalaha u qaata shaqooyin guryaha si looga fogaado sooyaalka tacadiya; iyo

Haddii shaqaale dacwad tacaddi soo gudbiyo, shirkaddu waa in ay si qarsoodi ah taxadar leh oo cadaalad ah u maareyso arrintaas iyadoo loo marayo hannaanka cabashada gudaha ee loo-shaqeeyaha, isla markaasna loo fududeeyo helidda kaalmo sharci ah, gargaar ka helaan hay'adaha kale qaabilsan arrimahaas ama in la wargeliyo safaaradda ama u qeybsane shaqaale haddii ay ku habboon tahay.

**9.** Isticmaalka Shatiga: Keliya shirkadaha si rasmi ah loo siiyey shati si waafaqsan xeernidaamiyahan ayaa xaq u leh in ay sheegtaan "Shirkad Shaqo-siin Gaar ah" ee ka hawlgala gudaha dalka. Shirkadaha haysta rukhsadda oo keliya ayaa sheegan kara in ay yihiin kuwa xaqa u leh isticmaalka shatiga. Ciddii aan rukhsad haysan looma oggola in ay si been ah u sheegato in ay tahay shirkad shati leh. Mabda'an wuxuu ka caawinayaa bulshada in ay kala garataan shirkadaha saxda ah iyo kuwa aan sharciyeysnayn. Wasaaraddu waxay ka qaadaysaa tallaabo sharci ah ciddii isticmaalaysa shati been-abuur ah.

**10.** Reebbanaan Dallaal iyo Malaal:

Shirkaduhu waa in aysan adeegsan dallaaliin, malaal (wakiil hoose), ama dhexdhexaadiyeyaal aan rukhsad haysan si ay ugu shaqeeyaan hawlaha shaqo-qorista.

Adeegsiga mukhalas way reebban tahay, waxayna horseedi kartaa xad-gudub iyo islaxisaabtan-la'aan. Dhammaan hawlaha shaqo-qorista waa in qabtaan shaqaalaha shirkadda ee carbisan ama wakiillo rasmi ah oo shirkaddu si toos ah u maamusho. Haddii shirkaddu rabto in ay ka shaqeyso gobollo kale, waa in ay furtaa farac ama qorataa shaqaale ka shaqeeya goobtaas, halkii ay adeegsan lahayd dallaaliin ka madaxbannaan.

Adeegsi kasta wakiillo aan la diiwaan-gelin, waxaa loo qaadanayaa ku xad-gudub culus ee xeer-nidaamiyahan. Si kastaba ha ahaatee, shirkaddu way shaqaaleysiin kartaa ama heshiis kula geli kartaa shakhsiyaad aqoon u leh oo la mid ah shaqaalaheeda rasmiga ah si ay adeegyadaas u gaarsiiyaan gobollada. Muhimaddu waxay tahay in shakhsiyaadkaas ay shirkaddu si buuxda mas'uul uga tahay ficilladooda iyo korjoogtayntooda.

**11.** Wada-shaqeynta Hay'adaha Dawliga ah: Shirkadaha waxaa lagu dhiirri-gelinayaa in ay wada-shaqeyn la yeeshaan si ay u kaabaan adeegyada shaqo-qorista ee hay'adaha dawladda, halkii ay u arki lahaayeen in ay caqabad ku yihiin. Wada-shaqeyntan waxaa ka mid noqon kara: Wadaagista macluumaadka ku saabsan shaqooyinka bannaan ee aan laga heli karin gudaha dalka, Wada-shaqeyn ku saabsan gudbinta shaqo-doonka, ama ka-qeyb-galka madasha lagu horumarinayo habsami u shaqeynta suuqyada shaqada. Kaalinta ay shirkaduhu leeyihiin waxaa loo aqoonsanayaa in ay muhiim tahay, hase yeeshee, waa in ay si mug leh ula shaqeeyaan barnaamijyada shaqo abuurka dawladda, loona xaqiijiyo helitaanka fursado shaqo oo baaxad leh lana ilaaliyo heerarka shaqada.

**12.** Dhaqan-gelinta Mabaadi'da: Haddii shirkad shaqo-siin lagu helo in ay jebisay mid ka mid ah mabaadi'da asaasiga ah ee lagu xusay qodobbada xeer-nidaamiyahan, Wasaaradda waxay u diraysaa shirkaddaas ogeysiis qoraal ah oo lagu amrayo in ay saxdo xeer jebintaas muddo cayiman oo maangal ah. Ogeysiiskaasi wuxuu si cad u tilmaamayaa nooca xad-gudubka la sameeyey, iyo tallaabada saxidda ee laga rabo shirkaddu in ay qaaddo. Haddii Shirkaddu ku guuldareysato in ay u hoggaansanto amarka ogeysiiska isla markaana aysan wax ka beddelin khaladkaas muddadii la siiyey, Wasaaraddu waxay qaadaysaa tallaabo sharci ah oo waafaqsan meel-marinta xeernidaamiyahan. Tallaabooyinkaas waxaa ka mid noqon kara, hakin ama kala-noqosho shati, amaganaaxyo kale oo lagu tilmaamay xeer-nidaamiyahan ama Xeerka Shaqada Soomaaliya si loo xalliyo xeer-jebinta loona ilaaliyo hufnaanta xayndaabka xeerarka khuseeya shaqada.

# QEYBTA 3AAD
# FULINTA IYO CIQAABAHA

## Qodobka 19aad Baaris iyo U-hoggaansanaan

**1.** Awoodda Gelitaanka iyo Baarista: Saraakiisha idman ee Wasaaradda oo ay ku jiraan baareyaasha shaqada ama mas'uuliyiin kale oo ay si rasmi ah u magacowday Wasaaraddu oo keliya ayaa awood sharci ah u leh in ay geli karaan, baari karaan waqti kasta oo macquul ah xarumaha ama xafiisyada shirkad kasta oo shaqo-qoris ku hawlan, ha ahaato mid shati haysata ama mid lagu tuhunsan yahay in ay sifo sharci-darro ahku shaqeynayso. Saraakiisha idmani waxay baarayaan, kormeerayaan, hubinayaan uhoggaansanaanta xeer-nidaamiyahan iyo sharuucda kale ee khuseeya shaqada. Saraakiishu waxay xaq u leeyihiin in ay sameeyaan kormeer iyo baaris rasmi ah goobaha shaqada ogeysiis iyo ogeyssis-la'aan xilliyada caadiga ah ee shaqada, marka laga reebo goobo degaan gaar ah oo u baahan oggolaansho ama amar-bixin maxkamadeed.

**2.** Baaxadda Baarista: Inta lagu guda jiro baarista, sarkaalka idman wuxuu leeyahay awoodaha soo socota:

i. In uu baaro diiwaannada iyo dokumentiyada la xiriira hawlaha shaqo-qorista iyo shaqo gaynta ee shirkadda, oo ay ka mid yihiin aanse ku koobnayn: diiwaanka shaqo-doonka, nuqullada heshiiyada shaqo, diiwaanka maaliyadeed ee muujinaya khidmadaha laga qaado loo-shaqeeyaha, nuqullada xayeysiinta, xiriirrada lala yeeshay dhiggooda dibadda, iyo warbixinta loo gudbiyo Wasaaradda;

ii. In uu codsado ama nuqullo ka sameysto dokumentiyadaas, ama xitaa si ku-meelgaar ah uga qaado xarunta shirkadda si loo sii baaro, iyadoo la siinayo shirkadda warqad caddeynaysa qaadista dokumentiyadaas;

iii. In uu baaro xarumaha shaqada ee shirkadda, si loo xaqiijiyo in ay la jaanqaadayaan heerarka shaqo ee loo baahan yahay, sida in xafiisku dhab ahaan u jiro, una shaqeeyo sidii shirkaddu sheegtay iyo in lagu dhejiyey tabbeelooyinka gudaha ogeysiisyo muujinaya xuquuqda shaqaalaha;

iv. In uu wareysto shaqaalaha shirkadda ama wakiilladeeda si uu wax uga weydiiyo habdhaqanka iyo nidaamka shaqo-qorista, loogana xaqiijiyo fahamka ay u leeyihiin xeernidaamiyahan iyo sida ay ugu hoggaansan yihiin. Baaruhu wuxuu sidoo kale

codsan karaa in la siiyo macluumaadka xiriirka shaqaalaha ama loo-shaqeeyaha adeegga ka helay shirkadda, si dib loola xiriiri karo haddii loo baahdo

v. In baaruhu uu su'aalo ka keeni karo arrin kasta oo uu u arko mid lagama-maarmaan u ah in la xaqiijiyo in shirkaddu si buuxda ugu hoggaansan tahay xeer-nidaamiyaha. Su'aalaahani waxaa ku jiri kara baarista cabashooyinka ama xogaha la helay ee la xiriira hab-dhaqanka shirkadda.

**3.** Waajibnimada la-shaqeynta Baareyaasha: Maamulka iyo shaqaalaha shirkadda waxaa laga rabaa in ay si buuxda ula shaqeeyaan baarayaasha idman. Waa in aysan hor-istaagin, daahin, ama khiyaamid baaraha inta uu ku guda jiro waajibaadkiisa shaqo. Si gaar ah, shirkaduhu waa in ay:

i. U oggolaato baaraha in uu galo dhammaan qeybaha goobaha shaqada ee shirkaddu ku shaqeyso;

ii. Si dhaqso leh u keento dhammaan diiwaannada, xisaabaadka ama dokumentiyada uu baaruhu codsado si loo baaro;

iii. Bixiso jawaabo sax ah oo degdeg ah marka su'aalo kasta oo uu baaruhu waydiiyo; iv. Baaraha siiso agabka lagama-maarmaanka u ah shaqada, sida miis, kursi, gelitaanka kumbiyuutar si uu u guto waajibaadkiisa shaqo.

v. Iskuday kasta oo lagu qarinayo ama lagu burburiyo dokumenti, lagu bixiyo macluumaad been ah, ama lagu carqaladaynayo baaritaanka, wuxuu noqonayaa ku xad-gudubka xeer-nidaamiyahan, waxaana lagu muteysanayaa ciqaabo sharciyeed oo waafaqsan Qodobka khuseeya ee xeer-nidaamiyahan iyo Xeerka Shaqada Soomaaliya.

**4.** Haynta Diiwaannada:

a. Shirkad kasta waa in ay keydisaa dhammaan diiwaannada khuseeya shaqo-qorista ugu yaraan muddo shan (5) sano ah laga billaabo maalinta la sameeyey diiwaankaas. Diiwaannada shaqo-qorista khuseeya waxaa ka mid ah:

i. Heshiiska shaqada;

ii. Rasiidka (lacag-bixinta) muujinaya khidmadaha laga qaaday loo-shaqeeyaha;

iii. Diiwaanka muujinaya tababbarka ama wacyi-gelininta shaqaalaha; iyo

iv. Diiwaannada cabashooyinka.

b. Haddii ay jiraan dacwado ama baaritaan sharciyeed oo wali socda, diiwaannada waa in la sii hayo ilaa laga gaarayo gunaanad rasmi ah, xitaa haddii ay dhaafaan shanta (5) sano. Diiwaannadaasi waa in si nidaamsan loo keydiyaa si ay u sahlanaato dib-u-eegista iyo baaritaanka.

**5.** Warbixinta Baarista: Ka dib markuu baare shaqo ama sarkaal idman dhammeeyo baaris, wuxuu diyaarinayaa warbixin rasmi ah oo si faahfaahsan u tilmaamaysa wixii uu arkay ama ogaaday. Nuqul ka mid ah qeybaha warbixinta, gaar ahaan haddii ay jiraan wax aan xeerarka waafaqsanayn, waxaa la siin karaa maamulka shirkadda si ay ula socdaan khaladaadka la helay iyo tallaabooyinka saxitaanka ee loo baahan yahay. Wasaaraddu waxay warbixintan ku keydinaysaa diiwaan si loola socdo sooyaalka taariikhda u-hoggaansanaanta shirkaddaasi.

**6.** Meel-marinta Xeer-nidaamiyahan:

a. Haddii baarista lagu ogaado jebin lagu sameeyey xeer-nidaamiyahan ama la dareemay, Wasaaraddu waxay qaadi kartaa tallaabooyin sharciyeed oo ku habboon xad-gudubka. Tallaabooyinkaas waxa ka mid noqon kara in:

i. Amar lagu farayo shirkadda in ay saxdo khaladaadka jira;

ii. Digniin rasmi ah la siiyo;

iii. Waqti cayiman la siiyo shirkadda si ay u saxdo dhaqanka guracan ee xeer jebinta;
iv. La billaabo hannaanka hakinta ama kala-laabasho shatiga shirkadda; ama
v. La gudbiyo dacwad haddii la ogaado dembiyo la galay.

b. Shirkadda waxa baarista ka dib si qoraal ah loogu wargelinayaa wax kasta oo lagu amro in ay qabato ama ciqaab kasta oo lagu soo rogo.

7. Iskaashiga Hay'adaha: Baareyaasha waxay la kaashan karaan hay'adaha kale ee dawladda sida booliska, socdaalka, ama hay'adaha ilaalinta xuquuqda daweynaha haddii baarista lagu ogaado arrimo la xiriira hawlaha ay u xilsaaran yihiin, sida dokumentiyo been-abuur ah, waxa lala xiriiri karaa booliska si dacwad sharci ah loogu soo oogo. Waxa kale oo suurta-gal ah in hay'aduhu baaritaano wadajir ah sameyn karaan si loola dagaallamo dhibaatooyin sida tahriibka dadka ama shabakadaha ka ganacsiga shaqaalaka doolka ah.
8. Qarsoodinta Xogta: Baareyaasha iyo Wasaaraddu waa in ay si taxaddar leh oo qarsoodiga ah u maareeyaan macluumaadka hawlaha shaqo-qorista ee shirkadda iyo macluumaadka shakhsiyeed ee ay helaan inta lagu jiro baarista, macluumaadka la helay waa in loo adeegsadaa oo keliya ujeedooyinka la xiriira xaqiijinta u-hoggaansanaanta iyo fulinta xeer-nidaamiyahan. Cidda macluumaadka bixisay magacyadooda waa in si buuxda loo ilaaliyaa intii suurta-gal ah si aysan u wajihin cawaaqib xumo ama aargoosi.

# QEYBTA 4AAD
# QODOBBO ISKU-DHAF AH

## Qodobka 20aad Abaal-marinno iyo Aqoonsi

1. Wasaaradda Shaqadu waxay awood u leedahay inay dhisto barnaamijyo abaal-marinno, aqoonsi ama dhiirri-gelin ah si loogu abaal-mariyo looguna dhiirri-geliyo shirkadaha shaqo-qorista gaarka ah ee muujiyey hab-dhaqan heer sare ah oo waafaqsan xeernidaamiyahan iyo anshaxa shaqo-qorista. Abaal-marinta noocan ah waxaa la bixin karaa sannadkiiba mar ama labadii sanaba mar, iyadoo loo kala saari karo qeybo ama heerar kala duwan. Ujeeddada barnaamijkan abaal-marinta ah waa in la dhiirri-geliyo tartan wanaagsan, lana abaal-mariyo shirkadaha si ay ugu dadaalaan in ay ka sara maraan kudhaqanka heerarka ugu yar ee waajibaadka sharciyeed, isla markaasna qaataan kudhaqanka ugu wanaagsan ee caalamiga ah ee ilaalinta shaqaalaha iyo hubinta in lagu meeleeyo shaqooyin tayo leh.
2. Shuruudaha abaal-marinta waa in ay noqdaan kuwo daah-furan, waxaana ka mid noqon kara:
   a. Sooyaalka u-hoggaansanaanta xeer-nidaamiyahan iyadoo aan lagu helin wax jebin xeer ah loona soo-jeedin wax saxid khaladaad yar yar;
   b. Tirada shaqaale si guul leh loogu meeleeyey shaqooyin sharfan;
   c. Hal-abuur ku saleysan shaqo-qoris cadaalad ah;

d. Wax-ku-biirin barnaamijyada tababbarka iyo kor-u-qaadista xirfadaha shaqaalaha;
e. La-shaqeynta hay'adaha dawliga ah; iyo
f. Talooyinka wanaagsan ee laga helay shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha.

3. Wasaaraddu waxay dhisi kartaa guddi qiimeyn oo ka kooban wakiillo ka socda ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyaha, iyo bulshada rayidka ah si ay u eegaan una qiimeeyaan soona magacaabaan shirkadaha u qalma abaal-marinta. Aqoonsiga la siiyo shirkadaha shaqo-qorista gaarka ah ee ku guuleysta abaal-marinta si waafaqsan xeernidaamiyahan waxaa si rasmi ah u shaacinaysa Wasaaradda Shaqada. Shirkadaha ku guuleysta abaal-marinta waxaa loo oggolaan karaa mudnaan gaar ah sida:
   a. Qabashada xaflado dadweyne oo lagu maamuusayo guushooda;
   b. In mudnaan lagu siiyo adeegsiga hab-raac, xeer-nidaamiyahan iyo xeerarka kale ee khuseeya shaqada; ama
   c. Oggolaansho lagu siiyo adeegsiga astaan gaar ah ama cinwaan sumcad leh oo ay u isticmaalaan xayeysiiskooda, iyadoo la raacayo shuruudo cayiman oo Wasaaraddu dejisay. Si kastaba ha ahaatee, lama kala siin karo shirkadaha mudnaan gaar ah oo lagu kala doorbidayo taasoo hoos u dhigaysa tartan cadaaladeed ee nidaamka korjoogtaynta ee lagu soo kala xulayo shirkadaha.
4. Abaal-marinta ama aqoonsiga la siiyo shirkad gaar ah ma noqon karaan kuwo ka dhaafaya u-hoggaansanaanta xeer-nidaamiyahan; taa beddelkeeda, waxay noqonaysaa oo keliya dhiirri-gelin dheeraad ah oo kor u qaadaysa fulinta iyo u-hoggaansanaanta xeernidaamiyahan. Wasaaraddu waxay xaqiijinaysaa in shirkadda la abaal-mariyey ay baarista sharciyeed ula siman tahay shirkadaha kale. Abaal-marinta waa lagala noqon karaa shirkadda haddii lagu helo caddeyn muujinaysa in shirkaddaasi ay ku kacday falal dhaawacaya ama burinaya sababtii lagu siiyey abaal-marinta.

## Qodobka 21aad Ka-mid-noqosho Urur iyo Sharci-ku-dhaqan

1. Ururrada Shirkadaha Shaqo-qorista: Shirkadaha waxaa lagu dhiirri-gelinayaa in ay sameystaan oo ay ka mid noqdaan urur loo-shaqeeye ama urur matala danahooda guud ee dalka Soomaaliya. Ururkan waa in uu ahaadaa mid si sharci ah loo diiwaan-geliyey kuna shaqeeya si waafaqsan xeerarka dalka ee lagu maamulo ururrada bulshada ama jaaliyadaha.

2. Ujeeddooyinka Ururrada: Ururka ay samaystaan shirkaduhu wuxuu qaban karaa hawlaha hoos ku xusan, iyadoo aan intaas lagu koobnayn:
   a. Madal Wada-tashi: Abuuurista madal wada-tashi oo ay xubnaha ururku isku weydaarsadaan fikradaha, ku wadaagaan waayo-aragnimada, kuna falanqeeyaan caqabadaha ay la kulmaan iyo xallintooda inta ay ku jiraan hawlaha shaqo-qorista iyo meeleynta.
   b. Iskuduwidda iyo Horumarinta: Fududeyn isku xirka shirkadaha si looga hortago wax isdabamarin si loo horumariyo loona hirgeliyo ku-dhaqanka xeerka anshaxa shaqada ee xubnaha ururka, waaana laga rabaa in ay ugu dhaqamaan si ka sarreysa heerka ugu hooseeya ee xeerku oggol yahay. Ururku wuxuu dejin karaa heerar anshaxeed oo lagula xisaabtamo xubnaha, wuxuuna qaadi karaa tallaabooyin anshaxeed oo ay ka mid noqon karaan dib-u-eegis ay ku sameeyaan xubno kale.

3. Ka-qeyb-galka Dejinta Siyaasadaha: Ururku wuxuu kaalin ka qaadan karaa dejinta siyaasadaha, xeerarka iyo xeer-nidaamiyeyaasha iyadoo lala tashanayo xubnaha ururka. Xubnaha ururku waxay galaangal iyo u-qareemid u sameyn karaan sidii loo horumarin lahaa xayndaabka sharciyeed, soo-jeedin karaan tallooyin wax-ku-ool ah oo lagu kor loogu qaadayo maareynta socdaalka shaqaalaha doolka ah iyo soo bandhigista wixii qacabado ah ee ka jira qeybta shaqo-qorista ee shirkadaha.
    a. Tababbarka iyo Tayeynta Xubnaha: Ururku wuxuu qabanqaabin karaa barnaamijyo tababbar, aqoon-isweydaarsi ama seminaaro loogu talo-galay xubnaha si ay ugu baraarujiyaan xeerarka cusub, heerarka caalamiga ah ee shaqo-qorista, iyo hab-raacyada wanaagsan ee laga hirgeliyo, sida tababbar ku saabsan shaqo-qoris cadaalad ku dhisan, shuruudaha cusub ee waddamada shaqaalaha loo dirayo, ama adeegsiga tiknoolajiyadda ee is-waafajinta shaqooyinka iyo shaqo-doonka.
    b. Xallinta Khilaafaadka: Ururku wuxuu sameynayaa hannaan gudaha ah oo lagu xallin karo cabashooyinka iyo khilaafaadka yaryar ee ka dhex dhaca xubnaha, shaqaale ama loo-shaqeeye oo loogu talo-galay in lagu dhameeyo is-faham iyo wada-xaajood ka hor inta aan arrinta loo gudbin wada-xaajood Wasaaradda si rasmi ah.

4. Dhiirri-gelinta U-hoggaansanaanta Sharciga:
    a. Ururku wuxuu xubinihiisa ku dhiirri-gelinayaa in ay si buuxda ugu hoggaansnaadaan dhammaan xeerarka dalka u yaal iyo hab-raaca anshaxa shaqada ee ururka iyadoo la dejinayo nidaam islaxisaabtan xubnaha dhexdooda. Ururku wuxuu dhisayaa guddi anshax oo u xilsaaran baarista eedeymaha la xiriira dhaqan-xumo ama ku xad-gudub hab-raaca anshaxa shaqada ee xubnaha, wuxuuna talo ka bixinayaa anshax-marin sida:
        i. Digniin qoraal oo rasmi ah;
        ii. Hakinta xubinnimada ururka muddo cayiman; ama iii. In xubinta loo gudbiyo Wasaaradda.
    b. In kasta oo ururku aanu beddeli karin kaalinta dawladdu ku leedahay kormeerka iyo fulinta sharciga, haddana wuxuu noqon karaa lakab isxakameyn ah oo u adeegga sidii shirkadaha xubnaha ka ah loogu wacyi-gelinin lahaa ilaalinta heerarka sharci iyo anshaxeed ee waafaqsan xeerarka dalka.

5. Xubinnimada Ururka:
    a. Dhammaan shirkadaha waxaa waajib ku ah in ay xubin ka noqdaan urur si sharci ah loo diiwaan-geliyey loona aqoonsan yahay, kaas oo matalaya shirkadaha shaqo-qorista gaarka loo leeyahay ee dalka. Ururkan waa in uu noqdo madal lagu mideeyo shirkadaha si ay u fuliyaan:
        i. Is-maamul sharciyeed oo shirkaduhu si wadajir ah isu xakameeyaan;
        ii. Tababbarka iyo tayeynta shirkadaha;
        iii. U-doodidda danaha shirkadaha; iyo
        iv. Iskuduwidda qeybaha hawlaha shaqo-qorista.
    b. Xubinnimada ururkaasi shardi lagama-maarmaan ah uma ahan in ay shirkaddu hesho shati shaqo ama ay sii-wadato hawl-galkeeda shaqo. Dawladda waxay aqoonsan tahay kaalinta xubinimada ay ururrada u leedahay:

    i. Dhiirri-gelinta hab-raaca shaqo-qorista ku dhisan dhaqan hufan oo cadaalad ah;
    ii. Ilaalinta xuquuqda shaqaalaha; iyo
    iii. Kor-u-qaadista iskaashiga ka dhexeeya shirkadaha shaqo-qorista.
  c. Dawladdu waa in aysan faragelin ujeeddooyinka iyo hawlaha sharciga ah ee ururka ee waafaqsan xeerarka dalka, haddii ay la jaanqaadayaan danta guud iyo horumarinta nidaamka shaqo-qorista.

6. Taageerada Dawladda: Wasaaradda Shaqada waa in ay fududeysaa ama taageertaa dhismaha ururro ay ku mideysan yihiin shirkadaha, haddii shirkadahaasi muujiyaan rabitaan la xiriira asaasidda ururro noocaas ah. Taageeradaasi waxay ka koobnaan kartaa:
    a. Qabashada kulammada hordhaca ah ee lagu asaasayo ururka;
    b. Siinta talo sharciyeed iyo hagitaan ku aadan qorista dastuur ama xeer-hoosaad ururka si waafaqsan xeerarka dalka;
    c. Wadaagista macluumaad la xiriira shirkadaha rukhsadda leh oo dhammaan lagu wargelinayo si loogu dhiirri-geliyo in ay ku biiraan urur; iyo
    d. Taageero kasta oo ay Wasaaraddu bixiso waa in ay ahaataa mid dhexdhexaad ah, ujeedadeeduna tahay in lagu xoojiyo awoodda shirkadaha in ay si xor ah isu abaabulaan.

7. La-tashiga Shirkadaha: Wasaaraddu waa in ay joogtaysaa xiriir wada-tashi oo furan ay la leedahay ururrada matalaya shirkadaha. Ururka waxaa lagu casuumi karaa in uu soo magacaabo wakiil ka mid noqda guddiga Kormeerka ee Wasaaradda ama fadhiyada kale ee wada-tashiga ee khuseeya arrimaha socdaalka shaqaalaha iyo adeegyada shaqo-siinta, wakiilkaas kaalintiisu tahay talo-bixin oo keliya, aanse cod lahayn. La-tashigani wuxuu xaqiijinayaa in ururrda qeybta shaqo-qorista ay aragtidoodu si buuxda loo tixgeliyey hannaanka dejinta siyaasadaha iyo hawlaha kor-joogtaynta, sidoo kalena, waxay dhiirrigelisaa iskaashi wadajir ah oo lagu xalliyo caqabadaha ka jira qeybta shaqo-qorista.

8. Ogeysiinta Ururrada: Wasaaraddu waxay ku wargelin kartaa ama fariimo muhiimka ah u marin kartaa ururka matala shirkadaha si loo gaarsiiyo fariistaas marka ay habboon tahay arrimo ku saabsan hab cusub oo foom cayiman oo warbixinta lagu soo gudbiyo ama isbeddel sharciyeed oo soo socda. Taasoo noqon karta marin waxtar u leh oo fududeynaysa gudbinta macluumaadka. Si kastaba ha ahaatee, shirkadad kasta oo shati leh waxay si gaar ah mas’uul uga tahay u-hoggaansanaanta dhammaan tilmaamaha iyo amarada la siiyo.

9. Ka-dhaafid-la’aan: Xubinimada urur iyo u-hoggaansanaanta dastuurkiisa kama dhaafayso kamana yareynayso shirkad kasta waajibaadka ka saaran ku-dhaqanka xeer-nidaamiyahan. Ururku waa in uu u shaqeeyaa sidii isagoo kaabaya balse aan beddelayn hab-raaca rasmiga ah. Wasaaraddu waxay shirkad kasta ku sameynaysaa la-xisaabtan si waafaqsan xeerarka dalka

## Qodobka 22aad Dhaqan-galka Xeer-nidaamiyahan

Xeer-nidaamiyahani wuxuu dhaqan-geliyaa marka ay meel-mariyaan Golaha Wasiirrada, Xukuumadda JFS, laguna soo saaro Dekreeto Ra'iisul Wasaare, isla markaana lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda JFS.

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.185** **Taariikh: 02 Sep, 2025**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA HABRAACA U QEYBSANAYAASHA ARRIMAHA DIFAACA.**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
07 SEP 2025
EXII
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **WG/XM/0291/08/25** ee ku taariikheysan **20/08/2025** ee Wasaaradda Gaashaandhigga kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Habraaca u Qeybsanayaasha Arrimaha Difaaca;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.25.128.08.25** ee **28/08/2025,** kuna saabsan **Ansixinta Xeer-nidaamiyaha Habraaca u Qeybsanayaasha Arrimaha Difaaca** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Xeer-nidaamiyahan u leeyahay xoojinta hannaanka isla-xisaabtanka, iyo daahfurnaanta shaqada u qaybsanayaasha arrimaha difaaca.

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.25.128.08.25** ee **28/08/2025,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Habraaca u Qeybsanayaasha Arrimaha Difaaca** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad
## Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Gaashaandhigga loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 3aad
## Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-060-2021
TAARIIKH : 29-05-2021
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Saalax Axmed Jaamac**
**Kusimaha Ra'iisul Wasaaraha, ahna Ra'iisul Wasaare kuxigeenka Xukuumadda JFS**

# JAMHUURIYADDAFEDERAALKASOOMAALIYA
# WASAARADDA GAASHAANDHIGGA

## Habraaca U Qeybsanayaasha Arrimaha Difaaca (Defense Attachés) ee Wasaaradda Gaashaandhigga

Luulyo 2025

**Hordhac**

Habraacani waxa uu dejinayaa tilmaamaha guud ee ku saabsan xilka, mas'uuliyadaha, iyo hannaanka magacaabista u qeybsanayaasha arrimaha difaaca (defense attachés) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Ujeeddadu waa in la xaqiijiyo matalaad ciidan oo xirfadeysan, waxtar leh, kana tarjumaysa danaha qaranka ee arrimaha difaaca, iyadoo lagu saleynayo **Xeer Madaxweyne LR.238** ee soo baxay **1da Luulyo 2024**.

## Qodobka 1aad: Xilka Iyo Mas'uuliyadaha U Qeybsanaayaasha Arrimaha Difaaca

U qeybsanaha arrimaha difaacu waa wakiilka Wasaaradda Gaashaandhigga ee safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku leedahay dal kale.

Waajibaadka u qeybsanaha arrimaha difaaca waxaa ka mid ah:

1. **Matalaadda Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Arrimaha Difaaca**
   U qeybsanaha arrimaha difaacu waa wakiilka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ugu qaabilsan arrimaha difaaca ee dalka/dalalka loo magacaabay. Matalaaddan waxa ay ku salaysan tahay ilaalinta danaha qaranka ee dhinacyada difaaca, xiriirka diblomaasiyadeed iyo iskaashiga ciidan ee labada dhinac.

2. **Xoojinta iskaashiga difaac ee u dhexeeya dalka/dalalka u qeybsanaha arrimaha difaacu uu wakiilka uga yahay Soomaaliya**
   Hawshani waxay safka hore uga jirtaa waajibaadka iyo xilka u qeybsanaha, maadaama curfiga dowliga ah ee xilligan uu ku salaysanyahay furfurnaan, isbaheysiyo iyo horumar tiknoolajiyadeed taas oo u baahan iskaashi si loo ilaaliyo ammaanka qaranka, kan gobolka iyo midka caalamiga ahba.

   Si loo xoojiyo xiriirka iskaashiga ee dhanka difaaca, u qeybsanuhu waa in uu ku guto gudashada waajibaadka iyo xilka saaran qaababka soo socda:

   a) Gudashada waajibaadka iyo mas'uuliyadaha ay u xilsaartay Wasaaradda Gaashaandhiggu.
   b) Hindisaha iyo hal-abuurka shaqsiga ah ee u qeybsanaha isagoo ka faa'iidaysanaya xiriirka uu la leeyahay hay'adaha dalka/dalalka uu wakiilka nooga yahay.
   c) Codsi ka yimaada dalka/dalalka uu wakiilka nooga yahay kaas oo danaynaya horumarinta iskaashi dhinaca difaaca ah oo uu la yeesho Soomaaliya.
   d) Kartida, aqoonta iyo waayo-aragnimada u qeybsanuhu waxay muhiim u tahay horumarinta iskaashiga difaac ee labada dal.

3. **Dhisidda kalsoonida iyo horumarinta xiriirka wada shaqayneed**
   U qeybsanaha Arrimaha Difaacu isaga oo la kaashanaya Wasaaradda Gaashaandhigga una maraya hannaanka diblomaasiyadeed ee caalamiga ah ee la isla aqoonsanyahay waa in uu dhisaa kalsooni dhanka iskaashiga difaaca ah oo dhex marta labada dal isla markaana uu abuuro jawi saaxiibtinimo iyo wada shaqeyn u horseedda labada dal in ay isdhaafsadaan booqashooyin, xiriir joogta ah iyo iskaashi dhanka difaaca ah.

   U qeybsanaha arrimaha difaacu waa in uu dhisidda kalsoonida iyo horumarinta xiriirka wada shaqayneed ee labada dal u maraa hababka diblomaasiyadeed ee soo socda:

a) La socoshada munaasabadaha qaran iyo ciidan ee dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya iyo ku wargelintooda Wasaaradda Gaashaandhigga si loo go'aamiyo heerka ka qeybgalka munaasabadahaas.
b) La socoshada saamaynta musiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa kale ee ka dhaca dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya iyo ku wargelintooda Wasaaradda Gaashaandhigga si Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uga qeyb qaadato gacanna uga gaysato gurmadka iyo gargaarka dadka ay musiibooyinku saameeyeen.
c) Qaban-qaabinta isdhaafsiga booqashooyin rasmi ah oo heerkoodu sarreeyo oo dhex mara hay'adaha difaaca ee labada dal.
d) Isdhaafsiga haddiyado-sharafeed dhexmara u qeybsanaha iyo saraakiisha difaaca ee dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya xilliyada munaasabadaha qaran iyo ciidan ee labada dhinac.
e) Waa in uu si heerkeedu aad u sarreeyo u ilaaliyo xogta nooc kasta oo iskaashi iyo wadashaqeyn ee dhexmarta Soomaaliya iyo dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay si aysan sirtaasi ugu gacan gelin dhinacyo ka faa'iidaysan kara ama dhaawici kara xiriirka iskaashiga difaaca ee Soomaaliya iyo dalkaas/dalalkaas.

4. **Isku-duwidda iskaashiga difaac ee Soomaaliya iyo dalka/dalalka kale** In kasta oo aan iskaashi difaac walbaa uusan ahayn isbahaysi ciidan ilaa uu maro marxalado kala duwan oo siyaasadeed haddana waxa uu muhiim u yahay xiriirka dalalka uu dhexmarayo si ay isu dhaafsadaan ugana wada shaqeeyaan danaha difaac ee ay wadaagi karaan.

U qeybsanaha arrimaha difaacu waa inuu faham qoto-dheer u yeeshaa danaha dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya isaga oo mar kasta maskaxda ku haynaya danaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo awoodaha dalkeenna.

Arrimaha muhiimka u ah hirgelinta isku-duwidda iskaashiga difaac ee Soomaaliya iyo dalka/dalalka kale waxaa ka mid ah:

a) Isku-dubbaridka dhoolla-tusyo ciidan oo wadajir ah sida qorshaynta dagaalka, adeegsiga gaadiidka dagaalka iyo hubka, xeeladaha fagaarayaasha dagaalka, barta hoggaaminta, xeeladaha weerarka, difaaca iyo wada-howlgalka ciidammada dhulka, cirka iyo badda ee labada dal.
b) Dhiirri gelinta isdhaafsiga tababarrada, aqoonta iyo waayo-aragnimada ciidan ee labada dhinac.
c) Kobcinta iskaashiga dhinacyada hubka, saanadda, agabka, qalabka iyo tiknoolajiyadda difaac ee casriga ah ee labada dal.
d) Isku-duwidda taageerada iyo deeqaha ciidan ee dalka/dalalka uu wakiilka nooga yahay (si gaar ah u qeybsanayaasha arrimaha difaaca ee Soomaaliya wakiilka uga ah dalalka hodanka ah).
e) U qeybsanaha arrimaha difaacu waa in uu si heerkeedu sarreeyo u dhiso xiriirka iskaashiga difaac ee labada dhinac isaga oo ku saleynaya xiriirka diblomaasiyadeed ee labada dal. Heshiisyada difaaca waxaa isla gaara oo go'aamiya madaxda labada dal halka u qeybsanaha arrimaha difaacu uu yahay xiriiriyaha iyo isku-duwaha ugu muhiimsan isaga oo la kaashanaya Danjiraha Soomaaliya u fadhiya dalka/dalalka uu wakiilka nooga yahay.

5. **Xog-ururinta iyo wargelinta joogtada ah ee Wasaaradda Gaashaandhigga.** Mid ka mid ah waajibaadka ugu muhiimsan ee saaran u qeybsanaha arrimaha difaacu waa ururinta xogaha difaac iyo amni ee dalka/dalalka uu wakiilka uga Soomaaliya. Arrintan waxaa

dammaanad qaadaya **qodobka 41aad** ee **Heshiiska Vienna ee xiriirrada diblomaasiyadeed ee 1961**kii.

Ururinta xogtu waxay muhiim u tahay qiimaynta xaaladaha siyaasadeed, difaac iyo amni iyo go’aan qaadashada saxda ah ee madaxda dalka xilliga ku habboon.

Sidaas darteed, u qeybsanaha arrimaha difaacu waa in uu si xeel dheer u maareeyaa ururinta xogta iyo ilaalinta sirta isaga oo adeegsanaya xasaanaddiisa diblomaasiyadeed.

6. **Fulinta tilmaamaha iyo amarrada Wasiirka Gaashaandhigga.**

U qeybsanaha arrimaha difaacu waa in uu si buuxda u fuliyaa tilmaamaha iyo amarrada ka soo baxa Wasiirka Gaashaandhigga ee la xiriira matalaadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee dhinaca difaaca. Fulinta waajibaadkan waxaa ka mid ah:

a) Fulinta siyaasadda iyo istaraatiijiyadda Wasaaradda ee la xiriira horumarinta iskaashiga difaaca.
b) Hubinta tallaabo kasta ee uu qaadayo in ay waafaqsan tilmaamaha Wasiirka iyo danaha qaranka.
c) In uu si degdeg ah uga jawaabo dalabyada Wasiirka ee la xiriira xaaladaha degdegga ah.

## Qodobka 2aad: Hannaanka Xulashada iyo Magacaabista

1. **Shuruudaha Laga Rabo:**

a) In uu yahay sarkaal ciidan oo sare (ugu yaraan Heerka Gaashaanle Sare iyo wixii ka sarreeya).
b) In uu khibrad u leeyahay arrimaha diblomaasiyadda, ciidanka, amniga gobolka iyo xiriirka caalamiga ah. Sidoo kale, waa in uu ku hadlaa luuqadda rasmiga ah ee dalka/dalalka uu wakiilka nooga yahay iyo/ama mid ka mid ah luuqadaha caalamiga ah (Ingiriis, Carabi iwm).
c) In uu haysto shahaado jaamacadeed ugu yaraan heerka koowaad (Bachelor Degree).
d) In uu ka baxay akadeemiyo ciidan (staff college) iyo wixii ka sarreeya.
e) In uu leeyahay ugu yaraan shan (5) sano oo waaya-aragnimo hoggaamin ciidan ah.
f) In uu haysto hubin heerkeedu sarreeyo oo ay bixiyeen guddi ay ku midaysanyihiin Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Taliska CXD.
g) In uu leeyahay xirfad, karti, xilkasnimo iyo anshax suubban (dishibiliin), ilaaliyana xogaha ciidan una hoggaansamo siyaasadda difaaca qaranka.

2. **Habraaca Magacaabista:**

a) Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa go’aaminaysa baahida magacaabis.
b) Wasiirka Gaashaandhigga ama cidda uu u xilsaarto ayaa xaqiijinaysa in u qeybsanaha arrimaha difaacu uu buuxiyay shuruudaha ku xusan qodobka labaad, farqadiisa koowaad ee habraacan.
c) Wasiirka Gaashaandhigga ayaa hubinaya in u qeybsanuhu uu qaato tababarro la xiriira arrimaha difaaca iyo hawlaha diblomaasiyadda.
d) Wasiirka Gaashaandhigga ayaa magacaabaya ama xilka ka qaadaya u qeybsanaha arrimaha difaaca sida ku cad **Xeer Madaxweyne LR.238**.

e) Wasiirka Gaashaandhiggu waxa uu u magacaabayaa dalalka/dalalka iskaashiga difaac ee xooggan uu kala dhaxeeyo Soomaaliya ku xigeenka u qeybsanaha arrimaha difaaca haddii/markii loo baahdo.

f) Waddammada aan xiriir difaac oo toos ahi kala dhaxeynin Soomaaliya ama aysan jirin baahi loogu magacaabo u qeybsane difaac, waxaa Soomaaliya ku matalaya u qeybsanaha difaac ee wakiilka nooga ah dal deris la ah dalkaas (Non-resident Defense Attachés).

g) Qeybta Xiriirka Dibadda iyo U Qeybsanayaasha ee Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa la socodsiinaysa Wasaaradda Arrimaha Dibadda magacaabista u qeybsanaha si ay ugu gudbiso dalka loo magacaabay.

## Qodobka 3aad: Kormeer iyo Korjoogtayn

1. U qeybsanaha arrimaha difaaca waxaa waajib ku ah diyaarinta warbixinno kala duwan isaga oo u gudbinaya Wasaaradda Gaashaandhigga una soo marsiinaya Qeybta Xiriirka Dibadda iyo U Qeybsanayaasha.
2. Noocyada warbixinnada sida joogtada ah looga rabo u qeybsanuhu waxay kala yihiin:

**a) Warbixinno Muddaysan:**

- **Warbixin Maalinle ah:** Haddii loo baahdo, u qeybsanuhu waxa uu warbixin maalinle ah oo la xiriirta xaaladda dalka/dalalka uu nagu matalo u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS).
- **Warbixin Toddobaadle ah:** Haddii loo baahdo, u qeybsanuhu waxa uu warbixin toddobaadle ah oo la xiriirta xaaladaha amniga iyo difaaca u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS.
- **Warbixin Bille ah:** U qeybsanuhu waxa uu warbixin bille ah oo la xirirta waxqabadkiisa iyo xaaladaha difaac iyo amni ee dalka/dalalka uu ku matalo Soomaaliya u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS.
- **Warbixin Saddex Biloodle ah:** U qeybsanuhu waxa uu warbixin saddex biloodle ah oo uu ku faahfaahinayo xaaladaha istiraatiijiga ah ee dalka/dalalka uu ku matalo Soomaaliya u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS.

**b) Warbixinno Dhacdooyin La Xiriira:**

- **Dhismaha Ciidan:** U qeybsanuhu waxa uu u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS warbixin la xiriirta taariikhda iyo qaab-dhismeedka ciidan ee dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya.
- **Munaasabadaha Qaran iyo Ciidan:** U qeybsanuhu waxa uu u ku soo wargelinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS warbixin la xiriirta munaasabadaha qaran iyo ciidan ee dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya.
- **Dhoolla-tusyada Ciidan:** U qeybsanuhu waxa uu u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS warbixinnada la xiriira dhoola-tusyada ciidan ee ka dhaca dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya.
- **Isbedellada Siyaasadeed:** U qeybsanuhu waxa uu u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS warbixinno la xiriira isbedellada siyaasadeed ee saamaynaya difaaca, amniga iyo ciidanka dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya.

- **Dhacdooyinka Amni ama Iska-hor-imaadyada Hubeysan:** U qeybsanuhu waxa uu u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS warbixinno la xiriira dhacdooyinka amni iyo iska-hor-imaadyada hubaysan ee ka dhaca dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya.
- **Magacaabista Mas'uuliyiinta Sare ee Difaaca:** U qeybsanuhu waxa uu u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS warbixinno la xiriira magacaabista, xil ka qaadista iyo isku shaandhaynta mas'uuliyiinta xilalka sare ee hay'adaha difaaca dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya.

**c) Warbixinno Gaar ah:**

- **Qiimeynta Awoodda Difaac:** U qeybsanuhu waxa uu u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS warbixin la xiriirta qiimeynta awoodda ciidan ee dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya.
- **Dib-U-Habeynta Hay'adaha Difaac:** U qeybsanuhu waxa uu u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS warbixinno la xiriira hawlaha dib-u-habayn kasta oo lagu sameeyo hay'adaha difaac ee dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya.
- **Qorshayaasha Iibka:** U qeybsanuhu waxa uu u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS warbixinno la xiriira qorshayaasha iibka hubka, rasaasta, agabka iyo qalabka ciidan ee Wasaaradda Difaaca ee dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya.
- **Iskaashi Ciidan:** U qeybsanuhu waxa uu u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS warbixinno la xiriira is-afgaradyada iyo heshiisyada iskaashi ee dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya la galo dal/dalal kale.
- **Dhaqdhaqaaqyada Ciidan:** U qeybsanuhu waxa uu u soo gudbinayaa Wasiirka Gaashaandhigga JFS warbixinno la xiriira dhaqdhaqaayada ciidan ee gudaha dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya.

3. Warbixinnada uu diyaariyo u qeybsanuhu waxay isugu jirayaan warbixinno **Sir Culus** ah oo u gaar ah si toos ahna uu ugu soo dirayo Wasiirka Gaashaandhigga iyo warbixinnada kale oo uu soo marsiinayo Qeybta Xiriirka Dibadda iyo U Qeybsanayaasha.
4. Warbixinada sirta ah ee u qeybsanuhu diyaariyo waa in lagu asateeyo erayga sir culus laguna soo diro **Kolayga Diblomaasiyadda** (Diplomatic Pouch or Courier). Qoraal Sir Culus ah laguma soo diri karo shabakadda internet-ka.
5. Warbixinnada sirta ah isla markaasna degdegta ah oo uusan u qeybsanuhu la sugi karin in uu ku soo diro Kolayga Diblomaasiyadda (Diplomatic Pouch or Courier), waa in loo helaa shabakad isgaarsiineed oo toos ah la iskuna halleyn karo oo uu kula wadaago Wasiirka Gaashaandhigga.
6. U qeybsanuhu waxa uu sidoo kale warbixinnada sirta ah ku gudbin karaa kulammo fool-ka-fool ah oo uu la yeesho Wasiirka Gaashaandhigga JFS.
7. U qeybsanaha arrimaha difaacu lama wadaagi karo qoraallada sirta ah iyo nuqulladooda cid aan ahayn Wasaaradda Gaashaandhigga.
8. Xogta iyo warbixinnadda u qeybsanayaasha arrimaha difaacu u soo gudbiyaan Wasaaradda waxaa si aad u xafidan loogu keydinayaa Qeybta Boostada iyo Xusuus- dhowrka ee Wasaaradda Gaashaandhigga ama meeshii kale ee si rasmi ah loogu asteeyo.
9. Warbixinnada sida gaarka ah u khuseeya Taliska CXDS, iyadoo loo soo marsiinayo xafiisyada u xilsaaran waxaa si toos ah loogu soo gudbinayaa Xafiiska Taliyaha.

10. Qeybta Xiriirka Dibadda iyo U Qeybsanayaasha ee Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa kormeer iyo korjoogtayn ku samaynaysa u qeybsanayaasha arrimaha difaaca.
11. Qeybta Xiriirka Dibadda iyo U Qeybsanayaasha ee Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa qiimeyn sanadle ah ku samayn doonta u qeybsanayaasha arrimaha difaaca.

### Qodobka 4aad: Muddada Xil-Haynta

1. U qeybsanaha arrimaha difaaca lagama beddeli karo dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya isaga oo aan dhammaysan laba sanadood (2) oo ka bilaabata maalinta uu xilka la wareego, haddii aan waajibaad kale oo qaran loogu baahan.
2. U qeybsanuhu kuma nagaan karo dalka/dalalka uu ku matalo Soomaaliya wax ka badan hal xilli oo afar (4) sano ah.
3. U qeybsanuhu ma hayn karo xilka matalaadda wakiilnimo ee arrimaha difaaca wax ka badan laba xilli oo ah siddeed sanadood (8) oo xiriir ah.
4. Ka dib marka uu soo dhameysto matalaadda wakiilnimo, u qeybsanuhu waa in uu ka hawl galaa xarunta dhexe ee Wasaaradda Gaashaandhigga ama Taliska CXD ugu yaraan laba (2) sanadood oo xiriir ah.
5. U qeybsanaha soo dhameysta waajibaadka matalaadda wakiilnimo, wuxuu ka qaban karaa Wasaaradda Gaashaandhigga xil maamul oo sare sida Xoghayaha Joogtada ah, Agaasimaha Guud, Agaasime Waaxeed ama xilkii kale ee uu Wasiirku u magacaabo.
6. Iyadoo la tixraacayo Habraaca U Qeybsanayaasha Arrimaha Difaaca, Guddi sare oo uu hoggaaminayo Xoghayaha Joogtada ah ayaa qiimeyn ku samaynaya xil gudashada u qeybsanaha arrimaha difaaca, warbixinna u soo gudbinaya Wasiirka Gaashaandhigga.
7. U qeybsane kasta oo guddiga sare ee qiimeyntu caddeeyaan in waxqabadkiisu ka hooseeyo heerkii looga baahnaa labada sano ee hore, waxaa laga qaadayaa xilka matalaaddda wakiilnimo waxaana lagu soo celinayaa dalka.
8. U qeybsane kasta oo laga beddelayo dalka/dalalka uu ku matalo Soomaaliya ama xilka laga qaadayo waa in lagu wargeliyaa laba (2) bilood ka hor.

### Qodobka 5aad: Sababaha Xilka Lagu Waayi Karo

1. Faafinta qoraallo/xogo la xiriira hawlaha loo wakiishay ama kuwa Wasaaradda Gaashaandhigga. Sidoo kale, qabashada war-saxaafadeed isaga oo aan haysan oggolaanshaha Wasiirka Gaashaandhigga.
2. Faafinta warbixin sir ah ee uu ku helay maqaamka xilkiisa rasmiga ah taas oo uu la wadaagay cid aan ahayn Wasaaradda Gaashaandhigga.
3. U qeybsanaha arrimaha difaaca oo ku kaca falal dhaawici kara xiriirka Soomaaliya iyo dalka/dalalka uu wakiilka nooga yahay.
4. Dalka/dalalka uu wakiilka nooga yahay u qeybsanaha Arrimaha Difaacu oo ka xayuubiya heybadda diblomaasiyadeed (Persona Non Grata).
5. Xil-gudasho la’aan.
6. Khiyaano qaran.
7. Musuq-maasuq.
8. Anshax-xumo diblomaasiyadeed.
9. Gaaritaanka da’da hawl-gabka.
10. Xanuun dhanka maskaxda/dhimirka ah.
11. Mudadda xil-hayntiisa oo dhammaata.

12. Iscasilaad.
13. Dhimasho.

## Qodobka 6aad: Wada Shaqeynta

1. Madaxa ergada diblomaasiyadeed ee Soomaaliya ee dalka/dalalka uu wakiilka nooga yahay u qeybsanaha arrimaha difaacu waa Danjiraha Soomaaliya u fadhiya dalkaas.
2. U qeybsanaha arrimaha difaacu waa diblomaasi sare oo ka tirsan safaaradda Soomaaliya ee dalka/dalalka uu wakiilka nooga yahay oo hab-maamuus ahaan istaagaya maqaamka danjiraha ku xiga, hase yeeshee aan qaadan karin go'aanno diblomaasiyadeed oo uusan kala tashan Madaxa Ergada Safaaradda JFS.
3. U qeybsanaha arrimaha difaacu waa diblomaasi sare oo ka tirsan safaaradda Soomaaliya ee dalka/dalalka uu wakiilka nooga yahay isla markaasna u madaxbannaan gudashada hawlaha ay u igmatay Wasaaradda Gaashaandhigga JFS isaga oo hawl-maalmeedkiisana la socodsiiyaa Madaxa Ergada.
4. U qeybsanaha arrimaha difaacu ma qaban karo jagada ku-simaha marka uu maqan yahay Madaxa Ergadu mana fara gashan karo arrimaha maamul ee safaaradda JFS ee dalka/dalalka uu wakiilka nooga yahay.
5. Haddii uu yimaado khilaaf ama isfaham darro u dhaxeysa u qeybsanaha arrimaha difaaca iyo Diblomaasiyiinta kale ee Safaaradda, waxaa lagu xallinayaa wadahadal dhexmara labada dhinac iyadoo Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda lagu wargelinayo haddii/markii loo baahdo.
6. U qeybsanaha arrimaha difaacu ma geli karo safar, kamana maqnaan karo goobtiisa shaqo isaga oo aan oggolaansho qoraal ah ka haysan Wasaaradda Gaashaandhigga.
7. Kulan kasta oo uu u qeybsanaha arrimaha difaacu la yeelanayo mas'uuliyiinta hay'adaha amniga iyo difaaca ee dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya waa in uu kulanka ka hor ku soo wargeliyaa Wasaaradda Gaashaandhigga JFS.
8. Sidoo kale, kulan kasta oo uu u qeybsanaha arrimaha difaacu la yeelanayo u qeybsanayaasha arrimaha difaaca ee dalalka shisheeye u fadhiya dalka/dalalka uu wakiilka uga yahay Soomaaliya waa in uu kulanka ka hor ku soo wargeliyaa Wasaaradda Gaashaandhigga JFS.
9. U qeybsanaha arrimaha difaacu waa xubin ka tirsan hawl-wadeennada Wasaaradda Gaashaandhigga. Xuquuqdiisa iyo fasaxyadiisa waxaa loo maaraynayaa si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 7aad: Dhaqan-Gal

1. Habraacani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu meel mariyo Golaha Wasiirrada ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Habraacani marka uu dhaqan galo waxaa reebban in lagu dhaqmo dukumiinti kasta oo kale oo ka hor imaanaya habraacan.

**Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 186** **Taariikh: 27/09/2025**

**XEER: QARAARKA GOLAHA WASIIRRADA EE GUNAANADKA XILKA XEELDHEERAHA MADAXABANNAAN EE XAALADDA XUQUUQUL INSAANKA SOOMAALIYA**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
27 SEP 2025
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad faqradaha (1) iyo (2); Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100 aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka 2012 ee JFS;

**Markuu arkay:** Qaraarka 2753 (2024) ee Howlgalka Kala-guurka Qaramida Midoobay ee Soomaaliya (UNTMIS);

**Markuu arkay:** Qorshaha Kala-guurka Xuquuqul Insaanka Soomaaliya (2025–2026) iyo Hannaanka Qaranka ee Warbixinta iyo Dabagalka (NMRF) ee 2024;

**Markuu arkay:** Aasaaska iyo hawlgelinta Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka Qaranka (NIHRC);

**Markuu arkay:** Qaraarka Golaha Xuquuqul Insaanka ee Qaramada Midoobay (A/HRC/RES/57/27), gaar ahaan tuducyada 22 ilaa 31;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.27.130.09.25** ee **25/09/2025**, kuna saabsan "**Qaraarka Golaha Wasiirrada ee Gunaanadka Xilka Xeeldheeraha Madaxabannaan ee Xaaladda Xuquuqul Insaanka Soomaaliya**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgaliyay:** Baahida loo qabo la wareegidda mas'uuliyadaha qaran ee kormeerka, u kuurgelidda, iyo ka warbixinta madaxabannaan ee xuquuqul insaanka, si waafaqsan xeerka caalamiga ah ee xuquuqul insaanka.

**Waxaa uu meelmariyay:**

**Qodobka 1aad**
**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.27.130.09.25** ee **25/09/2025**, kuna saabsan **"Qaraarka Golaha Wasiirrada ee Gunaanadka Xilka Xeeldheeraha Madaxabannaan ee Xaaladda Xuquuqul Insaanka Soomaaliya"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**
**Dhammaadka Waajibaadka Xeeldheeraha Madaxabannaan (October 2025)**

1. Waajibaadka iyo howsha Xeeldheeraha Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka waxaa si rasmi ah loo soo gebogebeyn doonaa marka uu dhammaado muddada xil-hayntiisa ee hadda jirta, taas oo ku eg Oktoobar 2025, si waafaqsan Qaraarka Golaha Xuquuqul Insaanka ee Qaramada Midoobay (A/HRC/RES/57/27).
2. Kaalinta isku-duwidda iyo hagidda hawlaha kala guurka ee ka dhashay dhammaadka waajibaadka Xeeldheeraha Madaxabannaan waxaa si kumeelgaar ah u maamuli doonta Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka, ilaa si buuxda loo dhammaystirayo dhismaha iyo howlgalinta Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka Qaranka (NIHRC).

**Qodobka 3aad**
**Qorshaha Kala-guurka UNTMIS/HRPG (Oktoobar 2026)**

Si looga miradhaliyo Qorshaha Kala-guurka UNTMIS/HRPG ee Oktoobar 2026 waa in:

(a) dhammaan taageerada farsamo ee UNTMIS ee la xiriirta xuquuqul insaanka, ilaalinta dadka nugul, iyo barnaamijyada la-talin iyo dabagal, lagu soo afjaro bisha Juunyo 2026;

(b) mas'uuliyaddan si buuxda loogu wareejiyo hay'adaha qaran sida Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka, Guddiga (NIHRC), Hay'adda Naafada, iyo hay'adaha amniga;

(c) haddii ay timaaddo baahi dheeri ah ee la xiriirta hirgelinta HRDDP ee UNSOS in ay qabtaan shaqaalaha muwaaddiniinta Soomaaliyeed.

### Qodobka 4aad
### Ujeeddada Kala-guurka Qaran ee Xuquuqul Insaanka

Waxaa Qorshaha Kala-guurka Qaran ee Xuquuqul Insaanka looga dan leeyahay:

(a) helidda qorshe qaran oo ku dhisan lahaansho, daahfurnaan, iyo mas'uuliyad buuxda;

(b) dib-u-qaabeynta xiriirka Soomaaliya iyo hay'adaha Qaramada Midoobay, mana aha in laga fogaado iskaashiga caalamiga ah;

(c) muujinta diyaar-garowga dowladeed si looga baxo habka gaar ahaaneed (country-specific mandates), korna loogu qaado xilgudashada Dowladda Soomaaliyeed.

### Qodobka 5aad
### La-socodka iyo Hirgalinta Qaraarkan

1. Waxaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga la farayaa ku-wargalinta hay'adaha uu khuseeyo Qaraaranka :
   (a) Golaha Xuquuqul Insaanka ee Qaramada Midoobay (UN HRC);
   (b) Xafiiska Xuquuqul Insaanka (OHCHR);
   (c) Hay'adaha iyo ciddii kale uu khuseeyo.
2. Waxaa Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka la farayaa dabagalka, la-socodka iyo ka-miradhalinta Qaraarkan iyadoo kaashanaysa Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

### Qodobka 6aad
### Dhaqangalka

Qaraarkan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-061-2025
TAARIIKH : 29-09-2025
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA — XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA — OFFICE OF THE PRIME MINISTER — FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.187** **Taariikh: 26 Oct, 2025**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA MACHADKA SARE EE DARAASAADKA AMNIGA IYO ISTARAATIIJIYADDA**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
26 OCT 2025
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 44(4) ee Sharciga Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka (Sharci Lr. 3/2023).

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **WAG/XW/922/25** ee ku taariikheysan **08/10/2025** ee Wasaaradda Amniga kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga iyo Istaraatiijiyadda;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.31.134.10.25** ee **23/10/2025,** kuna saabsan **Ansixinta "Xeer-nidaamiyaha Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga iyo Istaraatiijiyadda"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Xeer-nidaamiyahan u leeyahay soo saaridda xeeldheerayaal iyo daraasaad amni.

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.31.134.10.25** ee **23/10/2025,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga iyo Istaraatiijiyadda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Amniga loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

**Qodobka 3aad**

**Dhaqangal**

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-078-2025
TAARIIKH
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Wasaaradda Amniga Gudaha**

# XEER-NIDAAMIYAHA MACHADKA SARE EE DARAASAADKA AMNIGA IYO ISTARAATIIJIYADDA

**MUQDISHO-SOOMAALIYA**

**2025**

## CUTUBKA KOOWAAD: QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad:

### Magaca iyo Ujeeddada Xeerka

1. Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "**Xeer-nidaamiyaha Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga iyo Istaraatiijiyadda**".
2. Ujeeddooyinka xeerkan waxaa ka mid ah:
   a) Dhisidda Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga iyo Istaraatiijiyadda.
   b) Qeexidda ujeeddooyinka iyo kaalinta Machadka.
   c) Qaabaynta iyo nidaaminta hab-maamulka guud ee Machadka.
   d) Xadididda xilalka iyo awoodaha kala duwan ee hawlwadeennada Machadka.
   e) Jihaynyta Xeer-hoosaadyada Machadka.

### Qodobka 2aad:

### Eray Bixin

Ereyada soo socda haddii aan xeerkan gudihiisa si kale loogu fasirin, waxaa loola jeedaa mid kasta macnaha ku hor qoran:

1. **Amniga Qaranka**: waxaa loola jeedaa in ay dawladdu karaan (awood) u yeelato -joogtada iyo timaaddada- in ay dhulkeeda, khayraadkeeda, jiritaankeeda dawladnimo, badqabka tiirarkeeda asaasiga ah, xasilloonideeda iyo danaheeda kala duwan ka ilaaliso dhammaan khataraha taagan ama suuragalka ah ee ka soo wajahaya dibadda iyo gudaha dalka, haddii ay ahaan lahayd dhan siyaasadeed, dhaqaale, ciidan, bulsho ama hiddo intaba;
2. **Istaraatiijiyadda Amniga Qaranka:** waxaa loola jeedaa in si cilmi ah isla markaana maangal ah loo dejiyo siyaasado, qorshayaal iyo wadiiqooyin lagu xaddidi karo habka ugu habboon ee loo adeegsan karo khayraadka, fursadaha, ilaha iyo awoodaha dawladda ee la heli karo, iyadoo la ilaalinayo duruufaha ku xeeran, si loo xaqiijiyo danaha iyo ujeeddooyinka Amniga Qaranka;
3. **Khatar (Halis) Amni**: waxaa loola jeedaa halis ama cadaadis taagan ama soo food leh oo liddi ku ah amniga iyo xasilloonida dalka, isla markaana caqabad ku ah ama saamayn taban ku leh fulinta iyo dhaqangelinta istaraatiijiyadda iyo danaha Qaranka**;**
4. **Daraasaadka amniga iyo Istaraatiijiyadda**: waxaa loola jeedaa barnaamijyo ku dhisan aqoon iyo xirfad kuna salaysan waaqic oo looga danleeyahay in lagu barto, lagu falanqeeyo ama lagu gaaro sidii looga hortagi lahaa ama loo maareyn lahaa khataraha amni ee taagan ama soo food leh ee dawladda ka soo wajaha dhanka caalamka, gobolka ama gudaha iyo sidii loo daawayn lahaa sababaha keenay ama keeni kara khatarahaas;
5. **Machadka**: Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga iyo Istaraatiijiyadda ee xeerkan uu dhisayo.
6. **Agaasimaha**: Agaasimaha Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga iyo Istaraatiijiyadda;

7. **Dastuurka**: Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee JFS ee la ansixiyay 1dii Agoosto 2012;
8. **Golaha Sare**: Golaha Sare ee Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga iyo Istaraatiijiyadda;
9. **Golaha Tacliinta**: Golaha Tacliinta ee Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga iyo istaraatiijiyadda;
10. **JFS**: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## CUTUBKA LABAAD:
## QAABDHISMEEDKA, ASTAANTA IYO CALANKA MACHADKA

### Qodobka 3aad:
### Dhismaha iyo Dabeecadda Machadka

1. Xeerkan waxa uu dhisayaa "**Machadka Sare ee Daraasaadka Amniga iyo Istaraatiijiyadda**", oo afka cabariga ku noqonaya: المعهد العالي للدراسات الأمني ة والاستراتيجية halka uu afka English-ka ku noqonayo "**The Higher Institute for Security and Strategic Studies"** loona soo gaabinayo (HISS), xeerkan dhexdiisana waxaa loogu yeerayaa "**Machadka**".
2. Machadku waa hay'ad tacliin sare oo takhasusi ah una gaar ah daraasaadka, tababarrada iyo cilmibarista khuseysa ama xiriirka la leh amniga iyo istaraatiijiyadda Qaranka.
3. Machadku waxa uu yeelanayaa shakhsiyad qaanuuneed oo u gaar ah, wuxuuna leeyahay awood uu ku fulin karo hawlaha ku xusan Qod. 4[aad] ee xeerkan, isla markaana uu heshiisyo ku saxiixi karo ama iskaashiyo kula yeelan karo hay'ado waddani ah ama shisheeye ah haddii danta Machadku ku jirto.
4. Machadku wuxuu u hoggaansamayaa xeerkan, sharciyada iyo xeerarka khuseeya, wuxuuna xagga nidaamka shaqada la mid yahay machadyada cilmiga ah ee dalka ka dhisan.
5. Xarunta Machadku waa magaalo madaxda Muqdisho, haddii loo baahdo wuxuu xarumo iyo laamo ka furan karaa meeshii ay hawli kaga xirnaato dalka gudahiisa ama dibaddiisa.
6. Afka Soomaaliga ayaa ah afka rasmiga ah ee Machadka, hase yeeshee, darasaadka, cilmibaarista iyo tababarrada waxay ku bixi karaan afaf kale.

### Qodobka 4aad:
### Hawlaha Machadka

1. Kobcinta heerka aqoonta, xirfadda iyo ogaalka hawlwadeennada, maamulka iyo xubnaha hay'adaha dawladda, gaar ahaan, dhanka sharci fulinta, difaaca, amniga iyo istaraatiijiyada.
2. Ka-qeyb-qaadashada diyaarinta kawaadir takhasus, khibrad ku filan iyo faham durugsan u leh amniga iyo istaraatiijiyadda Qaranka.
3. Sameynta iyo soo-saarista cilmibaarisyo qotadheer oo ku saabsan amniga iyo istaraatiijiyada Qaranka, Gobolka iyo Caalamka, oo xambaarsan talooyin cilmiyeed oo ku habboon in lagu saleeyo go'aannada dawladda ee la xiriira arrimaha amniga iyo istaraatiijiyadda Qaranka.
4. Daraasaynta kaalinta asaasiga ah ee hay'adaha ka shaqeeya sameynta iyo jihaynta siyaasadda amniga iyo istaraatiijiyada Qaranka.

5. Falaqaynta iyo barashada arrimaha dhaqaale, siyaasadeed iyo difaac ee saamaynta ku leh amniga iyo istaraatiijiyada Qaranka.
6. Qiimaynta iyo falaqaynta khataraha iyo arrimaha ku xeeran ama taabanaya amniga Qaranka.
7. Barashada farsamooyin hormarsan oo lagu hillaadin (oddoroosi) karo laguna falaqayn karo mustaqbalka amniga iyo istaraatiijiyadda Qaranka.
8. Soojeedinta siyaasadaha guud ee beddelka noqon kara, isla markaana suuragal ka dhigi kara in khataraha la wajaho lagana hortago.
9. Xadididda fursadaha daahsoon ee timaaddada ay dawladdu maalgashan karto ama ay ka faa'iidaysan karto, si ay u xoojiso meeqaamkeeda.
10. Qabashada talo-wadaagyo, dood-cilmiyeedyo, hadal-jeedinno iyo kulan-cilmiyeedyo ku saabsan amniga iyo istaraatiijiyadda Qaranka, Gobolka iyo Caalamka;
11. Xoojinta xiriirka iyo aqoon-isweydaarsiga Machadka kala dhaxeeya jaamacadaha, akademiyadaha, macaahidda iyo hay'adaha waxbarashada dalka iyo dibadda.

## Qodobka 5aad:

## Astaanta iyo Calanka Machadka

1) Astaanta Machadka waxa ay ka kooban tahay; Lix-geesoodle buluug furan ah, oo dhexda looga qoray xarfaha (**HISS**) oo ah soo gaabinta magaca Machadka. Waxaa sidoo kale dhexda kaga jira xiddig cad oo shan geesood ah oo ka dhigan in Machadku uu yahay mid ka mid ah hay'adaha Qaranka.
2) Machadku waxa uu yeelanayaa calan u gaar oo ah leydi cad oo dhexda ku leh asataanta Machadka.

## Qodobka 6aad:

## Qaab-dhismeedka Machadka

1. Machadku waxa uu yeelanayaa, Gole Sare, Agaasime, Gole Tacliin, Waaxo, Laamo, Xafiisyo iyo Xarumo u gaar ah.
2. Faahfaahinta qaabdhismeedka Machadka waxaa loo raacayaa go'aan maamul oo uu saarayo Agaasimaha Machadka ka dib oggolaanshaha Golaha Sare ee Machadka.

## Qodobka 7aad:

## Golaha Sare ee Machadka

1) Machadku waxa uu yeelanayaa Gole Sare oo ka kooban sagaal (9) xubnood, oo kala ah sida soo socota:
    a) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugidda Qaranka (Guddoomiyaha Golaha)
    b) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Amniga (xubin);
    c) Agaasimaha Guud ee Tacliinta sare ee Wasaaradda Waxbarashada, Hiddah aiyo Tacliinta Sare (xubin);
    d) Agaasimaha Machadka (Xoghaynta Golaha);

e) Shan (5) xeeldheere oo isugu jira khubaro tacliin sare iyo saraakiil amni oo uu soo magacaabayo Agaasimaha Guud ee HSNQ (Xubno);

2) Habraaca shaqada Golaha Sare waxaa lagu qeexayaa Xeer-hoosaadka Machadka.

3) Golaha sare ee Machadka waxa uu kulmayaa sanadkiiba mar iyo markasta oo uu Gudoomiyaha Goluhu isugu yeero.

## Qodobka 8aad:

## Awoodaha Golahaha Sare ee Machadka

1) Dejinta siyaasadda guud ee hawlaha Machadka.
2) Abuurista iyo nidaaminta barnaamijyada tacliineed, tababarrada iyo cilmibaarista.
3) Bixinta shahaadooyinka iyo derajooyinka cilmi ee Machadka.
4) Dalacsiinta barayaasha sare ee Machadka, kadib marka uu helo qiimeynta Golaha Tacliinta;
5) Jaangooynta iyo wax ka beddelka siyaasadda guud ee Machadka.
6) La xisaabtanka Agaasimaha Machadka iyo Golaha Tacliinta.
7) La socodka iyo hubinta la xiriirta hirgalinta barnaamijyada uu Machadku fulinayo.
8) Go'aan ka gaarista arrimaha masiiriga ah ee Machadka.
9) Meelmarinta qorshe-sanadeedka iyo xisaab-xirka Machadka.
10) Soo-saaridda iyo wax-ka-beddelka Xeer-hoosaadyada khuseeya hawlaha guud ee Machadka.

## Qod. 9aad:

## Magacaabidda iyo Xil-ka-qaadista Agaasimaha Machadka

1. Machadka waxaa maamul ahaan hoggaaminaya Agaasimaha Machadka, waxaana xilka u magacaabaya kana qaadi kara Agaasimaha Guud ee HSNQ.
2. Agaasimaha Guud ee HSNQ, markii uu Agaasimaha Machadka magacaabayo, wuxuu ka xulanayaa saddex (3) qof oo uu Golaha sare ee Machadka soo jeedinayo.
3. Muddo xileedka Agaasimaha Machadka waa shan (5) sano oo hal mar loo cusboonayn karo.

## Qodobka 10aad:

## Mas'uuliyadda iyo Awoodaha Agaasimaha Machadka

Si waafaqasan Xeerkan, Agaasimaha Machadka waa masuulka ugu sarreeya maamulka Machadka, si gaar ahna, Agaasimaha Machadku waxa uu xilsaaran yahay arrimaha soo socda:

1. Hirgelinta ujeeddooyinka iyo socodsiinta hawlaha Machadka ee Xeerkan lagu tilmaamay.
2. Fulinta siyaasadaha iyo barnaamijyada guud ee Machadka, si waafaqsan jihaynta iyo soo-jeedinta Golaha Sare ee Machadka.
3. Soo-saaridda iyo hoggaaminta go'aannada maamul ee lagu socdsiinayo hawlaha Machadka.

4. Wuxuu si buuxda u matalaa machadka ama magacaabaa ciddii kale oo beddelkiisa matali lahayd.
5. Wuxuu awoodihiisa qeyb ahaan u wakiilan karaa Agaasime Waaxeedyada ama madax xafiiseedyada Machadka.
6. Wuxuu kormeeraa habsami u socodka hawlaha Machadka, isla markaana la xisaabtamaa dhammaan hawlwadeennada Machadka.
7. Wuxuu diyaariyaa qorshaha Machadka, isla markaana uu horkeenaa Golaha Sare ee Machadka.
8. Wuxuu diyaariyaa soona gudbinayaa madax miisaaniyadeedka Machadka, si waafaqsan Xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka Khuseeya.
9. Wuxuu magaca Machadka ku saxiixaa heshiisyada uu Machadku dhinaca ka noqonayo, isagoo oggolaansho ka haysta Agaasimaha Guud ee HSNQ ama Golaha Sare ee Machadka.
10. Wuxuu maamulaa uuna korjoogteeyaa Golaha Tacliinta iyo hawlaha cilmibaarista ee Machadka, isagoo ka anbaqaadaya siyaasadda guud ee waxbarashada dalka, fulinayana go'aannada Golaha Sare ee Machadka.
11. Waxa uu u xilsaaranyahay ilaalinta Xeer-nidaamiyahan iyo Xeer- hoosaadka Machadka.
12. Wuxuu soo jeediyaa magacaabidda iyo xil-ka-qaadista hawlwadeennada Machadka si waafaqsan xeerkan iyo Xeer- hoosaadyada Machadka.
13. Agaasimaha Machadku wuxuu yeelanayaa maamuus iyo maqaam la mid ah kan Agaasimeyaasha Guud ee Wasaaradaha Dawladda.

## Qodobka 11aad:
## Shuruudaha Agaasimaha Machadka

1. Waa in uu yahay muwaaddin Soomaaliyeed oo aan da'diisu ka yarayn 35 sano;
2. Waa in heerka aqoontiisa aysan ka hooseyn Derejada **Ph.D;**
3. Waa in uu leeyahay khibrad shaqo oo aan ka yarayn shan (5) sano oo la xiriirta waxbarashada sare ama cilmibaarista;
4. Waa in uu faham durugsan u leeyahay arrimaha amniga;
5. Waa in uusan ku dhicin xukun maxkamadeed oo kama dambeys ah kana reebaya in uu qabto xil dawladeed;
6. Waa in uu si buuxda u adeegsan karo afka Soomaaliga, Carabiga iyo English-ka.

## Qodobka 12aad:
## Golaha Tacliinta

1) Machadku wuxuu yeelanayaa Golaha Tacliinta oo hagaya hawlaha tacliinta ee Machadka.
2) Golaha Tacliinta waxaa xubno ka noqonaya; agaasimayaasha barnaamijyada tacliinta iyo afar (4) macallin oo xeeldheereyaal ah oo uu soo xulayo Agaasimaha Machadka.

3) Habka shaqada Golaha Tacliinta Machadka waxaa lagu qeexayaa Xeer- hoosaadka Machadka.

4) Agaasimaha Machadka waxaa u furan in uu soo xaadiro kulammada Golaha Tacliinta, isaga ayaana shir-gudoominaya kulammada uu ka qeybgalo.

5) Go'aannada Golaha Tacliinta waxay meelmar noqonayaan markii Agaasimaha Machadku oggolaado.

6) Golaha Tacliinta wuxuu u warbixiyaa Agaasimaha Machadka.

## Qodobka 13aad:

## Xilka Iyo Awoodaha Golaha Tacliinta

1) Diyaarinta, turxaanbixinta iyo soojeedinta barnaamijyada tacliinta ee Machadka.

2) Meelmarinta natiijooyinka imtixaannada Machadka.

3) Qiimeynta codsiyada macalimiinta iyo shaqaalaha soo codsanaaya in ay ka shaqeeyaan hawlaha tacliinta ee Machadka ama dalacsiinta marka uu Agaasimaha Machadku faro.

4) Diyaarinta iyo soojeedinta habraacyada u gaarka ah arrimaha tacliinta.

5) Jihaynta hawlaha tacliinta ee Machadka.

6) Meel-marinta go'aannada maamul ee la xariira arrimaha tacliinta.

# CUTUBKA SADDEXAAD:
# QODOBBO QUBANE AH

## Qodobka 14aad:

## Miisaaniyadda iyo Dakhliga Machadka

1. Machadku wuxuu madax miisaaniyadeed u gaar ah ku dhex yeelanayaa miisaaniyadda guud ee HSNQ, waxaana si toos ah loogu shubayaa xisaabta gaarka ah, si waafasan Qodobka 44aad ee Sharciga Hay'adda iyo Qodobka 34(3) ee Xeernidaamiyaha HSNQ.
2. Miisaaniyadda Machadka waxaa lagu jaangooynayaa qorshe sanadeedka Machadka, waxaana maamulaya Agaasimaha Machadka, si waafaqsan Qodobka 44aad ee Sharciga HSNQ.
3. Agaasimaha Machadka sanad kasta wuxuu soo saarayaa warbixinta iyo xisaab-xirka maaliyadeed ee Machadka.
4. Miisaaniyadda Machadka waxaa loo adeegsanayaa si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka HSNQ iyo xeerkan.
5. Waxaa u furan Agaasimaha Machadka in uu heshiis dakhli soo galinaya Machadka la galo hay'adaha dawladda, hay'adaha caalamiga ah iyo cid kasta oo daneynaysa adeegyada machadka, ka dib oggolaanshaha Agaasimaah Guud ee HSNQ.

### Qodobka 15aad:

### Mudnaan Gaar ah

Barayaasha Sare, Cilmibaarayaasha, Qalinleyda iyo Tababarayaasha xirfadda sare leh waxa ay machadka ku dhex yeelanayaan maamuus iyo gunnooyin u dhigma shaqada ay hayaan, waxaana nidaaminaaya Xeer-hoosaadyada Machadka.

### Qodobka 16aad:

### Warbixin Sanadeedka Machadka

Agaasimaha Machadka ayaa masuul ka ah diyaarinta iyo soo gudbinta warbixin sanadeedka Machadka, waxaana meelmarinaaya Golaha Sare ee Machadka.

### Qodobka 17aad:

### Shaqaalaha Iyo Hawlwadeennada Machadka

1. Machadku waxuu qaadanayaa hadba shaqaalaha iyo hawlwadeennada lagama maarmaanka u ah habsami u gudashada waajibaadka iyo awoodaha Xeerkan u xilsaaray, si wafaqsan Dastuurka KMG, sharciga, Xeer-nidaamiyaha HSNQ iyo qawaaniinta kale ee dalka.
2. Shaqaalaha machadka waxa ay noqon karaan shaqaale si rasmi ah machadka uga tirsan iyo kuwo ka tirsan hay'ado dawladeed ee kale oo heshiis ama gacansiin kaliya kula shaqeeya.

### Qodobka 18aad:

### Kaalinta Wasaaradda Amniga Gudaha

1) Wasaaradda Amniga Gudaha ee XFS, waxa ay la soconaysaa waxqabadka, hawlaha iyo horumarka Machadka.
2) Waxa ay machadka ku matashaa fagaarayaasha siyaasadda, waxayna ka taageertaa xiriirada dibadda ee khuseeya hawlaha Machadka.

### Qodobka 19aad:

### Kaalinta Wasaaradda Tacliinta Sare Ee XFS

1) Hubinta iyo rukhsad siinta barnaamijyada tacliinta sare ee Machadka si waafaqsan shuruucda waxbarashada dalka.
2) Tasdiiqinta shahaadooyinka Machadka ee barnaamijyada ay wasaaraddu rukhsadda siisay.

### Qodobka 20aad:

### Kaalinta Hay'adda Sirdoonka & Nabasugidda Qaranka

Kaalinta Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka waa sida soo socota:

1) Machadku waa mid ka mid ah hay'adaha Qaran ee ku mataanaysan Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (HSNQ), isla markaana hoos imaanaya Agaasimaha Guud ee

HSNQ, si waafasan Qodobka 44aad ee Sharciga Hay'adda iyo Qodobka 34aad, faqradda 3aad ee Xeernidaamiyaha HSNQ.

2) HSNQ waxay masuul ka tahay amniga, masuuliyiinta iyo martida Machadka.
3) Machadku waxa uu HSNQ u qabanayaa adeegyada tababarrada, cilmibaarista, talasiinta iyo hawlaha ay Machadka uga soo baahato shaqadiisana xiriir la leh, si waafaqsan qorshe hawleedka Machadka.

## Qodobka 21aad:

## Deeqaha Waxbarasho ee Machadka

1. Guud ahaan, Machadku wuxuu bixinayaa deeqo waxbarasho, si waafaqsan Xeer-nidaamiyahaan iyo xeer-hoosaadkiisa.
2. Deeqaha waxbarasho ee Machadku bixiyo, HSNQ waxa ay ku yeelanaysaa qoondo joogta ah oo dhan soddon iyo shan (35) kursi sanad kasta.
3. Laamaha kale ee dawladda oo ay ugu horreeyaan talisyada ciidamada waxay deeqaha Machadku bixiyo ku yeelanayaan qoondo sanadle ah, Golaha sare ee machadka ayaana jaangoynaya.
4. Golaha sare ee Machadku wuxuu go'aamin karaa in deeq waxbarasho la siiyo arday aan Soomaali ahayn.
5. Barnaamij tacliineed kasta ee machadku bixiyo ardayga kaalinta koowaad ka gala imtixaanka semesterka koowaad waxa uu xaq u yeelanayaa in laga cafiyo lacagta waxbarashada ee semesterka ku xiga kan uu kaalinta ka galay.
6. Ardayga kaalinta labaad ama seddexaad ee Semesterka galana, waxaa laga cafinayaa 70% lacagta semesterka ku xiga kan uu kaalinta ka galay.
7. Ardaygii faafiya semesterkii ugu yaraan shan (5) qormo-cilmiyeed ama soo saara labo cilmi-baaris oo waafaqsan hannaan cilmi-baariseed oo sax ah xiriirna la leh takhasuskiisa, waxaa laga cafinayaa 60% lacagta waxbarasho ee Semester-ka xiga.
8. Ardaygii soo gudbiya shan (5) qormo-cilmiyeed oo uu horay u sameeyay, isdiiwaangelintiisa ka dib, aqoon fiicanna u leh afka English-ka ama Carabiga waxaa laga cafinaayaa 50% lacagta hal semester.
9. Agaasimaha Machadku wuxuu xaq u leeyahay in uu bixiyo deeq waxbarasho oo gaaraysa toban (10) xubnood sanadkiiba.

## Qodobka 22aad:

## Deeqaha Waxbarasho ee Dibadda

Deeqaha waxbarasho ee uu Machadku ka helo dalka dibaddiisa waxaa bixintooda lagu saleynayaa arrimaha soo socdo:

1) Deeqaha waxbarasho ee Machadku ka helo dalka dibaddiisa, waxaa la siinayaa xubnaha HSNQ iyo dadka laamaha kale ee dawladda ka socda ee Machadka dhigta ama horay u soo dhigtay, deeqaha waxbarasho ee sida gaarka ah ugu habboon shaqada HSNQ waxaa looga faa'ideynayaa xubnaha HSNQ.

2) Deeqaha waxbarasho ee dibadeed waxaa la waafajinayaa shuruudaha ay dajisay jihada deeqada bixisay.

3) Golaha sare ee Machadka ayaa go'aaminaya qorshaha iyo hannaanka bixinta deeqaha waxbarasho ee dibadda, waxaana fulinaya Golaha tacliinta Machadka.

## Qodobka 23aad:

## Dhaqangalka Xeerkan

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay ansixiyaan Golaha Wasiirrada JFS, kadibna uu Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS uu ku soo saaro Xeer Ra'iisulwasaare, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.